

Xafiiska Hantidhowrka Guud



Dowlad Goboleedka Galmudug ee
Soomaaliya

Warbixinta Hantidhowrka Sanadlaha ah
ee Sannad Maaliyadeedka 2019

Waxaa Baarlamaanka Loo Soo Bandhigay 5ta
Oktobar 2021

Warqadda Faafinta



5^{ta} Oktobar 2021

Guddoomiyaha Baarlamaanka Dowlad-goboleedka

Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya, Dhuusamareeb, Soomaaliya

Mudane Guddoomiye

Iyada oo la raacayo qaybta 32(3) ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka (PFM) ee 2017 iyo qaybaha 30aad, 32aad iyo 33aad ee Sharciga Hantidhowrka ee 2018 ee Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya (GSS), ayaa waxaan ku faraxsanahay in aan kuu soo gudbiyo warbixinteyda ku saabsan xisaabaha Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya ee sannad maaliyadeedkii dhammaaday 31ka Disembar 2019 si loo horgeeyo Baarlamaanka Dowlad-goboleedka.

Mahadsanid,

Xaashi Cusmaan Maxamed
Xafiiska Hantidhowrka Guud
Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya.

Tusmada

1. Erayada La Isku Gaabiyay	3
2. Bayaanka Xafiiska Hantidhowrka Guud	4
3. Nuxurka Warbixinta oo Kooban	5
3.1 Doorka OAG.....	5
3.2 Ra'yiga Hantidhowrka Guud	5
3.3 Waxyaabihii Lagu Ogaaday Hantidhowrka (Baarista) oo Kooban.....	6
3.4 Gunaanad.....	10
4. Hordhac.....	11
4.1 Waajibbaadkeenna iyo Madax-bannaanideenna	11
4.2 Horumarka Ilaa iyo Hadda La Gaarey	11
4.3 Caqabadaha	12
4.4 Mahadnaq.....	12
5. Waxyaabihii La Oggaaday oo Faahfaahsan – Hantidhowrka (Baarista) Sannad Maaliyadeedka (FY) 2019	13
5.1 Kaash iyo Xisaabo Banki.....	13
la furey oo la joogteeyay kana baxsan xisaabta TSA.	13
5.2 Dakhlaga	14
5.3 Khiyaanno.....	16
5.4 Lacag-bixinnada	17
5.5 Wax-soo-iibsiga	17
5.6 Hantida aan muddo gaaban la caddeysan karin (Non-current assets).....	18
5.7 Shaqo-qorista	18
5.8 Miisaaniyad	19
5.9 Hantidhowrka (Baaraha) Gudaha	19
6. La-socoshada Soo-jeedimada Hantidhowrkii Sannad Maaliyadeedka (FY) 2018.....	19
Lifaaqa 1aad – Bayaamada Maaliyadeed ee Iskudhufan ee La Baarey ee Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya (GSS) Sannadkii Dhammaadey 31ka Disembar 2019 iyo raayiga hantidhowrka	20
Lifaaqa 2aad – Warqadda Maamulka ee Kama Dambeysta ah. Warbixinta Hantidhowrka Madaxa-Bannaan Ee Ku Saabsan Baaritaanka Dowlad-Goboleedka Galmudug Ee Soomaaliya (GSS) ee Sannadkii Dhammaadey 31ka Dismabar 2019.	21

1. Erayada La Isku Gaabiyay

Erayga La Isku Gaabiyay	Ereyada oo Kaamilan
CPO	Ballanqaadka Amarka Lacag-bixinta
CSC	Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah
DG	Agaasimaha Guud
FMIS	Nidaamka Maareynta Maaliyadda Maamulka
FY	Sannad Maaliyadeed
GSS	Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya
ID	Aqoonsi
ICT	Tiknoolajiyadda War-isgaarsiinta iyo Macluumaadka
IPSAS	Jaangooyada Caalamiga ah ee Xisaabaadka Waaxda Dowladda
ISSAI	Jaangooyooyinka Caalamiga ah ee Hay'adaha Hanti-dhowrka Sare
IT	Tiknoolajiyadda Macluumaadka
MOF	Wasaaradda Maaliyadda
NGO	Urur Aan Dowli Ahayn
OAG	Xafiiska Hantidhowrka Guud
PFM	Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha
PREMIS	Maareynta Kheyraadka Dadweynaha ee Soomaaliya
RMS	Nidaamka Maareynta Dakhliga
SAI	Hay'adda Hantidhowrka Sare
TSA	Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda
TD	Agaasimaha Waaxda Khasnadda
UNDP	Barnaamijka Horumarinta ee Qaramada Midoobay
USD	Doolarka Mareykanka

2. Bayaanka Xafiiska Hantidhowrka Guud

Waxaannu sannahadii la soo dhaafey baaritaanno maaliyadeed iyo mid u-hogaansamidba ku sameynay xisaabaaadka maamulka ee GSS. Waxaannu aqoonsaney meelo u baahan in wax laga beddelo oo la sii wanaajiyo waxaanna annaga oo aad ugu taxaddareyna soo saarney soo-jeedimo la taaban karo oo ku saleysan waxyaabihii aynu ku oggaaney baaritaankeenna. Soo-jeedimadu waa qayb muhiim ah oo ka mid ah warbixinnada baaritaankeenna/hantidhowrkeenna. In la dhaqangeliyo waa muhiim si loo sii wanaajiyo oo loo dardargeliyo bixinta barnaamijyada iyo adeegyada kharash ahaan taabogalka ah ee loogu talagalay dadka Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya.

Aqoonsashada arrimaha jira iyo bixinta talooyinka soo-jeedinta ah waa keliya tallaabada ugu horreysa. Shaqada dhabta ahi ayaa bilaabata marka kuwa mas'uuliyaha haya, ay qaadaan tallaabo lagu dhaqangelinayo talooyinkii aynu soo-jeedinay. Sababtan daraadeed ayaa waxaa jira qayb muhiim ah oo ka mid ah shaqadeenna oo ah in aannu dabagalno ama la-soconno soo-jeedimadii lagu sameeyay hantidhowrkii ama baaritaankii hore, si loo qiimeeyo horumarka laga gaarey tallaabooyinkii aynu horey u soo-jeedinay.

Xafiiska Hantidhowrka Guud (OAG) ayaa si adag waxaa uga go'an in uu si ficcan gacan uga geysto sidii looga gudbi lahaa caqabadaha hor yaalla hannaanka xakameynta iyo maareynta maaliyadaha ee aad iyo aadka looga taxaddaro. Waxaannu sii wadi doonnaa in aan sii joogno oo aan sii bixinno aragtiyo ku saabsan sababaha asalka ah ee keena deegaannada xakameynta/kontaroolka gudaha ee dabacsan ah.

Hawlaha waxaa ay ka koobnaan doonnaa jawaab-celin waqtigii loo baahnaa lagu sameeyo, iyo talooyin ku saabsan dad ku filnaanshaha ballanqaadka ay qaadaan dhammaan daneeyayaasha.

Waxaan sidoo kale dooneynaa in aan u mahadnaqno hawladeennada ka shaqeeya arrimaha horumarinta, gaar ahaan kooxda PREMIS, oo sii wadey in ay daneeyso adkeynta kartida hawlgalka Xafiisyada Hantidhowrka Guud (OAGs) ee Dowlaha Xubnaha Ka ah Dowladda Federaalka (FMS).

Waxaan si kal iyo laab ah ugu mahad-celinayaa dhammaan hawladeennada Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya (GSS-OAG) oo si joogto ah ugu heelanaa waaliyaabkooda iyo mas'uuliyadooda iyagoo duruufo adag ku jira.

3. Nuxurka Warbixinta oo Kooban

Nuxurka warbixintan ee kooban ayaa wuxuu bixinayaa guudmarka waxyaabahii ugu muhiimsanaa ee lagu oggaaday warbixintan.

3.1 Doorka OAG

Annaga oo ah Hay'adda Hantidhowrka Sare (SAI) ee Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya (GSS), waajibaadkeenna dastuuriga ah waa xaqiijinta maaliyadaha dowladda in si sharci ah oo taabogalk ah loogu isticmaalo adeeg bixinta. Taa macnaheedu waa in aanu nahay hay'ad u madax-bannaan ilaalinta maaliyadaha dowladda iyo amniga dhaqaalaha ee Dowlad-goboleedka Galmudug sida lagu sheegay qodobka 67aad ee Dastuurka Galmudug iyo qaybta 7aad ee Xeerka Hantidhowrka ee 2018.

Waxaanu baarnaa oo aan ka warbixinnaa mas'uuliyada ay Dowladdu inoo igmatey ee naga saaran ilaalinta lacagaha la helay, ha ahaato mid laga helay canshuur-bixiyayaasha, deeq-bixiyayaasha ama meel kale, iyo kharashaadka la xiriira ee laga bixiyay maaliyadahan oo ah hab daahfuran, anshax iyo xirfadlenimo ku dheehan. Sidoo kale, waxaanu ka salgaarnaa xaqiiqda heerka hubaalka macquulka ah ee ah in lacagaha dadweynaha ay Dowladda u adeegsato, habka uu soo jeediyay Baarlamaanka, iyada oo loo marayo baaritaanno xirfadeed oo madax-bannaan. Waxaanu daraaseynaa sida iyo haddii maaliyadahan ay si cad oo sax ah ay uga soo warbixisay Dowladda iyo sida loo adeegsado marka loo eego dhaqaalaha, hufnaanta iyo taabogalnimada. Waxaanu ku faafinaa warbixinta hantidhowrka/baaritaanka Faafinta Rasmiga ah waxaanna marka hore u geynaa Baarlamaanka ka-dibna muwaadiniinta u dhashey Dowlad-goboleedka Galmudug iyo daneeyayaasha kale annaga oo xaqiijinayna in ay hal bil gudaheeda ku helaan marka la dhammeeyo warbixinta hantidhowrka sida ku cad qaybta 32(3 iyo 4) ee Xeerka PFM ee 2017.

Sidoo kale, qaybta 30(6) ee Xeerka Hantidhowrka ee 2018 ayaa uga baahan hantidhowrka Guud (AG) in uu warbixintiisa ku soo daro:

- ❖ Ra'yigiisa dhabta ah ee miisaaman ee xisaabaadka dowladda ee isku-dhafaan iyo kuwa kala-soocan;
- ❖ Waxyaabihii la ogaaday ee mugga lahaa iyo soo-jeedimada;
- ❖ Nusqaamaha lagu tilmaamay/sheegay nidaamka kantaroolka gudaha;
- ❖ Faahfaahinnada diiwaannada aasaasiga ah ee aan la joogteyn; iyo
- ❖ Lacago kastoo la bixiyay iyada oo aan la eegin dhaqaalaha ama wixii kooda.

3.2 Ra'yiga Hantidhowrka Guud

Waxaan baarey bayaannada maaliyadda isku-dhafaan ee Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya ee sanadkii dhammaadey 31kii Disembar 2019. Bayaannadan Maaliyadeed ayaa ka kooban Bayaanka Qabashada iyo Bixinta Lacagaah, Bayaanka Isbarbardhiga Qaddarka Miisaaniyadda La Sii Dejiyay iyo Tan Rumoowday, iyo qoraallada bayaannada maaliyadeed oo ay ku jiraan siyaasadaha xisaabaadka mugga leh ee kooban iyo macluumaadka kale ee sharraxaadda ah. Sannadkan ma aanan awoodin in aan helo caddeymo hantidhowr habboon oo ku filan in aan bixiyo aasaaska lagu saleeyo ra'yiga hantidhowrka. Sidaa

daraadeed, annigu ma bixinayo ra'yi ku saabsan bayaannada maaliyadeed. Ra'yiga oo dhammeystiran ayaa laga heli karaa Lifaafa 1aad bogga 1aad.

Sababaha ugu waaweyn ee afeefka la xiriira ra'yiga waa:

- (a) Lacag-bixinno dhan USD 928,610 (oo u dhigma 29% ee guud ahaan lacag-bixinnada) in aaney gebi ahaanba lahayn wax dokumentiyo ah oo taageeraya. Intaa waxaa dheer, lacag-bixinno wadartoodu dhan tahay USD 730,145 (oo u dhigma 23% ee guud ahaan lacag-bixinnada) in aanan si ku filan loo taageerin. Iyadoo aan la helin caddeymo taageeraya suuragal ma ahan in la xaqiijiyo lacag-bixinnadan in si sax ah loogu shaaciyay bayaannada maaliyadeed.
- (b) Lacag-bixinno dhan USD 445,911 oo dheeraad ah (oo u dhigma 14% ee guud ahaan lacag-bixinnada) in lagu taageeray caddeymo dokumenti leh. Hase-yeeshee, kuwan waxaa si khaldan loogu kala-soocay bayaannada maaliyadeed. Lacag-bixinnadan sida khaldan loo-soocay ayaa waxaa ka mid ah; qaddar lacageed oo guud ahaan dhan USD 428,000 oo ay xadeen Agaasimahii hore ee Waaxda Khasnadda iyo siyaasiyiin. Lacag-bixinnadan ayaa si aan sax ahayn waxaa loogu sheegay in ay yihiin kharashka hantida aan maaliyadda ahayn (dhismeyaal la deggan yahay) qoraalka 14aad ee bayaannada maaliyadeed.
- (c) Baaritaankeyga waxaa lagu aqoonsadey 25 xisaabo/akoonno banki furan kana socda hawlgallo kuwaas oo ka baxsan Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda (TSA). Waxaan awoodi waayay in aan helo caddeymo muujinaya tirada lacagta taalla ama ku jirta xisaabahaas marka ay taariikhdu ahayd 31^{ka} Disembar 2019 ama macaamulaadka dhacay guud ahaan sannad maaliyadeedkii 2019. Tirada lacagta taalla ee ku jirta xisaabahan sannadka dhammaadkiisa ama macaamulaadka sannadka oo dhan ka dhacay midkoodna hadda laguma sheegin bayaannada maaliyadeed ee qabyo-qoraalka ah.

3.3 Waxyaabihii Lagu Ogaaday Hantidhowrka (Baarista) oo Kooban

Kaash iyo banki

Waxaa jira Buugga Habraacyada Xisaabaha Bankiga oo dhaqangal ah. Haseyeeshee, lama raaco waxaanna jirta halis ah in wasaaradaha dowlad-goboleedka ay furteen xisaabo banki iyaggo aanaan haysan oggolaanshaha qoraalka ah ee horey looga soo qaato Wasaaradda Maaliyadda waxayna ka hawlgalayaan xisaabahan ka baxsan Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda (TSA). Dhammaan xisaabaha bankiga ee ka baxsan Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda (TSA) waa in ay ka hoos shaqeeyaan xisaabta TSA si loo yareeyo halista in wax la khiyaameeyo iyo si gacan looga geysto si lagu qanci karo in ay dowladdu u xaqiijiso ilaalinta qulqulka ama sunsunka lacagaha kaashka ah. In kasta oo deeq-bixiyayaashu ay mararka qaarkood ku adkeystaan in la helo xisaabo banki oo uu leeyahay mashruuc gaar ah, haddana waa muhiim si loogu adeegsado kantarool dhinaca maareynta ah iyo ahdaaf la xiriira hantidhowrka in tirada lacagaha ku jira xisaabahan, iyo macaamulaad kasta oo iyaga loo marayo, in la geliyo nidaamka FMIS. Diiwaanka

bankiga ayaa sidoo kale loo baahan yahay in si buuxda loo buuxiyo si ay uga mid noqdaan dhammaan xisaabaha bankiga ee dowladda. Waa suuragal in la beddelo faahfaahinnada xisaabta bankiga, sida saxiixyada idman/la oggol yahay. Si kastaba ha ahaatee, dowladda waa in ay xaqiijiso haddii saxiixayaasha la beddelo, in foomka ku habboon la buuxiyo, loo diro Wasiirka si uu u soo ansixiyo iyo in diiwaanka bankiga iyo nidaamka FMIS sida ku habboon wax looga beddelo ama in la joogteeyo.

Dakhliga

Inkasta oo waxqabadka dakhliga ee dowladda uu soo hagaagay, haddana waxaa weli jira arrimo la xiriira diiwaangelinta iyo iswaafajinta macaamulaadka dakhliga. Si loo sii wanaajiyo maareynta dakhliga, kala-soocidda waajibaadka Waaxda Dakhliga oo hufan waa in la hirgeliyaa marka loo yimaado diiwaangelinta macaamulaadka dakhliga ee lagu diiwaangeliyo nidaamyada RMS iyo FMIS, kaashka bankiga ku dhacay ee la qabtay iyo iswaafajinta qaddarta lacagta ee la ururiyay. Hadda, GSS ayaa waxay lacago deeq ah ka heshaa deeq-bixiyeyaal badan qaarkood ayaa lagu sheegin bayaannada maaliyadeed. NGO-yo badan ayaa ka hawlgala gudaha Dowlad-goboleedka Galmudug (GSS) balse uma diiwaangashanna Wasaaradda Qorsheynta; keliya hal NGO ayaa bixisay lacagaha diiwaangelinta sannad maaliyadeedkii 2019.

Lacag-bixinnada

Marka lacag la bixinayo, si kasta oo ay u yar tahay amaba u badan tahay, waxaa muhiim ah in la raaco hannaanka ku habboon sida ku xusan sharciyada iyo xeerndaamiyeyaasha khuseeya. Intii lagu guda jiray baaritaanka ayaa waxaannu oggaaney lacag qaddarkeedu dhan yahay USD120,000 in uu xaday Agaasimihii hore ee Waaxda Khasnadda. Waxaa intaa dheer, lacago kale oo la bixiyay, sida muuqata la siiyay siyaasiyiin, in aanan la taageeri karin waxayna u badan tahay in sidoo kale lacagtan la xaday. Waxaa muhiim ah Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya (GSS) in ay isku-daydo in ay dib u soo ceshato lacagahaasi, oo ayna si buuxda ugu sheegto dhacdooyinka hab cad oo daahfuran bayaannada maaliyadeed ee sannad maaliyadeedka 2019, iyo in ay sii wanaajiso nidaamyada kantaroolka si aysan mar kale mustaqbalka u dhicin dhacdooyinkaasi oo kale iyo kuwo la mid ah. Weli waxaa sii socda in si aad ah loogu tiirsan yahay lacag-bixinnada kaashka ah in kasta oo xeerndaamiyeyaashu ay sheegayaan in wareejinta lacagta ee bankiga in la isticmaalo. Tani waxay u taagan tahay khatar weyn oo khiyaanno ah marka loo eego lacag-bixinnada la mid ah ee elektaroonig ahaanta loo bixiyo. Dowladdu waa in ay ku soo rogto xaddidaad heer sare ah isticmaalka lacag-bixinnada kaashka ah, kuwa wax laga soo iibsano lacagaha waa in loo marsiiyo xisaabaha bankiga. Marka lacago la bixinayo, aad iyo aad ayay muhiim u tahay in caddeymo laga hayo tusaale ahaan dokumentiyo taageeraya sida: qaansheegta, ogeysiiska wareejinnada lacagta ee bankiga, waraaqaha guddoonka alaabta, iyo qandaraasyada. Nasiib-darrose, qaar badan oo ka mid ah lacag-bixinnada dowladda ayaa la sii bixiyaa iyada oo aan jirin dokumentiyada noocaas ah oo taageeraya. GSS waa in ay ka haysaa dokumentiyo taageeraya dhammaan macaamulaadka maaliyadeed oo waa in aan la sameyn wax lacag-bixinno ah iyadoo aan si habboon loo eegin caddeymaha taageeraya qaddarka iyo dabciga macaamulaadka sababta u ah.

Wax-soo-iibsiga

Baaritaanadii ugu dambeeyay ma lahayn wax horumar ah oo muuqda oo laga sameeyay hannaanka wax-soo-iibsiga ee dowlad-goboleedka. Gaar ahaan:

- lama raacin tilmaamaha hannaanka wax-soo-iibsiga ;
- ma jiro qorshe wax-soo-iibsi sannadle ah;
- dokumentiyada asalka ah lama hayo; iyo
- ma jiraan guddiyo ay leedahay waaxda wax-soo-iibsiga.

GSS waa in ay raacdo tilmaamaha hanananka wax-soo-iibsiga si ay uga fogaato u hoggaansamid la'aanta Xeerka PFM ee 2017 iyo si loo yareeyo halisaha mugga leh ee khiyaannada iyo xatooyada iyada oo la hubinayo qiimaha ugu badan ee lacagta in lagu gaaro kheyraadyada iyo dhaqaalaha dowlad-goboleedka ee xaddidan.

Hantida

Aad iyo aad ayay muhiim u tahay in la ilaaliyo hantida dowladda iyo in la raaco habraacyada iyo siyaasadaha hantida. Si kastaba ha ahaatee, hantida dowladda inteeda badani kuma diiwaangashana hannaanka maareynta hantida; diiwaanka oo aan buuxin awgeed, suuragal ma ahan in la qabto hawsha joogtada ah ee xaqiijinta dhabta ah. Maadaama aysan jirin kantaroollada aasaasiga ah ee maareynta hantida dowladda, waxaa jirta halis aad iyo aad u daran oo keeni karta in hantida dowladda lagu takrifalo ama in loo adeegsado si aanan habboonayn.

Shaqo-qorista

Intii aan ku guda jirnay dib-u-eegisteenna ayaa waxaannu aqoonsannay hal guddi oo qaabilsan shaqo qorista waxaanna la soo-jeediyay in uu ka mid noqdo sarkaal sare oo ka tirsan xafiiska hantidhowka guud (OAG) ka-dibna saxiixiisa ayaa la bixiyay. Nasiib-darrose, sarkaalkan kama uusan qaybgelin hannaankan shaqo-qorista waxayna u muuqataa in saxiixiisa la been-abuuray. Baaritaan buuxda waa in lagu sameeyaa oo waa in la qaadaa tallaabo lagu saxayo.

Miisaaniyad

Miisaaniyaddu waa laf-dhabarka hawlaha dowlad-goboleedka oo dhan. Meertada diyaarinta miisaaniyadda waa in ay ka koobnaataa laba weji; midka koowaad waa diyaarinta qaabka guud ee miisaaniyadda kan labaadna waa diyaarinta miisaaniyadda sannadlaha ah oo faahfaahsan. Sannad Maaliyadeedka 2019, Wasaaradda Maaliyadda ma diyaarin warqadda qaabka guud ee misaaniyadda. Waxaannu ku talinaynaa in GSS ay diyaariso dhammaan dokumentiyada miisaaniyadda iyo in ay mustaqbalka u hoggaansanto habraacyada miisaaniyadda sida ku cad Xeerka PFM ee 2017.

Hantidhowka (baaraha) gudaha

In kastoo warbixinnada hantidhowka (baaraha) gudaha la soosaaro ka-dibna loo gudbiyo maamulka sare, ma jiro nidaam lagu la soconayo in talooyinkii la soo-jeediyay la hirgeliyay iyo in kale. Maamulka waa in ay si joogto ah ula socdaan warbixinnada hantidhowka (baaraha) gudaha si loo xaqiijiyo in talooyinkii la soo-jeediyay loo hirgeliyay sidii loogu talagalay.

La-socoshada Soo-jeedimada Hantidhowrka (Baarista) Sannadkii Hore

Intii lagu guda jiray hantidhowrka/baarista waxaannu dabagal ku sameynay dhammaan soo-jeedimada hantidhowrka/baarista ee la soo-jeediyay sannadadii hore. Xaaladda ay hadda ku sugan yihiin soo-jeedimadan oo kooban ayaa lagu muujiyay shaxda hoose:

Xaaladda	Tirada Soo-jeedimada
La Hirgeliyay	1
Qayb Ahaan La Hirgeliyay	1
Aan La Hirgelin	11
WADARTA GUUD	13

Sidii sannadahii hore oo kale, horumarka laga gaarey hirgelinta soo-jeedimada hantidhowrka/baarista ayaa ahaa mid aad u yar. Waa muhiim in horumarkan uu horey u sii socdo. Si ujeedkan loo gaaro, Wasaaradda Maaliyadda (MOF) waa in ay hirgelisaa hab rasmi ah oo lagu qaadi karo tallaabooyin habboon oo lagu saxayo.

3.4 Gunaanad

Kantaroolada ka jira GSS si weyn uma sii hagaagin sannadihii la soo dhaafay. Meelaha ugu waaweyn ee uu walaaca ka taagan yahay ayaa ah xisaabaha bankiga ee ka baxsan TSA, ku takrifalka maaliyadaha, lacag-bixinnada kaashka ah ee badan iyo diiwaanka hantida oo aan buuxsanayn. Inta badan meelahan dowladda waxay leeyihiin qaab guud ee sharci oo faahfaahsan; haseyeeshee, inta badan shuruudahan sharciga ah lama raaco. Waxaa loo baahan yahay in si joogto ah loo korjoogteeyo u hoggaansamidda habraacyadan kantaroolka ee aasaasiga ah oo leh cawaaqib-xumo ka dhallan kara sharci-jebinta soo noqnoqota. Maadaama xisaabaha bankiga ee aan la shaacin lagu darin bayaannada maaliyadeed (iyada oo macaamulaadka qabashada iyo bixinta lacagaha sannad maaliyadeedka la soo marsiiyo xisaabaha), si buuxda looma shaacin tirada lacagaha lagu takrifaley, lacag-bixinnada si khaladka ah loo soocay, si buuxdana looma shaacin deeqaha laga helay hay'adda UNDP, waxaa shaki weyn ku jira shaacinta lagu muujiyay bayaannada maaliyadeed ee qabyada ah. Waa lagama maarmaan in Xafiiska Hantidhowkra Guud (OAG) uu soosaaro afeef la xiriirta ray'iga hantidhowrka/baarista.

4. Hordhac

Kalsoonida ay muwaadiniinta ku qabaan hay'adaha dowliga ah ayaa dib loo soo celin karaa iyadoo kheyraadka aan badneyn loo adeegsan karo siyaabo lagu kordhinayo qiimaha-lacagta iyo bixinta natiijooyin tayo leh. Si loo fuliyo doorkan, muwaadiniinta ayaa sidoo kale u baahan caddeymo la isku halleyn karo oo ku saabsan sharciyada iyo barnaamijyada shaqeeya iyo kuwa aan shaqeyn. Xafiiska Hantidhowrka Guud (OAG) oo ah hantidhowraha dibedda ee waaxaha dowladda, ayaa wuxuu qabtaa shaqo muhiim ah oo lagu taageerayo doorarka kuwa loo igmaday maamulka hay'adaha waaxda dowladda iyo daneeyeyaasha kale marka loo eego la-socodka, fahamka iyo aragtida dheer.

4.1 Waajibaadkeenna iyo Madax-bannaanideenna

Qaybta 28(1) ee Xeerka Hantidhowrka 2018 ayaa wuxuu koobayaa mas'uuliyadda ay xafiiska hantidhowrka guud (OAG) ka saaran tahay in uu baaritaan ku sameeyo xisaabaadka dhammaan hay'adaha guud ee Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya (GSS). Iyada oo la raacayo qodobbada qaybta 32(3) ee Xeerka PFM ee 2017 iyo qaybta 30(4) ee Xeerka Hantidhowrka ee 2018, Hantidhowrka Guud waa in uu Baarlamaanka u soo gudbiyaa warbixinta Hantidhowrka Sanadlaha ah afar bilood gudahooda ka-dib marka uu Bayaannada Maaliyadeed ka helo Wasiirka Maaliyadda. Guddoomiyaha Baarlamaanka waa in uu ku horgeeyo dhammaan warbixinnada hantidhowrka Golaha Shacabka Dowlad-goboleedka shan maalmood oo kuwa shaqada ah gudahooda ka-dib marka uu helo warbixinta sida ku cad qaybta 33(1) ee Xeerka Hantidhowrka 2018.

Madax-bannaanida Hantidhowrka Guud waa sifada aasaasiga ah ee ay leedahay Hay'adda Hantidhowrka Sare (SAI) oo si fiican u shaqeynaysa oo u hawlgaleysa si waafaqsan Jaangooyooyinka Caalamiga ah ee Hay'adaha Hanti-dhowrka Sare (*International Standards of Supreme Audit Institutions* (ISSAIs)). Qaybta 67 aad ee Dastuurka Galmudug wuxuu dhigayaa in OAG uu yahay hay'ad madax-bannaan shaqadiisa ugu weynna ay tahay in uu noqdo Hantidhowrka dibedda ee Dowlad-goboleedka. Intaa waxaa dheer, Qaybta 7(1) ee Xeerka Hantidhowrka ee Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya in ay si gaar ah ula xiriirto Hantidhowrka-Guud in uu u madax-bannaan yahay gudashada mas'uuliyadiisa.

4.2 Horumarka Ilaa iyo Hadda La Gaarey

Baaristan ka hor, hawladeennada OAG weli maysan lahayn waayo-aragnimada loo baahan yahay si ay baaritaan buuxda ugu sameeyaan bayaanka maaliyadeed taageero la'aan. Baker Tilly, oo ah shirkad hantidhowr oo si gaar ah loo leeyahay, ayaa hoggaanka u qabatey oo sameysay hantidhowrka sannad maaliyadeedka ee saddexdii sano ee la soo dhaafay. Hawlwadeennada xafiiska hantidhowrka guud (OAG) ayaa si tartiib tartiib ah ula wareegay mas'uuliyado badan intii lagu guda jiray hantidhowradan waxayna kororsadeen waayo-aragnimo iyo aqoon ku saabsan hantidhowrka. Waxaa sharaf inoo ah in Xafiiska Hantidhowrka Guud ee Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya (GSS-OAG) uu sameeyay haddana dhammeystiray hantidhowrka sannadkii 2019 iyadoo aan wax taageero ah looga baahan waaxaha gaarka loo leeyahay ee sameeya baaritaannada hantidhowrka.

4.3 Caqabadaha

Ujeedooyinka ugu waaweyn ee qorshaha istiraatiijiga ah ee xafiiska OAG ayaa qaybtiisa dhisidda kartida xirfadeed waxaa ka mid ah, in loo baahan yahay hawladeenno ka shaqeeya oo hantidhowrka u tababaran oo aqoon sare leh. Si shuruudan loo buuxiyo, kheyraadyada ku habboon waa in la bixiyaa si loo daboolo baahiyada tababarka iyo hawlgalka meelaha gaarka ah ee hantidhowrka. Cudurka COVID-19 ee caalamka oo dhan ka dillaacay ayaa wuxuu saameyn xun ku yeeshay dhammaan hawlihii ka socday dalka oo dhan. Wuxuu abuuray xaalad ku gedaaman isku-jirka dhowr nooc oo cawaaqib-xumo ah sida; xannibaadyo la soo rogay, kala-fogaanshaha bulshada, xiridda xudduudaha, isbeddelo carqaladeeyay ganacsiyada gaarka loo leeyahay iyo cabsi saameeyay qoysaska iyo hawlaha dhaqaale. Cudurka safmarka ah ee COVID-19, ganacsiyada oo keliya saameyn xun kuma yeellan, wuxuu sidoo kale si weyn u curyaamiyay shaqadii xafiiska hantidhowrka guud (OAG). Sannad maaliyadeedkan 2020, waxaa dib u dhacay tiro badan oo ka mid ah aqoon-kororsiyadii iyo hawlihii inoo qorsheysnaa.

Waxaannu aaminsannahay in aqoonsashada arrimaha jira iyo bixinta soo-jeedimada in ay tahay tallaabada ugu horreysa oo keliya. Shaqada dhabta ahi ayaa bilaabata marka kuwa mas'uuliyadaha haya, ay qaadaan tallaabo lagu dhaqangelinayo talooyinkii aynu soo-jeedinay. Sababtan daraadeed ayaa waxaa jira qayb muhiim ah oo ka mid ah shaqadeenna oo ah in aannu dabagalno ama la-soconno soo-jeedimadii lagu sameeyay hantidhowradii/baaritaannadii hore, si loo qiimeeyo horumarka laga gaarey tallaabooyinkii aynu horey u soo-jeedinay. Markaa ka-dib waxaa Baarlamaanka, iyo daneeyayaasha kale looga fadhiyaa in ay gacan ka geystaan hubinta in dowladdu ay qaaddo tallaabo ku filan oo wax looga qabanayo arrimaha hantidhowrka ee la tilmaamay.

4.4 Mahadnaq

Xafiiska OAG wuxuu fursaddan ugu faa'iideysanayaa in uu ku qiro sida shaqaalaheenna ay ugu heellanaayeen shaqadooda kuwaas oo waxyaabihii ay ku biirriyeen u suurageliyay in xafiiska OAG uu sii wado joogteynta xirfadlenimadiisa.

Ugu dambeyn, waxaan u mahad-celineynaa Baarlamaanka, Wasaaradda Maaliyadda iyo Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah, kuwaas oo si uun gacan uga geystay shaqada xafiiska hantidhowrka guud (OAG). Waxaa sharaf weyn inoo ah in aan soo bandhigno Warbixinta Sannadlaha ah ee Hantidhowrka-Guud ee 2019.

5. Waxyaabihii La Oggaaday oo Faahfaahsan – Hantidhowrka (Baarista) Sannad Maaliyadeedka (FY) 2019

Faahfaahin dheeraad ah oo ku saabsan dhammaan waxyaabihii la oggaadey ayaa laga heli karaa Lifaafa 2aad ee warqadda maamulka.

5.1 Kaash iyo Xisaabo Banki la furey oo la joogteeyay kana baxsan xisaabta TSA.

Intii lagu guda jiray sannad maaliyadeedkii 2019, wasaarado kala duwan ayaa furtay xisaabo banki (25 xisaabo ayaa la tilmaamay) iyaga oo aan haysan oggolaanshaha hore ee qoraal ah ee laga soo qaato Wasaaradda Maaliyadda waxayna ka hawlgalayeen xisaabahan oo ka baxsan xisaabta TSA.

In kastoo annu aqoonsanney in xisaabahan ay jiraan, haddana waxaan awoodi waynay in aan helno caddeymo muujinaya tirada lacagta taalla ama ku harsan markii ay taariikhdu ahayd 31^{ka} Disembar 2019 ama macaamulaadka dhacay guud ahaan sannad maaliyadeedkii (FY) 2019. Tirada lacagta taalla ee ku jirta xisaabahan sannadka dhammaadkiisa ama macaamulaadka sannadka oo dhan midkoodna hadda laguma sheegin bayaannada maaliyadeed ee qabyo-qoraalka ah. Lacagaha kaashka ah ee ku jira xisaabaha bankiga ee aan ahayn xisaabta TSA waxaa laga yaabaa in wax isdaba-marin lagu sameeyo, la xado ama lagu takrifalo iyadoo loo adeegsanayo ujeeddooyin shakhiyeed.

Maamulka iyo mas'uuliyiinta dowlad-goboleedka waa in ay xaqiijiyaan in la xiro waqtiga ku habboon dhammaan xisaabaha bankiga ee hadda ka baxsan xisaabta TSA haddii ay u arkaan kuwa aanan loo baahnayn. Haddii xisaabahan loo baahan yahay (tusaale ahaan, sida shuruudaha ka yimaada deeq-bixiyeyaasha) waa in la gacanta la hayaa iyadoo la hoos geynayo xisaabta TSA, waxaanna ku waajibaya kantaroollada dowladda ee caadiga ah.

Beddelaad aan la oggolaan oo lagu sameeyay saxiixayaasha xisaabta bankiga

Waxaan oggaaney in saxiixayaasha xisaabta bankiga la beddelay iyadoo aan la buuxin foomka beddelaadda saxiixaha. Sidoo kale xogta Nidaamka FMIS iyo diiwaanka bankiga lama joogteyn oo lama gellin isbeddelada la sameeyay.

Haddii dowladdu ay u baahan tahay in ay wax isbeddel ah ku sameyso saxiixayaasha xisaabaha bankiga ee GSS, foomka beddelaadda saxiixaha waa in la buuxiyaa ka-dibna loo gudbiyaa Wasiirka Maaliyadda si uu u soo ansaxiyo. Sidoo kale Nidaamka FMIS iyo diiwaanka bankiga waa in si habboon wax-ka-beddel loogu sameeyaa.

Diiwaanka bankiga ee aan buuxin

Bisha Disembar ee sannad kasta, Qaybta Maamulka Lacagta Kaashka ah ee Wasaaradda Maaliyadda waa in ay dib-u-eegis ku sameysaa diiwaanka bankiga iyo dhammaan xisaabaha bankiga ee dowladda si ay u xaqiijiso magacyada bankiga iyo lambarrada xisaabta ee dhammaan xisaabaha bankiga ee ku diiwaangashan magaca GSS sida lagu sheegay 8.1 ee Tilmaanta I ee Buugga Habraaca Xisaabta Bankiga. Si kastaba ha noqotee, dib-u-eegistan sannadlaha ah lama sameyn.

Diiwaanka bankiga waa in si buuxdo wax looga beddelaa waanna in lagu qoraa dhammaan xisaabaha bankiga ee dowlad-goboleedka.

5.2 Dakhliga

Intii lagu guda jiray dib-u-eegistii rasiidyada qabashada dakhliga, waxaannu oggaaney in ay jirtay liidashadan ama dabacsanaantan soo socota:

- Waxaannu oggaaney kala duwanaansho u dhaxeeya qaddarka lagu diiwaangeliyay rasiidyada la siiyo canshuur-bixiyeyaasha, qaddarka lagu qoray buugga kaashka, iyo qaddarka lacagta xisaabta bankiga lagu shubay. Sidoo kale, GSS isma waafajiso dakhliga ku qoran rasiidyada, buugga kaashka iyo qaddarka lacagta bankiga lagu shubay, sidoo kalena isma waafajiso farqiga u dhaxeeya Nidaamka Maareynta Dakhliga (RMS) iyo Nidaamka Maareynta Maaliyadda Dowladda (FMIS). Sidaa daraadeed, kala duwanaanshaha, sida kuwii la aqoonsaday intii lagu guda jiray baarista, waa la iska dhaafaa inta la aqoonsado lama saxo. ***Dhammaan dakhliga dowladda waa in la isu waafajiyaa si buuxda oo joogto ah. Kala-duwanaansho kasta ee u dhaxeeya qaddarada lacagta ku qoran buuggaagta rasiidka, buuggaagta kaashka iyo kuwa u diiwaangashan bankiga waa in si buuxdo loo baaro lana qaadaa tallaabo kasta oo lagu saxayo.***
- Laba meelood oo si joogto ah dakhli uga soo xaroodo, billaha sannadka qaarkood ma diiwaangashanna in wax lacag ah laga ururiyay/qaaday. Lama qaadin wax Canshuurta Macaashka Ganacsiga ah bilaha Abriil, Nofembar iyo Disembar ee 2019. Lama diiwaangelin wax Ujuurrooyinka Rakaabka ah intii u dhaxeysay Agoosto iyo Disembar ee 2019. Waa suuragal in lacagahan la qaadayay balse aan lagu shubin xisaabta TSA ama lagu diiwaangelin nidaamka Bisan. ***GSS waa in ay dakhliga ka qaado dhammaan ilaha dakhliga ka soo geli kara sannadka oo dhan.***
- Waxaannu aqoonsanay lambarrada tixraaca ee rasiidyada la qoro in ay ka duwan yihiin lambarrada tixraaca ee rasiidyada laga soo saaro nidaamka RMS. Sidaa daraadeed, way adag tahay in la iswaafajiyo labada rasiido. ***GSS waa in ay si habboon u adeegsato rasiidyada RMS ee loogu talagalay dakhli ururinta si ay u fududaato raadraaca lambarrada tixraaca.***
- Guud ahaan 11-ka ilaha dakhliga ah ee lagu qeexay Xeerka Dakhliga ee 2018, keliya 3 ilood ayaa laga faa'iideystay intii lagu guda jiray sannad maaliyadeed 2019. 8-da kale ee ilaha dakhliga hadda lagama qaado wax dakhli ah. Kuwan waxaa ka mid ah canshuurta mushahaarka, canshuurta hawladeennada, canshuurta koronto dhallinta/matoorada korontada iyo ujuurrooyinka diiwaangelinta gaadiidka. ***GSS waa in ay ka faa'iideysataa dhammaan ilaha dakhliga ee la heli karo si ay u ballaarisoo meelaha ay canshuurta ka qaado oo ayna gacan uga geysato hubinta bixinta adeegyada muwaadiniinta.***
- Dakhli gaaraya USD 12,690 oo bankiga lagu shubay ayaa waxaa la waayay raadka rasiidyada taageeraya. ***Rasiidyada asalka ah iyo dokumentiyada taageeraya waa in la hayaa si loogu adeegsado kantarool dhinaca maareynta ah iyo ahdaaf la xiriira hantidhowrka, waana in la fayl-gareeyaa iyaga oo fayl kombuyutar ah iyo iyaga oo daabacanba.***

- Waxaan oggaaney in rasiidyada cashuurta ay leeyihiin meelo bannaan oo ay tahay in uu saxiixo sarkaalka diyaarinaya iyo meel bannaan oo loogu talagalay in uu saxiixo sarkaalka xaqiijinaya rasiidyada; xaaladaha qaarkood, waxaannu oggaaney in diyaariyaha iyo xaqiijiyaaba ay yihiin isla hal sarkaal. ***Waa in si habboon loo kala-saaraa waajibaadyada dakhli ururinta.***
- Hay'adda UNDP waxay xaqiijisay qaddarka lacagaha ay siisay GSS intii lagu guda jiray sannad maaliyadeedka 2019. Haseyeeshee, xaqiijintu waxay muujinaysaa in UNDP ay bixisay deeq gaareysa USD 30,000 (doolar) taas oo aanan lagu shaacin bayaannada maaliyadeed. ***Mustaqbalka, dhammaan deeqaha la qabtay waa in lagu diiwaangeliyaa nidaamka FMIS waana in si buuxda loogu shaaciyaa bayaannada maaliyadeed ee sannadlaha ah.***
- NGO-yada ka hawlgalla GSS waa in laga diiwaangeliyaa Wasaaradda Qorshaynta. Si kastaba ha ahaatee, hal NGO oo keliya ayaa inta la diiwaangeliyay bixisay ujuurrooyinka diiwaangelinta ee sannad maaliyadeedka 2019. ***Dhammaan NGO-yada ka hawlgala gudaha GSS waa in ay isdiiwaangeliyaan oo ayna qaataan shahaaddada diiwaangelinta NGO-yada ee ay bixiso Wasaaradda Qorshaynta. Dhammaan lacagaha la qabtay waa in la dhigaa bankiga oo lagu shubaa xisaabta TSA ka-dibna waa in lagu diiwaangeliyaa nidaamka FMIS/bayaannada maaliyadeed.***

5.3 Khiyaanno

Lacag guud ahaan tiradeedu gaareyso USD 550,000 (doolar) ayaa la lunsaday aa isdaba-marin lagu sameeyay intii lagu guda jiray sannad maaliyadeedkii 2019. Wadartan guud waxay ka kooban tahay laba dhacdo, oo kala gaar ah.

Khiyaanno uu ku kacay Agaasimihii hore ee Waaxda Khasnadda

USD 120,000 oo (doolar) ayaa waxaa xaday Agaasimihii hore ee Waaxda Khasnadda. Qaddarka lacagta ayaa waxaa laga soo wareejiyay xisaabta TSA ee bankiga Salaam waxaanna loo wareejiyay xisaab shakhsiyeed iyadoo aan jirin wax oggolaansho ah sida ku cad diiwaannada lagu baarey Waaxda Khasnadda. Maamulka ayaa dhacdadan ku wargeliyay saraakiisha amniga sida la sheegayna, Agaasimaha Waaxda Khasnadda (ee waqtigaasi) inta uu shaqadiisa ka tagey ayaa wuxuu ka cararay dalka. Maamulka, inkasta oo uu soo sheegay khiyaannada kuna wargeliyay xafiiska OAG intii lagu guda jiray shirkii furitaanka iyo guud ahaanba intii uu socday baaritaanka, ayaa wuxuu doortay in qaddarka lacagta isdaba-marinta lagu sameeyay in uu ku sheego in ay tahay kharashka hantida aan maaliyadda ahayn (dhismeyaal la deggan yahay) ee bayaannada maaliyadeed. Tani waa marin-habbaabin cad oo lagu sameeyay xaqiiqooyinka; qaddarada lacagta waxay ahayd in la shaaciyay in la xaday si aan loo marin-habbaabin adeegsadayaa bayaannada maaliyadeed. Waxaa la caddeeyay in khiyaannada la fuliyay iyadoo la adeegsanayo saxiixyo la been-abuuray, si buuxda looga dul-booday kantaroolada jira iyo in maamulka uusan ku lug lahayn ansaxinta jeegagga. Sidoo kale hadda ma jiro qoddob loogu talagalay xaddidaadda ay tahay in ay ansaxiyeen heerarka kala duwan ee mas'uuliyiinta sida, in qaddarada lacagta badan uu ansaxiyo Agaasimaha Guud (DG).

Khayaanno ay ku kaceen Siyaasiyiin

Lacag dhan USD 308,000 (doolar) ayaa bayaannada maaliyadeedka ee qabyo-qoraalka ah lagu sheegay in ay yihiin kharashaadka hantida aan maaliyadda ahayn. Waxaa la caddeeyay in qaddarada lacagta lagu diiwaangeliyay diiwaan ka mid ah nidaamka FMIS iyo sharraxaada, waxaa la tilmaamay in qaddarada lacagta mushahaar iyo gunnooyin ahaan in loo siiyay siyaasiyiin. Ma jiraan wax caddeymo ah oo la bixiyay oo lagu taageerayo kharashka in uu yahay midkood hanti aan maaliyad ahayn ama lacag-bixin la siiyay siyaasiyiin. Waxay u badan tahay macaamil(macaamulaad) khiyaanno ah in uu dhacay. Lacag dheeraad ah oo dhan USD 122,000 (doolar) ayaa bayaannada maaliyadeed ee qabyo-qoraalka ah lagu sheegay in ay tahay lacag-bixinno la siiyay siyaasiyiin. Iyadoo dib loo eegayo bayaannada bankiga, ayaa waxaa la caddeeyay in qaddarada lacagta loo qaybiyay afar shakhsi(qof). Ma jiraan wax caddeymo ah oo la adeegsan karo oo lagu taageerayo in qaddarada lacagta in ay dhab tahay in mushahaar ama gunnooyin ahaan loo siiyay siyaasiyiinta. Waxay sidoo kale u muuqataa in khiyaannada ay sabab u tahay in la sii wado isbeddel uu Wasiirka Maaliyadda ku sameeyay saxiixayaasha bankiga iyada oo aan la raacin nidaamka iyo habraaca sharciga ah.

GSS waa in ay lacagta dib ugu soo ceshataa xisaabta TSA, waajibaadka iyo mas'uuliyadaha muhiimka ah ee la xiriira hannaanka lacag-bixintana waa in loo kala-saaraa shaqaalaha iyo

waaxaha kala duwan. Kuwani waa in ay ka mid ahaadaan xaddidaadda mas'uuliyadaha shaqaalaha waaxda khasnadda ee oggolaanaya, ka shaqeynaya ka-dibna diiwaangelinaya lacag-bixinnada.

5.4 Lacag-bixinnada

Intii lagu guda jiray dib-u-eegisteenna lacag-bixinnada la bixiyay, ayaa waxaannu oggaaney in ay jiraan arrimahan hoos ku xusan:

- Intii lagu guda jiray baaritaankeenna ee lacag-bixinnada la bixiyay, ayaa waxaannu oggaaney in lacag-bixinno guud ahaan gaaraya USD 1,472,624, (oo u dhigma 46% ee guud ahaan kharashaadka) in kaash ahaan lagu bixiyay waxayna kala ahaayeen lacago lagu wareejiyay dowladaha hoose, mushahaaraad la siiyay siyaasiyiin, gunnooyinka ciidanka amniga, iyo kharashaadka cuntada joogtada ah ee la siiyo ciidamada amniga. ***Maamulka ama Mas'uuliyiinta Dowlad-goboleedka waa in uu ku soo roгаа xaddidaad sare isticmaalka lacag-bixinta kaashka ah oo waa in lacag-bixinnada si toos ah loogu diraa xisaabaha bankiga shaqaalaha/kuwa wax laga soo iibsado mar walba oo ay suuragal tahay.***
- Waxaannu oggaaney lacag-bixinno wadartoodu dhan tahay USD 730,145 (oo u dhigma 23% ee guud ahaan kharashaadka) in aanan si ku filan loo taageerin. Intaa waxaa dheer, lacag-bixinno dhan USD 928,610 (oo u dhigma 29%) in aysan gebi ahaanba lahayn wax dokumentiyo ah oo taageeraya. ***GSS waa in ay u hoggaansanto kantaroollada maaliyadeed ee jira si loo diyaariyo oo loo joogteeyo diiwaannada maaliyadeed ee habboon iyo si loo taageero dhammaan lacag-bixinnada baxay. Wax lacag-bixinno ah waa in aan la bixin iyadoo aanan la keenin dokumentiyo taageeraya.***
- Waxaannu oggaaney kharashaad guud ahaan dhan USD 445,911 (oo u dhigma 14% ee wadarta guud ee kharashaadka) in si khaldan loo kala-soocay oo lagu diiwaangeliyay xisaabo khaldan. ***Waxaan kula talineynaa GSS in ay mustaqbalka si habboon u diiwaangeliso oo u kala-soocdo lacag-bixinnada xisaabaha habboon.***
- Marka aynu tijaabinay muunad lacag-bixinno la bixiyay ah, ayaa waxaan ku oggaaney in Waaxda Khasnadda ay buuxinayso hannaanka qoondoynta maaliyadaha, iyadoo aan laga qaybgelin Waaxda miisaaniyadda, iyo sidoo kale ah bixinta lacag-bixinnada dhabta ah. ***GSS waa in ay xaqiijiso in foomka qoondoynta maaliyadaha in ay si sax ah uga soo shaqeyso Waaxda Miisaaniyadda ka hor inta aan la bixin wax lacag-bixinno ah.***

5.5 Wax-soo-iibsiga

Intii lagu guda jiray dib-u-eegistii wax-soo-iibsiga, ayaa waxaannu oggaaney in ay jirtay liidashadan ama dabacsanaantan soo socota;

- Xaalado aanan la raacin Buugga Wax-soo-iibsiga. Xaaladahan waxaa ka mid ah soo-iibsiga cuntooyinka sida joogtada ah loo bixiyo iyo qalab xafiseed loogu talagalay Qaybta Gacan-ka-siinta Ammaanada ee Dibadda Ka ah Hay'adda/External Assistance Fiduciary Section (EAFS).

Waxaan ku talineynaa in GSS ay xaqiijio dhammaan alaabooyinka, shaqooyinka, adeegyada la-talinta iyo kuwa aan la-talinta ahayn in la soo iibiyo iyadoo la adeegsanayo hababka wax-soo-iibsiga ee ku xusan Buugga Wax-soo-iibsiga.

- Waxaannu aqoonsanay GSS in aysan diyaarin qorshaha wax-soo-iibsiga sannadlaha ah. ***GSS waa in ay diyaarisaa Qorshaha Wax-soo-iibsiga Sannadlaha ah ee loogu talagalay dhammaan alaabooyinka, shaqooyinka, adeegyada la-talinta iyo kuwa aan la-talinta ahayn ee loo baahan yahay si loo hirgeliyo mashaariicda loo baahan yahay.***
- Intii lagu guda jiray dib-u-eegista, waxaannu oggaaney dokumentiyada wax-soo-iibsiga ee ay dowladdu bixisay si loo baaro in aysan ahayn nuqullada asalka ah; dhammaantooda waxay ahaayeen nuqullo koobi ah. ***GSS waa in ay gal gelisaa oo ay haysaa dhammaan dokumentiyada wax-soo-iibsiga ee asalka ah iyo dokumentiyada taageeraya iyadoo looga gol-leeyahay ujeeddooyinka hantidhowrka iyo kantaroolka maamulka.***

5.6 Hantida aan muddo gaaban la caddeysan karin (Non-current assets)

Waxaannu oggaaney nusqaamahan soo socda in ay ka jiraan maareynta hantida dowladda:

- Nidaamka maareynta hantida waxaa ku jira oo keliya kombiyuutarro uu bixiyay mashruuca PREMIS. Nidaamka kuma jiraan diiwaannada hantida kale ee ay dowladdu iska leedahay. ***Waxaan ku talineynaa in dhammaan hantida dowladda lagu diiwaangeliyo nidaamka Maareynta hantida sida ku cad Xeerka PFM ee 2017.***
- Soo-tirinta hantida la taaban karo loogu ma sameyn hay'adaha oo dhan ugu yaraan, si sannadle ah. ***Waxaan ku talinaynaa in GSS ay ku sameyso xaqiijin la taaban karo dhammaan hantida ay hayaan, hay'adaha oo dhan, ugu yaraan, si sannadle ah.***
- Hantida lama calaamadin (laguma dhejinin calaamad aan ka go'in). ***Dhammaan hantida GSS waa in si habboon loo calaamadiyaa iyagoo loo yeelayo lambarro gaar ah oo lagu aqoonsado.***
- Intii aan ku guda jirnay wadhadallo aan la yeellanay maamulka Wasaaradda Maaliyadda (MOF), waxaa la soo sheegay in qaar ka mid ah shaqaalahii ray'idka ahaa ee shaqooyinka ka tagey in aysan weli soo celin laabtoobyadii dowladda. Maadaama aan la buuxin diiwaanka hantida suuragal ma ahan in la qiyaaso inta uu khasaaraha la egyahay. ***Waxaan ku talineynaa in dhammaan hay'adaha dowladda in ay hubiyaan shaqaalaha isaga taga shaqada sabab kastaba ha noqotee ama loo dhiibo xil kale in ay soo celiyaan dhammaan hantida dowladda.***

5.7 Shaqo-qorista

Dib-u-eegistii aan ku sameynay faylasha CSC, ayaa waxaan ku aqoonsannay arrimahan soo socda:

- Intii lagu guda jiray baaritaankeenna waxaannu oggaanay ku dhowaad 345 macallimiin, oo ay maalgeliyeen NGO-yo caalami ah, in aan loo qorin si lagu tartamo oo waafaqsan habraacyada ku qoran qaybta 22aad ee Xeerka CSC ee 2017. ***Waxaannu ku talinaynaa in shaqaalaha haya***

xilalka ay maalgeliyaan deeq-bixiyeyaasha in shaqada lagu qoro iyadoo loo marayo hannaanka shaqo-qorista CSC ee caadiga ah.

- Waxaannu aqoonsanay hal xaalad halkaas oo saxiix been-abuur ah lagu adeegsaday si loo diiwaangeliyo natiijooyinka guddiga wareysiga qaadayay. Xaaladdan waxay la xiriirtay shaqo-qorista xafiiska OAG oo saxiixa la been-abuuray wuxuu ahaa sarkaal sare oo ka tirsan xafiiska OAG. ***Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah (CSC) waa in uu baaritaan ku sameeyaa dhacdadan iyo dhammaan ka-qaybgeliyaasha guddiyada wareysiyada qaadaya waa in loogu yeeraa in ay bixiyaan saxiixyada asalka ah.***

5.8 Miisaaniyad

Waa muhiim in diyaarinta miisaaniyad sannadeedda ay raacdo hannaan nidaamsan oo ay ka qaybgalayaan dhammaan kuwa ay saameeyso. Intii lagu guda jiray dib-u-eegisteenna, waxaannu oggaaney in Wasaaradda maaliyadda aysan diyaarin warqadda qaabka guud ee miisaaniyadda ee loogu talagalay miisaaniyadda sannad maaliyadeedka 2019. ***Waxaannu ku talinaynaa in GSS ay diyaariso dhammaan dokumentiyada miisaaniyadda iyo in ay mustaqbalka u hoggaansanto habraacyada miisaaniyadda sida ku cad Xeerka PFM ee 2017.***

Waxaann oggaaney in ay jiraan xaalado wasaaradaha kale aysan u soo gudbin qiyaasaha kharashaadka iyo soo-jeedinta mashruuca Waaxda Miisaaniyadda ee Wasaaradda Maaliyadda (MOF). ***Dhammaan wasaaradaha kale waa in ay u soo gudbiyaan qorshahooda kharashaadka iyo soo-jeedinta Waaxda Miisaaniyadda inta lagu guda jiro waqtigii la isku raacay.***

5.9 Hantidhowka (Baaraha) Gudaha

Warbixinnada hantidhowka (Baaraha) gudaha ayaa la soosaaraa loona gudbiyaa maamulka sare. Si kastaba ha ahaatee, ma jirro hanaan lagula soconayo in soo-jeedimada la hirgeliyay iyo in kale. ***Maamulka waa in ay si joogto ah ula socdaan warbixinnada hantidhowka (baaraha) gudaha si loo xaqiijiyo in talooyinkii la soo-jeediyay loo hirgeliyay sidii loogu talagalay.***

Waxaannu oggaaney in hantidhowka (baaraha) gudaha aysan tixgelin kiiskii khayaannada ee dhacay sannad maaliyadeedkii 2019. ***Waxaannu ku talinaynaa in hantidhowrayaasha ama baarayaasha gudaha ee GSS in ay dib-u-egaan kiisas khiyaanno kasta ee dhacay. Warbixin kasta waa in markaa lagu soo bandhigo soo-jeedimo degdeg ah oo lagu saxayo dabacsanaan kasta oo kale ee ka dhex jirta nidaamka kantaroolka gudaha.***

6. La-socoshada Soo-jeedimada Hantidhowrkii Sannad Maaliyadeedka (FY) 2018

Intii lagu guda jiray hantidhowrka waxaannu dabagal ku sameynay dhammaan soo-jeedimadii hantidhowrka ee la soo-jeediyay sannadadii hore waxaanna oggaaney in marka la eego 13kii soo-jeedimo ee uu soo-jeediyay Xafiiska Hantidhowrka Guud (AOG) keliya hal talo in la fuliyay. ***Nidaam rasmi ah waa in la dhaqangeliyaa si loo xaqiijiyo in uu jiro qorshe habboon oo lagu hubinayo in soo-jeedimadan loo hirgeliyay sidii la qorsheynayay iyo in horumarku uu la socdo Maamulka Sare ee Wasaaradda Maaliyadda (MOF).***

Lifaaqa 1aad – Bayaamada Maaliyadeed ee Iskudhafan ee La Baarey
ee Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya (GSS) Sannadkii
Dhammaadey 31ka Disembar 2019 iyo raayiga hantidhowrka

Tixraaca: DGG/XH/271/2021

Hantidhowrka/Baarista Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya ee uu Sameeyay Hantidhowrka Guud

Warbixinta Hantidhowrka ee Kama-dambeysta ah

Farxaan Cali Maxamuud
Wasaaradda Maaliyadda,
Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya,
Dhuusamareeb-Soomaaliya.

Taariikhda: 11^{ka} Febraayo, 2021.

Mudane

Ra'yiga go'aan qaadashada la'aanta

Waxaan baarey bayaamada maaliyadd ee mideysan ee Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya sanadkii dhammaadey 31kii Disembar -2019. Bayaamadan Maaliyadeed ayaa ka kooban Bayaanka Qabashada iyo Bixinta Lacagaha, Bayaanka Isbarbardhiga Qaddarka Miisaaniyadda La Sii Dejiyay iyo Tan Rumoowday, iyo qoraallada bayaamada maaliyadeed oo ay ku jiraan siyaasadaha xisaabaadka mugga leh oo kooban iyo macluumaadka kale ee sharraxaadda ah.

Iyadoo sabab u ah muhiimadda ay leeyihiin qodobada lagu xusay qeybta Ra'yiga go'aan qaadashada la'aanta, waxaan awoodi waayay in aan helo caddeymo habboon ee hantidhowr oo ku filan in aan bixiyo ra'yiga hantidhowrka. Sidaa daraadeed, annigu ma bixin karo ra'yi hantidhowr o ku saabsan bayaamada maaliyadeed..

Gundhigga Ra'yiga Hantidhowr ee go'aan qaadasha la'aanta

- (a) Lacag-bixinno dhan USD 928,610 (oo u dhigma 29% ee guud ahaan lacag-bixinnada) ayaa gebi ahaanba lahayn wax dokumentiyo ah oo taageeraya. Intaa waxaa dheer, in lacag-bixinno wadartooda dhan tahay USD 730,145 (oo u dhigma 23% ee guud ahaan lacag-bixinnada) in aanan si ku filan loo taageerin. Iyadoo aan la helin caddeymo taageeraya suuragal ma ahan in la xaqiijiyo lacag-bixinnadan in si sax ah loogu shaaciyay bayaamada maaliyadeed.

- (b) Lacag-bixinno dhan USD 445,911 oo dheeraad ah (oo u dhigma 14% ee guud ahaan lacag-bixinnada) ayaa qaar ka mid ah lahaay caddeymo iyo dokumenti. Hase-yeeshee, kuwan waxaa si khaldan loogu soo bandhigay bayaamada maaliyadeed. Lacag-bixinnadan sida khaldan loogu soo bandhigay ayaa waxaa ka mid ah; qaddar lacageed oo guud ahaan gaareysa USD 428,000 oo ay xadeen Agaasimahii hore ee Waaxda Khasnadda iyo siyaasiyiin. lacag-bixinnadan ayaa si khaldan loogu sheegay bayaannada maaliyadeed in ay yihiin kharashaad lagu galay hanti soo iibsasho iyo dhismayaal la dhisay sida lagu xusay qoraalka faah faahsan ee 14aad ee bayaannada maaliyadeed.
- (c) Baaritaankeyga ayaa waxaa lagu ogaaday in 25 koonto bank la furay oo ay shaqeenayeen kuwaas oo ka baxsan Koontada Mideysan ee Waaxda Khasnadda (TSA) sanad maaliyadeedka 2019. Waxaan awoodi waayay in aan helo caddeymo muujinaya haraadiga ku jiray sandka dhamaatkisa ama dhacdooyinkii dhaqaale ee sannad maaliyadeedkii 2019. Haraadiga iyo dhacdooyinka dhaqaale ee sanadka dhan midna laguma soo bandhigin bayaamada maaliyadeed ee qabyo-qoraalka ah.

Waxaan u arkaa saameynta qoddobada kor ku xusan in ay yihiin kuwo la taaban karo oo ku baahsan guud ahaan Bayaamada Maaliyadeed.

Waxaan baaristeyda u sameeyay si waafaqsan Jaangooyada Caalamiga ah ee Hantidhowrada Guud. Mas'uuliyadaheya ee waafaqsan jaangooyadaasi ayaa si faahfaahsan loogu sharxay Mas'uuliyadaha Hantidhowrka ee Baarista qaybta Bayaamada Maaliyadeed ee Warbixinteyda Sannadlaha ah. Waan ka madax bannaanahay hay'adda soo diyaarisay warbixinta maaliyadeed si waafaqsan Xeerka Anshaxa ee Hay'adaha Hantidhawrrada iyo shuruudaha anshaxeed ee khuseeya baaristayda kuna aadan warbixinnada maaliyadeed sida ku xusan qeybta 7 (ilaa 5) ee sharciga Hantidhowrka 2018, waxaana mas'uuliyadaheya kale ee anshaxa uga soo baxay si waafaqsan shuruudahan iyo Xeer-Anshaxa.

Waxaa intaas dheer inaa eegtaan qoraalka 14aad ee bayaamada maaliyadeed, kaas oo sharxaya hantida aan maaliyadda ahayn gaar ahaan dhismeyasha xafiisyada ah in lahu soo bandhigay lacago la lunsaday oo lagu sheegay in ay yihiin kharashaadka hantida aan maaliyadda ahayn (dhismeyaal xafiiseed ah) oo ku xusan warbixinta maaliyadeed. Fikradeyda ma noqon karto mid aan aheyn Ra'yiga go'aan qaadashada la'aanta marka la eego arimaha soo sheegey

Arrimaha Muhiimka ah ee Baarista

Arrimaha baaristan muhiimka ah ayaa ku salaysan go'aankayga xirfadeed, ahna kuwo ahmiyad u leh baaristayda warbixinnada maaliyadeed ee xilligaan. Arrimahan ayaa si guud loogu xusay baaristayda warbixinnada maaliyadeed oo aan fikrad ka bixiyay, mana kabixinayo fikrad baalmarsan ama ka duwan arrimahan baarista la xiriira.

(a) Liidasho/Dabacsanaan ka jirta Kantaroollada Dakhli Ururinta

Kantaroollada dakhli uruurinta ee Dowlad Goboleedka Galmudug adeegsato kuma filna inay ka hortagaan dakhliga luma iyo wax-isdaba-marinta tusaale;

- Bilaha qaar oo lasoo uruurin canshuurta macaasha ganacsiga iyo ujuurrooyinka rakaabka
- Kala-duwanaanshaha lambarrada rasiidyada ee u dhaxeeya rasiidyada gacanta lagu qoro iyo kuwa ku diiwaangashan nidaamka maaliyada.
- Ka faa'iideysasho la'aanta dhammaan ilaha dakhliga Dowlad Goboleedka Galmudugee suuragalka ah.
- Dakhli gaaraya USD 12,690 oo bankiga lagu shubay ayaa waxaa la waayay raadadka rasiidyada taageeraya.
- Tirada NGO-yada diiwaangashan oo aad u yar.

Mas'uuliyadaha Maamulka iyo Kuwa Loo Igmaday Maamulka Bayaamada Maaliyadeed

Maamulka ayaa ka mas'uul ah diyaarinta iyo si wanaagsan u soo bandhigidda bayaamadan maaliyadeed oo waafaqsan Jaangooyada Caalamiga ah ee Xisaabaadka Waaxda Dowladda ee loo yaqaanno International Public Sector Accounting Standard (IPSAS)-Warbixin Maaliyadeedka Xisaabaadka Kaashka Ku Saleysan iyo sharciyada, iyo kantaroolka gudaha ee kale ee uu maamulka u arko in ay lagamamaarmaan u yihiin diyaarinta bayaamada maaliyadeed oo aan lahayn khalad la taaban karo, khayaamo ama ilduul mid uu ku yimaadaba.

Marka la diyaarinayo bayaamada maaliyadeed, maamulka ayaa ka mas'uul ah qiimeynta awoodda ay Hay'adu u leedahay in ay sii hawlgasho, iyadoo si ku habboon loo shaacinayo, arrimaha la xiriira sii hawlgelidda lana adeegsanayo habka sii jiridda ee xisaabaadka ku saleysan haddii maamulka uu doonayo in uu lacageeyo ama iibiyo hantida hay'adda ama uu joojiyo hawlgallada mooyaane, ama uusan lahayn xal kale oo macquul ah oo aan ka ahayn in sidaa la sameeyo.

Kuwa loo igmaday maamulka ayaa ka mas'uul ah kor-ka-ilaalinta hannaanka ka-warbixinta maaliyadaha hay'adda.

For Ministry of Finance	
Name:	Farahan Mohamoud
Title:	Minister
Date:	24/02/2021
Signature:	

Mas'uuliyadaha Hantidhowraha ka Saaran Baarista Bayaamada Maaliyadeed

Ujeeddooyinkeega waa in aan helo hubaal macquul gal ah oo ku saabsan in bayaamada maaliyadeed ee dowlad-goobleedka marka si guud loo eego aaney lahayn khalad, khayaanno iyo ilduuf mid uu ku yimaadaba, iyo in aan soo saaro warbixin hantidhowre oo aan ku sheegeyo ra'yigeega. Hubaal macquul ah ayaa ah mid heerkiisu sarreeyo, laakiin ma ahan damaanadqaad sheegaya in hantidhowr/baaris loo sameeyey si waafaqsan Mabaadii'da Baarista ee Aasaasiga ah (ISSAIs 100-999) ee Jaangooyooyinka Caalamiga ah ee Hay'adaha Hantidhowrka Sare uu mar walba soo helayo khaladaad marka uu jiroba. Khaladaadka waxaa ay ka dhalan karaan khayaamo ama ilduuf waxaanna loo qaadanayaa in uu yahay mid la taaban karo haddii, mid ahaan ama wadar ahaanba, si caqligal ah loo fili karo in ay saameyn ku yeeshaan go'aannada dhaqaale ee ay qaateen adeegsadayasha marka lagu saleynayo bayaamadan maaliyadeed.

Iyada oo qayb ka ah hantidhowrka sida uu dhigayo Buugga Hantidhowrka Maaliyadeed, kaas oo la jaanqaadayo Mabaadii'da Baarista ee Aasaasiga ah (ISSAIs 100-999) ee Jaangooyooyinka Caalamiga ah ee Hay'adaha Hantidhowrka Sare, waxaan qaadanayaa shaki xirfadlenimo guud ahaan inta uu socdo hantidhowrka/baaritaanka. Waxaan sidoo kale ku khasbannahay in aan:

- Soo ogaado oo aan u-kuurgalno halisaha khalad la taaban karo uu ugu jiri karo bayaamada maaliyadeed, khayaano ama ilduuf midka uu doono ha ku yimaadee, in aan nakh-shadeeyo oo aan sameeyo habraacyada hantidhowrka oo wax ka qabanaya halisahaaan, oo aan u helo caddeyn ku filan oo u habboon si aan sal ugu yeelo ra'yigeega. Halista ah inaan la soo ogaan khalad la taaban karo oo ku yimid khayaano ayaa ka badan tan midka ku yimid ilduufka, maaddaama khayaannadu ay ku lug lahaan karto mu'aamarad, been-abuur, in si ku-talogal ah wax looga tago, maldahaad, ama in laga dul-boodo kantarooladii gudaha.
- Ina fahamo kantaroolada gudaha ee hay'adda ee baaritaanka lagu sameenayo si aan u nakh-shadeeyo habraacyo hantidhowr oo ku habboon xaaladaha jira, laakiin aanu hadafka laga leeyahay ahayn in la bixiyo ra'yi ku aaddan taabogalnimada kantaroolka gudaha ee Hay'adda.
- Qiimeeyo habboonaanshaha siyaasadaha xisaabaadka ee la adeegsado iyo caqligalnimada qiyaasaha xisaabaadka iyo shaac-ka-qaadista la xiriirta ee ay sameeyeen maamulka.
- Ku soo gunaanado habboonaanshaha in maamulku uu adeegsado sii jiridda xisaabaadka ku saleysan iyo, iyadoo lagu saleynayo caddeynta hantidhowrka, la helay, haddii hubaal la'aan la taaban karo ay jirto oo la xiriirta dhacdooyinka ama xaaladaha shaki weyn u keeni kara awoodda ay Hay'addu u leedahay in ay sii jirto ama sii hawlgasho. Haddii aan ku soo gunaanado in hubaal la'aan la taaban karo ay jirto, waxaa la iga doonayaa in aan dadka ku dareensiyo warbixinteyda hantidhowraha shaac-ka-qaadista la xiriirta ee ku xusan bayaamada maaliyadeed, ama, haddii shaac-ka-qaadista noocaasi ahi aysan dad ku filnayn, in aan wax ka beddelo ra'yigeega. Gunanadkeyga wuxuu ku saleysan yahay


caddeynta hantidhowrka ee la helay ilaa iyo taariikhda warbixinteyda hantidhowraha. Si kastaba ha ahaatee, dhacdooyinka ama xaaladaha mustaqbalka ayaa keeni kara Hay'adda in aysan sii hawlgelin.

- Qiimeeyo sida guud ahaan loo soo bandhigey, loo diyaariyey iyo waxa ku jira bayaamadaha maaliyadeed, ee ay ka mid yihiin shaac-ka-qaadista, iyo in bayaamada maaliyadeed ee dowlad-goboleedka ay tacaamulaadka iyo dhacdooyinka aasaaska u ah ay u muujinayaan si ka bixineysa sawir dhab ah oo caddaalad ku dhisan.

Waxaan kuwa ka mas'uulka ah arrimaha maamulka la xiriira kala xiriirey, ay ka mid yihiin, baaxadda iyo waqtiga loo qorsheeyey hantidhowrka/baarista iyo waxyaabihii muhiimka ahaa ee hantidhowrka/baarista lagu soo ogaadey, oo ay ka mid yihiin haddiiba ay jiraan nusqaamo mug leh oo la xiriira kantaroolka gudaha ee aan soo ogaaday inta uu socday hantidhowrkeyga/baaritaankeyga.

Waxaan sidoo kale siinayaa kuwa ka mas'uulka ah maamulka bayaan dhigaya in aan u hoggaansamay shuruudaha anshaxa ee u habboon kuna saabsan madax-bannaanida, waxaanna kala hadlayaa dhammaan xiriirrada iyo arrimaha kale ee sida caqligalka ah loogu maleeyo in ay xambaarsan yihiin madax-bannaanideyda, iyo halka ku habboon, ilaalinta la xiriirta.

Aniga oo ka duulaya arrimaha aan kala hadlay kuwa ka mas'uulka ah maamulka, ayaa waxaan go'aan ka qaataa arrimaha ugu muhiimsanaa baaritaanka bayaamada maaliyadeed ee mudaddan oo sidaa daraadeedna ah arrimaha muhiimka ah ee hantidhowrka/baarista. Waxaan arrimahan ku qeexayaa warbixinteyda baarista haddii sharci ama xeernidaamiye uu diido in arrimaha shaaca looga qaado dadweynaha mooyaane waxayna arrintaasi dhacdaa xaalado aad iyo aad dhif u ah, waxaan go'aan ka qaadan karaa in arrin aanan lagu shaacin warbixinteyda iyadoo sabab u ah in cawaaqib-xumada ay leedahay ay si weyn ugu culus tahay faa'iidada ay danta dadweynaha u leedahay shaac-ka-qaadistaasi.

Office of the Auditor General	
Name:	Hasan Osman Mohamed
Title:	Auditor General
Date:	25/02/2021
Signature:	





BAYAAMADA
MAALIYADEED EE
WASAARADAHA & TAN
ISKUDHAFAN EE
DOWLAD-GOBOLEEDKA
GALMUDUG EE
SOOMAALIYA (GSS)

31ka Disembar ee Sannadkii Dhammaadey 2019

*Loo diyaariyay si waafaqsan Jaangooyada
Caalamiga ah ee Xisaabaadka Waaxda
Dowladda (IPSAS) – Warbixin Maaliyadeedka
Xisaabaadka Kaashka Ku Saleysan ee (2017)*

Waxaa Diyaarisey Wasaaradda
Maaliyadda iyo Horumarinta
Dhaqaalaha ee Dowlad-goboleedka
Galmudug ee Soomaaliya (GSS)

Bayaanka Caddaynta - Bayaamada Maaliyadeed ee 2019

Bayaamada Maaliyadeed ee 2019, qoraallada la socda, waxaa loo diyaariyay si waafaqsan Jaangooyada Caalamiga ah ee Xisaabaadka Waaxda Dowladda , Warbixin Maaliyadeedka Xisaabaadka Kaashka Ku Saleysan (2017).

Ra'yiga Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha ahaan, Bayaamada Maaliyadeed ee Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya (GSS) sida loogu gudbiyay hantidhowrka ee waafaqsan Qaybta 30aad ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha ee 2018 waa kuwo sax ah oo sawir dhab ah oo miisaaman ka bixinaya booska dhaqaale ee Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya 31ka disembar ee Sannadkii dhammaadey 2019.

Aniga oo ka wakiil ah Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya



26/04/2020

Wasiirka Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha

Taariikhda:

Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya**Warqadda Maaliyadda Iskudhafan ee Qabashada iyo Bixinta Lacagaha****Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda****31ka Disembar ee Sannadkii Dhammaadey 2019**

		2019	2018
		Waxaa Kantaroola TSA USD	Waxaa Kantaroola TSA USD
		Qoraallo	
Lacag-qabashada (Receipts / Inflows)			
Canshuuraha			
Canshuuraha alaabada iyo adeegyada	2	1,225,473	630,166
Canshuuraha		1,225,473	630,166
Deeqaha			
Ka yimid ururrada caalamiga ah	3	1,240,605	355,964
Ka yimid qaybaha kale ee dowladda guud	4	868,370	962,500
Deeqaha		2,108,975	1,318,464
Dakhliga Kale			
Dakhliga ka yimaad dhismayaal			
Iibinta Alaabooyin iyo adeegyo	5	12,190	-
Dakhliga Kale		12,190	-
Lacag-qabashada (Receipts / Inflows)		3,346,638	1,948,629
Lacag-bixinnada (Payments / Outflows)			
Gunnooyinka La Siiyo Shaqaalaha			
Mushaaraadka iyo Ujuurooyinka	6	2,496,425	1,610,508
Gunnooyinka La Siiyo Shaqaalaha		2,496,425	1,610,508
Adeegsiga Alaabada iyo Adeegyada			
Safarrada & Shirarka	7	29,340	15,420
Kharashaadka Hawlgallada	8	57,520	130,620
Kiro	9	37,665	12,800
Kharashaadka Kale ee Hawlgallada	10	42,093	42,445
Kharashaadka Xallinta Khilaafaadka	11	5,000	33,010
Adeegsiga Alaabada iyo Adeegyada		171,618	234,295
Deeqaha			
Deeqaha la siiyo Qaybaha Kale ee Dowladda Guud	12	49,385	247,257
Deeqaha		49,385	247,257
Kharashaadka Kale			
Wareejinta aan meel kale lagu kala soocin	13	-	13,939
Kharashaadka Kale		-	13,939
Hantida aan maaliyadda ahayn			
Hantida Ma Guurtada ah	14	499,763	30,800
Hantida aan maaliyadda ahayn		499,763	30,800
Lacag-bixinnada (Payments / Outflows)		3,217,191	2,136,799
Kororka Hoos-u-dhaca Kaashka ah		129,447	(188,170)
Kaashka Bilowga Sannadka		20,197	208,366
Kaashka Sannadka Dhammaadkiisa	1.4	149,644	20,197

Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya

**Warqadda Maaliyadda Iskudhafan ee Isbarbardhigga Qaddarka Miisaaniyada Lasii Dejiyay iyo Ta Rumoowday
31ka Disembar ee sannadkii Dhammaadey 2019**

**Miisaaniyadda Qoondeynta ee Loo Ansaxiyey Habka Kaashka Ku Saleysan
(Kala-sooca Lacag-bixinnada oo Heerka Dhaqaale ah)**

		2019				2018
		Farqiga u Dhaxeeya				
		Qiyaasta Asalka ah ee Qoondeynta A	Qiyaasta Kama- dambeysta Qoondeynta B	Waxaa Kantaroola TSA C	Miisaaniyadda Kama-dambeysta & Ta Rumoowday C-B	Waxaa Kantaroola TSA
		Qoraallada USD	USD	USD	USD	USD
Lacag-qabashada (Receipts / Inflows)						
Canshuuraha						
Canshuuraha alaabada iyo adeegyada		1,922,775	1,922,775	1,225,473	(697,302)	630,166
Canshuuraha macaamulaadka iyo ganacsiga caalamiga ah		118,000	118,000		(118,000)	
Canshuuraha	15	2,040,775	2,040,775	1,225,473	(815,302)	630,166
Deeqaha						
Ka yimid ururrada caalamiga ah		2,338,402	2,338,402	1,240,605	(1,099,853)	355,964
Ka yimid qaybaha kale ee dowladda guud		3,305,170	3,305,170	868,370	(2,436,800)	962,500
Deeqaha	16	5,643,572	5,643,572	2,108,975	(3,536,653)	1,318,464
Dakhliga Kale						
Dakhliga ka yimaad dhismayaal						
Iibinta Alaabooyin iyo adeegyo		-	-		12,190	
				12,190		-
Dakhliga Kale	17	-	-	12,190	12,190	-
Lacag-qabashada (Receipts / Inflows) Lacag-bixinnada (Payments / Outflows)		7,684,347	7,684,347	3,346,638	(4,339,765)	1,948,629
Gunnooyinka La Siiyo Shaqaalaha						
Mushaaraadka iyo Ujuurooyinka		5,172,824	5,172,824	2,496,425	(2,676,399)	1,610,508
Gunnooyinka La Siiyo Shaqaalaha	18	5,172,824	5,172,824	2,496,425	(2,676,399)	1,610,508

Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya**Warqadda Maaliyadda Iskudhafan ee Isbarbardhigga Qaddarka Miisaaniyada Lasii Dejiyay iyo Ta Rumoowday****31ka Disembar ee sannadkii Dhammaadey 2019****Miisaaniyadda Qoondeynta ee Loo Ansaxiyey Habka Kaashka Ku Saleysan (Kala-sooca Lacag-bixinnada oo Heerka Dhaqaale ah)**

		2019				2018	
		Farqiga u Dhexeeya					
		Qiyaasta Asalka ah ee Qoondeynta A	Qiyaasta Kama-dambey Qoondeynta B	Waxaa Kantaroola TSA C	Miisaaniyadda Kama-dambeyst & Ta Rumoowday C-B	Waxaa Kantaroola TSA	
	Qoraallo	USD	USD	USD	USD	USD	
	Kharashaadka Kale ee Hawlaha La Xiriira	383,026	383,026	42,093	(340,934)	42,445	
	Kharashaadka Xallinta Khilaafaadka	31,000	31,000	5,000	(26,000)	33,010	
	Kharashka Soo Noqnoqda ee Aan Mushaarka Ahayn ee RCRF	70,000	70,000	-	(70,000)	-	
	Ku-talgal	232,931	232,931	-	(232,931)	-	
	Adeegsiga Alaabada iyo Adeegyada Deeqaha	19	1,106,421	1,106,421	171,618	(934,803)	234,295
	Deeqaha la siiyo Qaybaha Kale ee Dowladda Guud	263,000	263,000	49,385	(213,615)	247,257	
	Deeqaha	20	263,000	263,000	49,385	(213,615)	247,257
	Dheefaha/Faa'iidooyinka Bulshada						
	Dheefaha bulshada ee shaqo-siiyaha	10,000	10,000	-	(10,000)	-	
	Dheefaha/Faa'iidooyinka Bulshada	21	10,000	10,000	-	(10,000)	-
	Kharashaadka Kale						
	Wareejinta aan meel kale lagu kala soocin	-	-	-	-	13,939	
	Kharashaadka Kale	22	-	-	-	13,939	
	Hantida aan maaliyadda ahayn						
	Hantida Ma Guurtada ah	1,132,102	1,132,102	499,763	(632,339)	30,800	
	Hantida aan maaliyadda ahayn	23	1,132,102	1,132,102	499,763	(632,339)	30,800
	Lacag-bixinnada (Payments / Outflows)	7,684,347	7,684,347	3,217,191	(4,467,156)	2,136,799	

Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya**Bayaanka Hawlgallada GFS****Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda****Ee Sannadka Dhammaadey 31ka Disembar 2019**

	2019 USD	2018 USD
Macaamulaadka Saameynaya Qiimaha Sugan		
Dakhliga	3,346,638	1,948,629
Canshuuraha	1,225,473	630,166
Canshuuraha alaabada iyo adeegyada	1,225,473	630,166
Deeqaha	2,108,975	1,318,464
Ka yimid ururrada caalamiga ah	1,240,605	355,964
Ka yimid qaybaha kale ee dowladda guud	868,370	962,500
Dakhliga Kale	12,190	-
Iibinta Alaabooyin iyo Adeegyo	12,190	-
Kharashaadka	2,717,428	2,105,999
Gunnooyinka La Siiyo Shaqaalaha	2,496,425	1,610,508
Mushaaraadka iyo Ujuurooyinka	2,496,425	1,610,508
Adeegsiga Alaabada iyo Adeegyada	171,618	234,295
Safarrada & Shirarka	29,340	15,420
Kharashaadka Hawlgallada	57,520	130,620
Kiro	37,665	12,800
Kharashaadka Kale ee Hawlgallada	42,093	42,445
Kharashaadka Xallinta Khilaafaadka	5,000	33,010
Deeqaha	49,385	247,257
Deeqaha la siiyay Qaybaha Kale ee Dowladda Guud	49,385	247,257
Kharashaadka Kale	-	13,939
Wareejinta aan meel kale lagu kala soocin	-	13,939
Haraaga Guud ee Hawlgallada La Xiriira	629,210	(157,370)
Macaamulaadka Hantida Aan Maaliyadda Ahayn		
Isbeddelka Macaamulaadka Qiimaha Sugan (Hantida)	499,763	30,800
Hantida aan maaliyadda ahayn	499,763	30,800
Hantida Ma Guurtada ah	499,763	30,800
Macaamulaadka Hantida Maaliyadeed & Deymaha		
Isbeddelka Macaamulaadka Qiimaha Sugan (Hantida)		(188,170)
	129,447	
Hantida maaliyadeed	129,447	(188,170)
Gudaha	129,447	(188,170)
Deymo	-	-
Deymo	-	-
Saamiga Qiimaha Sugan	-	-
Saamiga Qiimaha Sugan	-	-
Kala-badnaanshaha Guud ee Istaatistik	-	-

Qoraalka 1aad Siyaasadaha Xisaabaadka Mugga Leh oo Kooban

1.1 Aasaaska Diyaarinta

Bayaamada maaliyadeed ee iskudhafan ee Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya (GSS) ayaa waxaa la diyaariyey iyadoo la raacayo Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha ee 2018 iyo *Jaangooyada Caalamiga ah ee Xisaabaadka Waaxda Dowladda (IPSAS) – Warbixin Maaliyadeedka Xisaabaadka Kaashka Ku Saleysan (2017)*.

Qoraalladan ku qoran bayaamada maaliyadeed waxay noqdaan qayb aan looga maarmayn fahamka bayaamada waana in lala akhriyaa bayaamada. Waxaa si joogto ah muddada oo dhan loo adeegsanayay siyaasadaha xisaabaadka.

1.2 Hay'adda Warbixinnada

Bayaamada Maaliyadeed waxaa loogu talogaley Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya (GSS) waxaanna ay ka hadlayaan ama ku saabsan yihiin muddada u dhaxeysa 1da Jannaayo – 31ka Disembar ee 2019. Bayaamada maaliyadeed waxaa ku jira hay'adaha warbixinta sida ku xusan *Xeerka Qoondaynta GSS Lr. 1aad* ee 2019 waxayna ka kooban yihiin:

- 1 Wasaaradda Arrimaha Gudaha & Dowladaha Hoose
- 2 Wasaaradda Cadaaladda & Arrimaha Garsoorka
- 3 Wasaaradda Maaliyadda & Horumarinta Dhaqaalaha
- 4 Wasaaradda Amniga Gudaha
- 5 Wasaaradda Qorsheynta & Iskaashiga Caalamiga
- 6 Wasaaradda Awqafta & Arrimaha Diinta
- 7 Wasaaradda Kaluumeysiga & Kheyraadka Badda
- 8 Wasaaradda Hawlaha Guud & Dib-u-dhiska
- 9 Wasaaradda Ganacsiga & Warshadaha
- 10 Wasaaradda Warfaafinta & Dhaqanka
- 11 Wasaaradda Gaadiidka Cirka & Dhulka
- 12 Wasaaradda Waxbarashada
- 13 Wasaaradda Boostada & Isgaarsiinta
- 14 Wasaaradda Beeraha & Xanaanada Xoolaha
- 15 Wasaaradda Bey'ada, Dhirta & Daaqa
- 16 Wasaaradda Caafimaadka

- 17 Wasaaradda Haweenka & Arrimaha Qoyska
- 18 Wasaaradda Shaqada iyo Shaqaalaha
- 19 Wasaaradda Dhalinyarada & Isboortiga
- 20 Wasaaradda Biyaha & Korontada
- 21 Wasaaradda Dastuurka & Dib-u-heshiisiinta
- 22 Wasaaradda Dekedaha & Gaadiidka Badda
- 23 Wasaaradda Qurba-joogta & Dhiirrigalinta Maalgashiga
- 24 Wasaaradda Gargaarka Bini'aadannimada & Daryeelka Naafada
- 25 Madaxtooyada
- 26 Xafiiska Guddoomiyaha Baarlamaanka iyo Baarlamaanka
- 27 Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah
- 28 Xafiiska Hantidhowrka Guud
- 29 Xafiiska Madaxa Xukuumadda

Wasaaradaha oo dhan waxaa lagu dhisey **Wareegto Madaxeyne** oo cinwaankeedu uu ahaa *Wareegto Lagu Dhisayo Wasaaradaha Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya oo lagu Qeexay Doorarka iyo Shaqooyinka Wasaaradaha* kuna taariikheysan 28^{ka} Disembar 2015 iyo wareegto gaar ah oo lagu dhisayo Wasaaradda Maaliyadda oo cinwaankeedu uu ahaa *Wareegto loogu talagalay Ujeedooyin Lagu Dhisayo Wasaaradda Maaliyadda ee Dowlad-goboleedka Galmudug iyo Arrimaha Kale ee La Xiriira* kuna taariikheysan 28^{ka} Disembar, 2015.

Wareegto gooni ah oo ku saabsan dhisidda Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah (CSC) iyo ahdaaftiisa oo cinwaankeedu uu ahaa *Wareegto lagu dhisayo Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ee Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya* oo ku taariikheysan 28^{ka} Disembar, 2015 ayaa lagu dhisey xafiiska Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah waxaanna xeer loo beddelay 24^{ka} Juun 2018. Xeerar la socda ayaa sidoo kale lagu dhisey Shaqaalaha Rayidka ah iyo qaab-dhismeedka Mushaaraadka Shaqaalaha Rayidka ah. Dastuurka Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya (GSS) ayaa si otomaatik ah u dhisey Baarlamaanka Galmudug. Bayaamada kala duwan ee dhammaan hay'adaha ayaa waxaa ay noqdaan qayb ka mid ah bayaamada maaliyadeed ee iskudhafan maadaama hay'adahan ay qayb ka ahaayeen *Xeerka Qoondoynta Lr. 1aad ee 2019*. Bayaamada maaliyadeed ee iskudhafka ah waxaa ka mid ah dhammaan hay'adaha la kantaroolay intii lagu guda jiray sannadka. Hay'adaha midkoodna iskama laha hay'ad kale ama qayb ganacsi gaar ah.

1.3 Lacagaha Ku Harsan Xisaabaha Bankiga

Hadda, waxaa jira afar xisaabo banki oo ay maamusho wasaaradda maaliyadda. Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda (TSA), Xisaabta Wasaaradda Waxbarashada (MoE), Bankiga Dhexe ee Soomaaliya iyo Xisaabta Mashruuca RCRFII. Xisaabaha Wasaaradda Waxbarashada (MoE) iyo tan Mashruuca RCRFII ayaa waxaa loo furey si waafaqsan oggolaansho qoraaal ah oo laga helay Wasiirka Maaliyadda, sida xisaab-hoosaad hoos imaata Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda (TSA) ahaan. Iyada oo loo hoggaansamayo shuruudaha deeqda Barnaamijka Tayaynta Shaqaalaha Dowladda (RCRF II) ee uu maalgeliyo Bankiga Adduunka, ayaa xisaabta mashruuca kaliya loo furay hawlgallada mashruuca RCRF II iyo in laga fogaado in ay maaliyadaha deeqda ay iskudhafmaan hawlgallada kale ee Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya (GSS). Haraaga ku harsan Bankiga Dhexe ee Soomaaliya oo aan ka jiran wax dhaqdhaqaaq macaamulaad maaliyeed ah tan iyo 2016 ayaa waxaa ku jira \$1,978. Shaxda hoose ayaa muujinaysa haraaga xisaabaha marka ay taariikhdu ahayd 31-ka Disembar 2019.

	2019 USD	2018 USD
Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda	3,797	2,118
Xisaabta Mashruuca WB-RCRFII	136,704	18,079
Xisaabta Wasaaradda Waxbarashada	9,143	-
Wadarta Guud	149,644	20,197

1.4 Kaash & La Mid Ah Kaash

Kaash iyo La Mid ah Kaash waxaa loola jeedaa lacagaha waraaqda ah iyo qadaadiicda la hayo iyo dhigaal kasta ee lagu hayo banki ama hay'ad maaliyadeed. Kaashka waxaa loo aqoonsan yahay qaddarkiisa ee qiimaha lacageed. Kaashka lagu darey warqadda qabashada iyo bixinta lacagta wuxuu ka kooban yahay qaddarkan lacageed ee soo socda:

	2019 USD	2018 USD
Kaashka la Hayo iyo Lacagaha ku harsan Bankiyada	149,644	20,197
Wadarta Guud	149,644	20,197

1.5 Deymaha

Sannadkii 2015 ayaa waxaa jiray deymo laga qaatay ganacsiyada degaanka kuwaas oo guud ahaan isku noqonaya \$1,493,137. Deymahan waxaa lagu hayaa oo ay ku qoran yihiin diiwaan gacanta lagu qoray oo gaar ah. Maaliyadaha waxaa loo adeegsadey in lagu dhiso maamulka GSS. Iyada oo sabab u ah caqabado xagga miinaasiyadda ah ayaa waxaa la isku afgartey in GSS ay dib-u-bixiso lacagaha deynta ah iyada oo u bixinaysa qaab lacag qawiman oo joogto ah (instalments) oo ku xiran helitaanka maaliyadaha. Wax lacago ah lama bixin intii lagu guda jiray sannad maaliyadeedka oo sabab u ah in aan maaliyado la helin.

	2019	2018
	USD	USD
Haraaga lagu furey	1,072,578	1,086,433
Lacagta La Bixiya	-	- 13,855
Haraaga Lagu Xirey	<u>1,072,578</u>	<u>1,072,578</u>

1.6 Kaalmada Dibadda ee Aan Lala Soo Bixin

Intii lagu guda jiray sannad maaliyadeedkii 2017, GSS waxaa ay xaq u yeelatay in ay ka qaybqaadato mashruuca socda ee tayayta shaqaalaha ee loo yaqaano Maalgelinta Kharashaadka Soo Noqnoqda iyo Dib-u-habeynta (Recurrent Cost and Reform Financing (RCRF II). Mashruucan wuxuu socon doonaa muddo shan sano ah, hase-yeeshee iyada oo sabab u ah maaliyado dheeraad ah oo la helay (AF) ayaa muddada la kordhiyay (ilaa 30ka Juunyo 2022) waxaana dib-u-eegis loogu sameyn karaa si sannadle ah. Mashruuca RCRF II waa sanduuq deeq-bixiyeyaal badan (multi-partner fund) oo uu maamulo Ururka Horumarinta Caalamiga ah ee loo yaqaano *International Development Association* (IDA), iyada oo maaliyadahanna la soo marsiiyo Dowladda Federaalka ee Soomaaliyada (DFS). Hadafka mashruuca waa in lagu taageero qaataha in uu bixiyo mushahaar joogto ah oo la isku haleyn karo, iyo in la dhiso aasaaska fulinta miisaaniyadda iyo nidaamyo lacag-bixin hufan oo loogu talagalay qaybaha/waaxaha aan amniga ahayn ee Dowladda Federaalka, Dowlad-goboleedyada Xubinta Ka ah Federaalka ee xaq u leh iyo Maamullada Ku-meel-gaarka ah iyo Kuwa Hadda La Dhisayo. Lacagta Kaashka ah ee La Hayo iyo Tan Bankiga Ku Jirta 2019 iyo 2018 waa \$136,704 iyo \$18,079 USD oo ah sida ay isugu xigaan. . Sida ku xusan heshiiska isku haya ee Lambarkiisu yahay TFOA0534 Ku Taariikheysan 29ka Juunyo 2015 ee u dhaxeeya Dowladda Federaalka ee Soomaaliya (DFS), oo ka wakiil ah dhammaan dowlad-goboleedyada dhisan & kuwa hadda la dhisaya, iyo Ururka Horumarinta Caalamiga ah ee loo yaqaano *International Development Association* (IDA), Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya iyadoo sabab u ah heshiis-hoosaad ay la gashey Dowladda Federaalka ee Soomaaliya (DFS) ayaa waxaa ay ka mid noqotay mashruuc socda ee IDA oo socon doonaa ilaa 20ka Juunyo 2020 (waxaa hadda la kordhiyay muddada iyada oo la gaarsiiyay 30 Juunyo 2022 oo sabab u ah heshiis maaliyad-siin dheeraad ah). Kaalmada dibadda ee aan lala soo bixin ee la xiriirta mashruuca RCRF II waxaa ay ku xiran tahay in GSS ay ka soo baxdo shuruudaha aasaasiga ah ee mashruuca. GSS waxaa ay ka soo baxday shuruudaha, mashruucana wuxuu leeyahay taariikh dhaqangal oo ka bilaabanaysa 1da Luulyo 2016. Miisaaniyadda RCRFII ee lagu muujiyay Dokumeentiga Qiimeynta Mashruuca (PAD) ma tilmaamayso kala-dhigdhigista miisaaniyadda dejisan ee gaar ahaan loogu talagalay GSS. Qaddarka deeqda waxaa ku waajiba dib-u-eegista iyo ansixinta sannadlaha ah ee IDA. Sannad maaliyadeedka dhammaanaya 31ka Disembar 2019, ayaa GSS

waxaa ay ka heshay guud ahaan maaliyad gaareysa \$1,054,481 mashruuca RCRF II marka loo eego miisaaniyadda gaaraysa 1,786,901. Kala-duwanaanshaha ayaa ka dhashey tirada Shaqaalaha Rayidka ah ee aan la qorin iyo in aysan awoodin in ay hesho qaybta kharashaadka soo noqnoqda ee aan mushaaraadka ahayn.

1.7 Qaddarada Lacagta Looga Warbixinayo

Qaddarada lacagta looga warbixinayo waa qiimaha dhan ee doolarka mareykanka (USD\$) ah, oo loo beddelay doolarka ugu dhow.

1.8 Miisaaniyadda Asalka ama Kama Dambeysta ah ee La Ansaxiyay iyo Isbarbardhigga

Qaddarka Miisaaniyadda iyo Ta Rumoowday

Miisaaniyadda la ansaxiyey waxaa la diyaariyey iyadoo lagu saleynayo isla xisaabaadka (Kaash ku saleysan) iyo isla aasaaska kala-soocidda ee lagu saleeyay bayaamada maaliyadeed. Waxaa ku jira isla hay'adaha ku jira bayaanka maaliyadeed ee iskudhafan.

Miisaaniyadda asalka waxaa ansaxiyey golaha Wasiirada ka-dibna waxaa saxiixay Madaxweynaha marka ay taariikhdu ahayd 22ka Disembar, 2018. Ma jirin miisaaniyad dheeri ah intii muddadan lagu guda jiray.

Dhaqdhaqaaqa meelaha ay miisaaniyadda ku baxday ee qoondaynta qiyaasta kama dambeysta ah waxaa loo aaneynayaa dib-u-qoondaynta miisaaniyadda ee hay'adaha miisaaniyadda gudahooda oo la oggol yahay sida uu qabo Xeerka Qoondaynta ee 2019.

1.9 Taariikhda Oggolaanshaha

Bayaamada maaliyadeed marka ay taariikhdu ahayd 31^{ka} **Maarso 2020** ayaa waxaa ansaxiyay in la bixiyo Mudane Saciid Siyaad Shirwac, Wasiirka Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha.

Qoraalka 2aad Canshuuraha Alaabada iyo Adeegyada

Sannadkii 2016, Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya waxaa ay soo rogtay canshuurta waddo-marista oo beddelaysa canshuurta hore loo oran jiray canshuurta alaabooyinka sii-gudbaya. Sannad maaliyadeedkii 2019, canshuurta waddo-marista, canshuurta macaashka ganacsiga, ujuurooyinka rakaabka maxaliga ah iyo lacagaha diiwaangelinta Hay'adaha Aan Dowliga Ahayn ee Caalamiga ah (NGOs) ayaa waxay ahaayeen canshuuraha la qaaday. Canshuurta Waddo-marista ee ugu badan ayaa laga qaadaa miisaanka guud ee gaariga, ma ahan mid lagu qiimeeyo qaadisteeda tirada ama qiimaha alaabta gaadiidka saaran. Waddada weyn ee isku xiraysa Galmudug iyo Dekedda Boosaaso ayaa ahayd isha ugu weyn ee ay canshuurahan ka soo xarodeen. Qaddarka canshuurta lagu soo rogo ee laga qaado waxaa ay ku xiran tahay miisaanka guud ee diiwaangashan ee gaadiidka adeegsanaya waddada, ee ma ahan tirada ama qiimaha alaabta saaran. Canshuurta waddo-marista ayaa ah qaybta ugu badan ee canshuuraha la qaaday sannad maaliyadeedkii FY2019. Ka-dib heshiiskii dhexmaray GSS iyo Ururka Ahlu Sunna Wal Jama (SWJ), MoFED ayaa bilowday in ay canshuuro ka qaado dhulkii uu gacanta ku hayay maamulkii ASWJ gaar ahaan canshuurta waddo-marista oo ay iyagu qaadi jireen. Tanina waxay keentay in la qaado canshuurta waddo-marista ugu badan ee abad la qaado. Canshuurta macaashka ganacsiga ayaa waxaa laga qaadaa ganacsiyada diiwaangashan. Waxaanna hadda laga qaadaa oo keliya ganacsiyada ku yaalla magaalooyinka Dhuusamareeb iyo Guriceel, ganacsiyada kale ee ku yaalla degmooyinka kale weli lama diiwaangelin iyadoo sabab u ah in ay jiraan arrimo siyaasadeed iyo khilaafaadyo kale.

Inta badan garoomada diyaaradaha ee ku yaalla dowlad-goboleedka GSS ayaa waxaa hadda gacanta ku haya shirkado gaar loo leeyahay oo ilaa iyo haddana ma jiraan heshiisyo u dhaxeeya GSS iyo shirkadaha gaarka loo leeyahay taas oo keentay yaraanshaha Ujuurrooyinka laga qaado Rakaabka Maxalliga ah. Haseyeeshe, madaxweynaha cusub ee hadda ayaa diiradda saaraya in uu sii kordhiyo dakhligan, wuxuunna la wareegay garoomadii diyaaradaya ee ay gacanta ku hayn jiraan maamulka ASWJ. Garoomadan waxaa hadda gacanta ku haya maamulkooda Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha waxayna keeni karaan kororka qaadista ujuurrooyinka rakaabka oo la bilaabi doonno sannadka soo socda.

Guud ahaan waxqabadka canshuuraha intii lagu guda jiray sannad maaliyadeedka FY2019 ayaa koror ku

yimid 50% marka loo eego lacag ururintii FY2018, gaar ahaan canshuurta waddo-marista. Shaxda soo socota waa kala dhigdhigista faahfaahsan ee canshuuraha dakhliga alaabooyinka iyo adeegga ee la qaaday.

	2019	2018
	USD	USD
Canshuurta Macaashka Ganacsiga	32,645	31,840
Ujuurrooyinka Rakaabka Maxalliga ah	23,328	27,345
Canshuurta Waddo-marista	1,169,000	569,181
Diiwaangelinta NGO-yada Caalamiga	500	-
Shatiyada xirfadda iyo Ganacsiga	-	1,799
Wadarta Guud	1,225,473	630,165

Qoraaka 3aad Deeqaha ka yimid Ururrada Caalamiga ah

Intii sannadka lagu guda jiray, GSS ayaa deeqo ka heshay Ururrada Caalamiga ah oo hoos imaanaya saddex mashruuc oo kala duwan: mashruuca PREMIS, mashruuca RCRF iyo mashruuca taageerada Macallimiinta ee hoos tagaya Wasaaradda Waxbarashada. Mashruuca PREMIS ayaa maalgeliyay qaar ka mid ah hawlgallada maalinlaha ah ee GSS sida internet-ka, kirada xafiiska iyo soo iibsiga qalab xafiiseedka. Maaliyadaha ayaa lagu shubay Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda Dowladda waxaanna loo bixiyay si waafaqsan siyaasadaha wax-soo-iibsiga GSS. Mashruuca RCRF II waa Sanduuqa Somalia Multi-Partner Fund (SMPF) waxaanna maamula hay'adda International Development Association (IDA), iyadoo maaliyadaha la soo marsiiyo Dowladda Federaalka ee Soomaaliya (FGS). Ujeeddada mashruuca laga leeyahay waa in la taageero qaataha si loo bixiyo mushahaar joogto ah oo lagu kalsoonaan karo, iyo si loo dhiso aasaaska fulinta miisaaniyad taabagal ah iyo nidaamyada lacag-bixinta waaxaha aan amniga ahayn ee Dowladda Federaalka iyo Dowladaha Xubinta Ka ah Federaalka ee xaq u leh. Intii lagu guda jiray sannadkan GSS waxay dejisatay miisaaniyad iyadoo ku xisaabtamaysa in ay heli doonto USD 1,786,901 waxayna awooday in ay dhab ahaan u hesho USD1,054,481. Kala-duwanaanshaha ayaa ka dhashay in aysan qorin shaqaale ay filaysay in ay qoroto iyo in aysan helin maaliyado kale oo mashruuca RCRFII ay ahayd in laga helo.

Mashaariicda lagu taageerayo macallimiinta ayaa hadda waxaa maalgeliya afar hay'adood oo ah Ururrada Caalamiga ah ee Aan Dowliga Ahayn (INGO) iyadoo mid kastaba bixinaysa maaliyado lagu dhiirrigelinayo macallimiinta dowlad-goboleedka GSS.

Shaxda hoose ayaa soo koobaysa deeqaha la helay

	2019	2018
	USD	USD
RCRF II	1,054,481	269,111
TAAGEERADA PREMIS	68,566	86,853
Taageerada NRC	9,450	-
Save The Children	54,000	-
Care international	32,313	-
TAAGEERADA CISP	21,796	-
Wadarta Guud	1,240,605	355,964

Qoraalka 4aad Deeqaha ka yimid Qaybaha Kale ee Dowladda Guud

Hadda GSS ma soosaarto dakhli ku filan in ay ku maalgeliso guud ahaan hawlgaladeeda. Dowladda Federaalka ee Soomaaliya (DFS) ayaa bixisa taageero miisaaniyadeed waxayna maalgelisaa mashaariic kale. Waxaa kaloo jira maaliyado laga helo ururka Midowga Yurub (EU) oo hoos imaanaya Taageerada Surge waxaanna la soo marsiiyaa Dowladda Federaalka ee Soomaaliya (DFS) waxaanna loogu talagalay horumarinta, sida Dhismaha waddooyinka, dhismayaasha dowladda waxaanna soo raacay qaddar yar oo loo qoondeeyay kharashaadka socodsiinta hawlgallada. Sannadkii 2019 GSS waxay qiyaastay in ay ka heli doonto \$3,305,170 Dowladda Federaalka ee Soomaaliya (DFS) waxayna keliya ka heshay \$868,370. Tani ayaa sabab u ahaa xiriirka xumaadey ee u dhaxeeyay DFS iyo GSS waxaanna ka dhashay in DFS aysan u soo fasaxin maaliyadaha la qiyaasayay.

	2019	2018
	USD	USD
Dowladda Federaalka ee Soomaaliya	868,370	962,500
Wadarta Guud	868,370	962,500

Qoraalka 5aad Dakhliyada Kale ee La Helay

Ka sokow canshuuraha iyo deeqaha, waxaa jira dakhliyo kale oo ay heshay GSS, Wasaaradda Waxbarashada ayaa bilowday in dakhliyo ka ururiso hay'adaha u adeegga dadweynaha sida diiwaangelinta iskuullada gaarka loo leeyahay, daabacaadda shahaadooyinka iyo ujuurrooyinka aqoonsiga shakhsiga. Lacag ururinta ayaa bilaabatay saddexdii bilood ee ugu dambeysay sannadkan oo asal ahaan lama filayn ama qiyaasin in la ururin doonno sannad maaliyadeedka 2019.

	2019	2018
	USD	USD
Ujuurrada Aqoonsiga Shakhsiga	1,480	-
Ujuurrada Aqoonsiga Shaqaalaha Rayidka ah	300	-
Ujuurrada Shahaadada Dugsiga Hoose	9,470	-
Ujuurrada Adeegga Iskuulka	940	-
Wadarta Guud	12,190	-

Qoraalka 6aad Mushaaraadka iyo Ujuurooyinka

Mushaaraadka iyo ujuurooyinka waa isku jirka dhammaan mushaaraadka, gunnooyinka iyo lacag-bixinnada nooc kale ah ee la siiyo shaqaalaha. Shaqaalaha waxaa ka mid ah shaqaalaha rayidka ah iyo kuwa haya xilalka siyaasadeed. Kala-dhigdhigista mushaaraadka iyo ujuurooyinka la soo koobay oo dhammeystiran ayaa hoos lagu bixiyay.

	2019	2018
	USD	USD
Shaqaalaha joogtada ah	825,937	277,416
Shaqaalaha qandaraaska ku shaqeeya	3,000	-
Shaqaalaha ujuurrada ku shaqeeya	104,750	4,800
Ciiwanka ammaanka (Booliska, Nabadsugidda iyo Asluubta)	1,073,885	778,581
Mushahaarka Wasiirrada iyo Magacaabista Qaanuuniga ah	10,283	-
Mushaaraadka la siiyo siyaasiyiinta	407,000	192,000
Gunnada hoyga	2,550	
Gunnada gaadiidka	540	8,270
Gunnooyinka kale	-	200,000
Bixinta Raashiinka Joogtada ah	68,480	149,441
Wadarta Guud	2,496,425	1,610,508

Shaqaalaha joogtada ah waxaa ay heleen lacago dhan \$825,937 oo uu bixiyay mashruuca RCRF II. Ciidamada ammaanka waxaa la siiyay lacag dhan \$1,073,885 oo 38% ka badan kharashaadkii 2018. Lacag dhan \$407,000 ayaa waxaa mushahaar ahaan loo siiyay baarlamaanka GSS, oo u dhiganta 112% koror ku yimid intii la siiyay sannadkii kan ka horreeyay. Lacago dhan \$104,750 ayaa la bixiyay oo hoostagaya shaqaalaha ujuurooyinka ku shaqeeya oo la xiriira lacagaha dhiirrigelinta macallimiinta oo ay bixiyeen mashaariicda RCRFII waxaanna la bilaabay sannad maaliyadeedkii 2019. Lacag dhan \$68,480 ayaa lagu bixiyay bixinta Cuntooyinka joogtada ah waa lacag-bixinno nooc kale oo la siiyo Ciidamada Militeriga ee Galmudug waxayna isugu jirtaa cunto iyo sahay kale oo cunto la xiriirta, oo u dhiganta hoos u dhaca 54% markii loo eego sannadkii kan ka horreeyay oo sabab u ahayd gunnooyinka in la siiyo ciidamada militeriga beddelkii lacag-bixinnada nooca kale ee cunto ahaanta loo siiyay.

Qoraalka 7aad Safarrada iyo Shirarka

Kharashaadka safarrada iyo shirarka ayaa la xiriira mas'uuliyiinta GSS ee ka qaybgalaya shirarka iyo kulannada. Iyadoo kharashaad dhan \$29,340 ay ku baxeen safarrada iyo shirarka ka dhacay dalka gudahiisa iyo dibeddiisa iyo shirarka maxalliga ah ee ka dhacay gudaha Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaliya. Shaxdan soo socota waxaa ay bixinaysaa kala-dhigdhigidda kharashaadka guud.

	2019	2018
	USD	USD
Safarka Gudaha	15,665	2,500
Safarka Dibedda	10,397	-
Shirarka Maxalliga ah	3,278	12,920
	29,340	15,420

Qoraalka 8aad Kharashaadka Hawlgallada La Xiriira

Kharashaadka Hawlgallada La Xiriira waa isku jirka kharashaadka loo adeegsado fududeynta socodsiinta hawlaha xafiisyada Wasaaradda. Intii lagu guda jiray sannad maaliyadeedka FY2019, ma jirin kharashaad loogu talagalay kharashaadka telefoonnada gacanta oo sabab u ah in GSS aysan haysan maaliyado lagu bixiyo kharashaadkan. Sidaa daraadeed, dowladda ayaa mudnaanta koowaad waxay siisay kharashaadka sida kuwa ciidamada amniga oo muhiim u ah dowladda. Shaxda soo socota waxay bixinaysaa kala-dhigdhigidda kharashaadka hawlaha la xiriira ee ay bixisay Dowlad-goboleedka Galmudug (GSS).

	2019	2018
	USD	USD
Biyo	720	2,200
Koronto	5,053	8,360
Kharashaadka Telefoonka Gacanta	-	22,500
Internet-ka	10,180	2,500
Shidaal	11,730	27,000
Qalab dhigaalka/qoraalka	892	3,075
Ujuurrooyinka daabacadda	-	1,040
Sahayda Shirarka	250	1,700
Gunnooyinka Hawlgallada Amniga	21,775	41,600
Daabacaadaha	1,601	3,890
Sahayda Nadaafadda	120	-
Dayactirka Gaadiidka	-	5,880
Kirada Gaadiidka	4,500	10,875
Adeegyada Nadaafadda	700	-
	57,520	130,620

Qoraalka 9aad Kiro/Ijaar

Kirada ayaa muhiim u ah hawlgallada dowladda. GSS ayaa kharashaad kiro ahaan u bixisay lacag dhan \$37,665 sannadkii 2019 oo ka kooban \$28,800 kiro xafiiseed iyo kirooyinka kale oo ah \$8,865 marka loo eego \$12,800 sannadkii 2018FY oo ah koror dhan 194%. Kirada aan la bixin sannadkii hore ayaa keentay in uu koror ku yimaado kharashaadka kirada ee sannadkan.

	<u>USD</u>	<u>USD</u>
Wasaaradda Maaliyadda	15,285	3,600
Wasaaradda Biyaha iyo Korontada	2,700	-
Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah	9,000	3,000
Xafiiska Hantidhowrka Guud	9,000	-
Wasaaradda Waxbarashada	1,680	-
Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Dowladaha Hoose	-	2,900
Wasaaradda Amniga Gudaha	-	3,300
Wadarta Guud	<u>37,665</u>	<u>12,800</u>

Qoraalka 10aad Kharashaadka Kale ee Hawlaha La Xiriira

Kharashaadka Kale ee oo gaaraya ilaa \$42,093 ayaa baxay sannadkii 2019 kaas oo la siman kharashaadkii sannadkii kan ka horreeyay. Waxay ka kooban yihiin Ujuurro La-talinta, xayaysiinta telefishanka iyo wargeyska iyo kharashaadka kale ee boggaadinta xafiisyada Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Wasaaradda Biyaha iyo Korontada, Wasaaradda Waxbarashada iyo Madaxtooyada. Kharashaadkan ayaa hoos lagu faahfaahiyay:

	<u>2019 USD</u>	<u>2018 USD</u>
Ujuurrada La-talinta	28,609	-
Kharashaadka Kale ee Maamullada Xafiiska	10,408	11,499
Xayaysiinnada Telefishanka iyo Wargeysyada	2,975	1,500
Suuqgeyn iyo Dhiirrigelin	100	-
Ujuurrada Hantidhowrka	-	29,446
	<u>42,093</u>	<u>42,445</u>

Qoraalka 11aad Kharashaadka Xallinta Khilaafaadka

Dedaallo lagu xallinayo colaadaha iyo khilaafaadka u dhaxeeya beelaha Galmudug ayaa waxaa sameeyay Wasaaradda Arrimaha Gudaha iyo Xafiiska Madaxweynaha. Kharash guud ahaan gaaraya **\$5,000** ayaa ku baxay geeddi-socodka xallinta khilaafaadka. Shaxda hoose ayaa muujinaysa kharashaadka.

	<u>2019 USD</u>	<u>2018 USD</u>
Kharashaadka Xallinta Khilaafaadka	5,000	33,010
	<u>5,000</u>	<u>33,010</u>

Qoraalka 12aad Deeqaha la siiyo Qaybaha Kale ee Dowladda Guud

Kuwan waa deeqaha loo wareejiyay heerka hoose ee dowladda intii lagu guda jiray muddada warbixinta oo guud ahaan gaareysa \$49,385. Deeqahan la wareejiyay ayaa waxaa ka faa'iidey degmooyinka Dhuusamareeb iyo Guriceel. Maxaa yeellay degmooyinka qaar lagama qaadin lacagahii laga filayay sidaa daraadeed GSS ma haynin maaliyado ay siiso. Deeqaha loo wareejiyay degmooyinka waxaa loo qoondeeyay kharashaadka socodsiinta hawlaha maamulka iyo horumarinta.

	2019	2018
	USD	USD
Loo wareejiyay Heerarka Hoose ee Dowladda	49,385	247,257
	49,385	247,257

Qoraalka 13aad Wareejinta aan meelo kale lagu kala-soocin

Intii lagu guda jiray sannad maaliyadeedka FY2019 GSS ma bixin wax kharashaad ah oo la xiriira dib-u-bixinta deyntii lacagahii ku baxay Dowlad Dhisidda iyadoo sabab u ah lacag la'aan awgeed.

	2019	2018
	USD	USD
Deymahii ku Baxay Dhisidda	-	13,855
Dowladda GSS	-	84
Khidmadaha Bankiga	-	15,957

Qoraalka 14aad Hantida Aan Maaliyadda Ahayn

Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda

GSS waxay soo iibsaday Hanti Aan Maaliyad Ahayn intii lagu guda jiray Sannad Maaliyadeedka 2019 oo la xiriira Qalab xafiiseed, iyo Alaab xafiis (miisas, kuraas iwm.) iyo Rakibaadaha iyo baabuur kuwaas oo uu maalgeliyo mashruuca RCRII ee loogu talagalay shaqaalaha mashruuca Dowladda Federaalka ee Soomaaliya-na (DFS) waxay soo fasaxday maaliyado loogu talagalay dhismayaasha aan deggaanka ahayn. Kala-dhigdhigista dhammeystiran ee kharashaadka Hantida Aan Maaliyadda Ahayn ee GSS ee 2019 ayaa hoos lagu faahfaahiyay.

	2019	2018
	USD	USD
Dhismayaasha Aan Deggaanka Ahayn	428,000	-
Baabuur	38,950	-
Qalabka Macluumaadka, Kombiyuutarrada iyo War-iskaarsiinta (ICT)	6,361	-
Mashiinnada iyo Qalabka aan meel kale lagu kala-soocin	18,514	1,845
Alaabooyinka xafiiska iyo rakibaadaha	7,538	28,955
Barnaamij Kombiyuutar (software)	400	-
	499,763	30,800

Qoraalka 15aad Canshuuraha

GSS waxay qiyaastay in \$2,040,775 ay canshuur ahaan u ururin doonto laakin waxaa rumooway in la ururiyo lacag dhan \$1,225,473 (60%) marka loo eego sannadkii la soo dhaafay markaas oo keliya 18% ee carruurtii la qiyaasay la ururiyay. Dakhligii ugu badnaa ayaa ka soo xarooday Cashuurta Waddo-marista oo u dhiganta 95% ee canshuurtii la ururuyay FY2019. Cansuurta macaashka ganacsiyada looma ururin sidii loo qorsheeyay iyadoo sabab u ah in ganacsiyada degmooyinka qaar aanan la diiwaangelin sababo siyaasadeed awgood.

Garoomada diyaaradaha intooda badani waxaa maamulayay shirkado gaar loo leeyahay, tanina waxay keentay hoos u dhaca ujuurrooyinkii rakaabka maxalliga ahaa ee la qaadayay. Ma jirin heshiis sannadkan u dhaxeeyay ganacsatada Jaadka iyo Wasaaradda MoFED tanina waxay keentay in aan la xaddidin canshuurta laga qaado Jaadka ee sannadkan.

Nooca Canshuurta	Ansixinta Kama-dambeysta USD	Ururinta Rumoowday USD	Farqiga USD
Canshuurta Macaashka	179,844	32,645	(147,199)
Ujuurrooyinka Rakaabka Maxalliga	100,000	23,328	(76,672)
Canshuurta Waddo-marista	1,642,931	1,169,000	(473,931)
Diiwaangelinta NGOs-yada Caalamiga ah	-	500	500
Canshuuraha Kastamka - JAADKA	118,000	-----	(118,000)
Wadarta Guud	2,040,775	1,225,473	(815,302)

Qoraalka 16aad Deeqaha

GSS ayaa deeqo ka hesha Dowladda Federaalka ee Soomaaliya (DFS) iyo Ururrada caalamaiga ah. DFS ayaa la qiyaasay in ay soo fasaxi doonto \$3,305,170 waxaanna keliya ay soo fasaxday \$868,370 (26%). Tani ayaa waxaa sabab u ahaa khilaaf siyaasadeed oo soo dhexgalay GSS iyo DFS.

NGO-yo caalami ah ayaa waxay maaliyado siiyeen GSS oo lagu taageerayo kharashaadka la xiriira hawlgallada dowladda. Mashruuca RCRF II waa mashruuc ay ku mideysan yihiin deeq-bixiyeyaal badan waxaanna maamula Bankiga Adduunka oo bixinnaya maaliyada lagu bixiyo mushahaarka shaqaalaha rayidka ah ee uu qoray Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah.

Lacag gaareysa \$1,786,901 ayaa la qiyaasay in la heli doonno sannad maaliyadeedka balse waxaa la hela \$1,054,481 oo u dhiganta 59% ee qiyaastii sannadka. Faqriga ama kala duwanaanshaha ayaa ka dhashey shaqo-qoris iyo dib-u-habeyn kale oo la doonayay in la hirgeliyo oo asal ahaan la qorsheeyay. PREMIS ayaa maalgelisay kharashaadka hawl socodsiinta muhiimka ah sida kirada xafiiska, qalabka xafiiska iyo kharashaadka internet-ka, waxayna sidoo kale maalgelisay mashaariicda qaar sida ololaha lagu wanaajinayo dakhliga, dhisidda aqallada/buulasha dakhliga. Lacag dhan \$68,566 ayaa la helay oo keliya ah 17% marka loo eego qiyaasta sannadlaha ee dhan \$393,721. Tani ayaa sabab u ah in mashaariicda qaar aanan loo hirgelin sidii la qorsheeyay iyadoo sabab u ah khilaafaad iyo xiisaado siyaasadeed oo taagnaa intii lau guda jiray sannadka. Ururrada sida Norwegian Refugee Council, Save the Children International, Care International iyo Comitato Internazionale Per Lo Sviluppo Dei Popoli (JISP) ayaa taageerada dhiirrigelinta macallimiinta siiya qaar ka mid ah macallimiinta iskuullada ee dowlad-goboleedka Galmudug.

Magaca Deeq-bixiyaha	Ansixinta Kama-dambeyska USD	Ururinta Rumowday USD	Farqiga USD
Dowladda Federaalka ee Soomaaliya	3,305,170	868,370	(2,436,800)
Mashruuca RCRF II	1,786,901	1,054,481	(732,421)
TAAGEERADA PREMIS	393,721	68,566	(325,155)
Taageerada NRC	10,800	9,450	(1,350)
Save The Children	54,000	54,000	-
Care international	45,500	32,313	(13,187)
TAAGEERADA CISP	47,480	21,796	(25,684)
Wadarta Guud	5,643,572	2,108,975	(3,534,597)

Qoraalka 17aad Dakhliga kale

Dakhliga kale ee ay soo ururisay Wasaaradda Waxbarashada lama qiyaasin in la ururin doonno sannad maaliyadeedkan. Haseyeeshee dakhligan cusub ayaa waxaa la ururiyay intii lagu guda jiray saddexdii bilood ee ugu dambeeyay sannad maaliyadeedka FY2019.

Madaxyada Dakhliga	Qiyaasta Kama-dambeysta USD	Ururinta Rumowday USD	Farqiga USD
Ujuurrada Aqoonsiga Shakhsiga	-	1,480	1,480
Ujuurrada Aqoonsiga Shaqaalaha Rayidka ah	-	300	300
Ujuurrada shahaadada dugsiga hoose	-	9,440	9,440
UJUURRADA ADEEGGA ISKUULKA	-	940	940
Wadarta Guud	-	12,160	12,160

Qoraalka 18aad Gunnooyinka La Siiyo Shaqaalaha

Gunnooyinka la siiyo shaqaalaha ee la bixiyay sannadkan ayaa dhan \$2,496,425 marka loo eego miisaaniyadda loo dejiyay oo dhan \$5,172,824. Tani ayaa sabab u ahayd maaliyadaha oo aan ka soo xaroon dakhligiyada oo aan loo ururin sidii la filayay iyo in aan la sameyn qorista shaqaalaha ee asal ahaan la qorsheeyay.

Guunnooyinka Shaqaalaha	Ansixinta Kama-dambeysta USD	Lacag-bixinta Rumowday USD	Farqiga USD
Shaqaalaha joogtada ah	1,501,377	825,937	(675,440)
Shaqaalaha qandaraaska ku shaqeeya	24,000	3,000	(21,000)
Shaqaalaha ujuurrada ku shaqeeya	597,880	104,750	(493,130)
Ciiwanka ammaanka (Booliska, Nabadsugidda iyo Asluubta)	1,095,186	1,073,885	(21,301)
Mushahaarka Wasiirrada iyo Magacaabista Qaanuuniga ah	516,678	10,283	(506,395)
Mushaaraadka la siiyo siyaasiyiinta	1,225,200	407,000	(818,200)
Gunnada hoyga	6,250	2,550	(3,700)
Gunnada gaadiidka	11,400	540	(10,860)
Gunnooyinka kale	34,490	-	(34,490)
Gunnooyinka Hawlgallada Amniga	20,000	-	(20,000)
Bixinta Raashiinka Joogtada ah	140,363	68,480	(71,883)
Wadarta Guud	5,172,824	2,496,425	(2,676,399)

Qoraalka 19aad Isticmaalka Alaabada iyo Adeegyada

Awoodda kharashaadka Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya waxaa ay ku kooban tahay dakhliga soo gala sannadka. GSS waxay ku bixisay lacag guud ahaan gaareysa \$171,618 oo u dhiganta boqolkiiba 59% ee miisaaniyadda kama dambeyska ah ee loo qiyaasay Isticmaalka Alaabada iyo Adeegyada. Kala duwanaanshaha waxaa loo aaneynayaa caqabadaha ka jira maaliyadaha la heli karo.

Isticmaalka Alaabada iyo Adeegyada	Ansixinta Kama-dameysta USD	Lacag-bixinta Rumowday USD	Farqiga USD
Safarka Gudaha	23,000	15,665	(7,335)
Adeegyada Nadaafadda	1,000	700	(300)
Sahayda Nadaafadda	124	120	(4)
Kharashaadka Xallinta Khilaafaadka	31,000	5,000	(26,000)
Ujuurrooyinka La-talinta	43,200	28,609	(14,591)
Nafto	18,000	11,730	(6,270)
Koronto	10,640	5,053	(5,587)
Safarka Dibedda ah	23,600	10,397	(13,203)
Internet-ka	12,970	10,180	(2,790)
Shirarka maxalliga ah	3,300	3,278	(22)
Suuq-geynta & Dhiirrigelinta	100	100	-
Sahayda Shirarka	1,000	250	(750)
Kiro Xafiiseed	38,400	28,800	(9,600)
Kiro Kale	8,880	8,865	(15)
Kharashaadka Kale ee Maamulka Xafiiska	33,000	10,408	(22,592)
Daabacaadaha	1,850	1,601	(249)
Gunnooyinka Hawlgallada Amniga	27,001	21,775	(5,226)
Qalabka Qoraalka/Dhigaalka	902	892	(11)
Xayaysiinta Telefashanka iyo Wargeyska	3,000	2,975	(25)
Kirada Gaadiidka/Ijaar Baabuur	7,350	4,500	(2,850)
Biyo	1,240	720	(521)
Wadarta Guud	289,557	171,618	(117,939)

Qoraalka 20aad Deeqaha La Siiyo Qaybaha Kale ee Dowladda Guud

Deeqaha la siiyay qaybaha kale ee dowladda waxaa ay ahaayeen \$49,385 intii lagu guda jiray sannadka marka loo eego miisaaniyadda loo dejiyay oo dhan \$263,000. Wasaaradda MoFED iyo Afar degmo (Cadaado, Dhuusamareeb, Guriceel iyo Galkacyo) ayaa waxay wada galeen heshiis rasmi ah oo dhigaya in degmooyinka ay ku shubi doonnaan dakhliga maxalliga ah ee ka soo xarooda degmooyinka xisaabta mideysan ee waaxda Khasnadda (TSA) iyo markaa ka-dib in ay soo codsadaan lacag-bixinta kharashaadka hawlgalladooda iyagoo u soo maraya habraacyada bixinta lacagaha kharashaadka ee ay leedahay Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha .

Qoraalka 21aad Dheefaha/Faa'iidooyinka Bulshada ee shaqo-siiyaha

Dheefaha bulshada ayaa waxaa la siiyaa shaqaalaha dowladda iyo ciidamada qalabka sida kaash ahaan ama iyadoo nooc kale ah. Intii lagu guda jiray sannad maaliyadeedkan ee 2019, GSS ma bixin wax dheefaha bulshada ah.

Qoraalka 22aad Wareejinta aan meel kale lagu kala soocin

Intii sannadka lagu guda jiray GSS miisaaniyadeeda kuma darin mana bixin wax kharashaad ah oo la xiriira deymaha lagu leeyahay GSS iyo khidmadaha bankiga.

Qoraalka 23aad Hantida Aan Maaliyadda Ahayn

GSS waxay hanti aan maaliyad ahayn soo iibsatay sannad maaliyadeedkii 2019 oo la xiriirra Qalab xafiiseed, iyo Alaabooyinka Xafiiska iyo Rakibaadaha, baabuur oo uu maalgeliyay mashruuca RCR II oo loogu talagalay shaqaalaha mashruuca. DFS waxay soo fasaxday maaliyado loogu talagalay dhismayaal aan deggaan ahayn oo loogu talagalay xafiiska madaxtooyada.

	Ansixinta Kama-dambeysta USD	Lacag-bixinta Rumowday USD	Farqiga USD
Dhismayaal Aan Deggaan Ahayn	585,000	428,000	(157,000)
Baabuur	40,000	38,950	(1,050)
Qalabka Kombiyuutarka, Macluumaadka iyo War-isgaarsiinta	14,385	6,361	(8,024)
Makiinadaha iyo Qalabka Aan Meel Kale Lagu Soocin	46,998	18,514	(28,484)
Qalabka xafiisyada iyo rakibaadaha	15,319	7,538	(7,781)
Barnaamij kombiyuutar (software)	400	400	-
	702,102	499,763	(202,339)

Qoraalka 24aad Lacag-bixinnada Dhinac Saddexaad

Hay'adda miisaaniyadda waxay sidoo kale ka faa'iidi kartaa alaabada iyo adeegyada loogu soo iibiyay lacag-bixinno kaash ah oo ay bixiyeen dhinacyo saddexaad oo ka madax-bannaan GSS inta muddada lagu guda jiro. Lacag-bixinnada ay bixiyeen dhinacyada saddexaad ka mid ma ahan lacagaha ay qabatey ama bixisay hay'adda miisaaniyadda balse waa kuwo ay ka faa'iido hay'adda. Dhinac 3^{aad} ayaa wuxuu si rasmi ah ugu sheegay GSS in lacag dhan \$4,671,537 lagu kharash-gareeyay mashruuca PREMIS iyo Somalia Stability Fund oo loo kala dhigdhigay sida soo socota:

Kharashka Dhinac 3aad ee PREMIS	Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha	Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah	Xafiiska Hantidhowrka Guud	Wadarta Guud
Kaalmo Farsamo	232,666	47,103	9,485	289,255
Tababar	131,521	79,946	7,587	219,054
Taageero ICT	93,969			93,969
Wadarta Guud	458,156	127,049	17,072	602,277

Kharashaada Dhinaca 3aad ee SSF	Wasaaradda Arrimaha Gudaha	Wasaaradda Xannaanada Xoolaha	Wasaaradda Ganacsiga	Wasaaradda Haweenka	Wasaaradda Gaadiika	Wadarta Guud
Saamiga Dib-u-heshiisiinta iyo Nabadda	1,948,025					1,948,025
Horumarinta Dhaqaalaha iyo Maciishada		425,758	939,847			1,365,605
Awoodsiinta Haweenka				483,518		483,518
Aan Ahayn Dhismo (Dhismaha Waddooyinka iyo Garoomada Diyaaradaha)					272,112	272,112
	1,948,025	425,758	939,847	483,518	272,112	4,069,260

Lifaaqa 2aad – Warqadda Maamulka ee Kama Dambeysta ah.
Warbixinta Hantidhowrka Madaxa-Bannaan Ee Ku Saabsan
Baaritaanka Dowlad-Goboleedka Galmudug Ee Soomaaliya (GSS) ee
Sannadkii Dhammaadey 31ka Dismabar 2019.



Warqadda Maamulka ee Kama-Dambeysta ah

Hantidhowrka Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya

Sannadkii Dhammaadey 31^{kii} Disembar 2019

TUSMADA

1. HORDHAC	4
1.1 Raadraac	4
1.2 Baaxadda	4
1.3 Ujeeddooyinka	4
1.4 Qaabka Hantidhowrka Loo Sameeyay	5
1.5 Mahadnaq	Error! Bookmark not defined.
2. KAASH IYO BANKI	7
3. DAKHLIGA	12
4. LACAG-BIXINNADA	18
5. WAX-SOO-IIBSIGA	25
6. HANTIDA AAN MUDDO GAABAN LA CADDEYSAN KARIN	28
7. SHAQO-QORISTA	32
8. MIISAANIYAD	34
9. HANTIDHOWKA (BAARAHA) GUDAHA	37
10. SIYAASADAHA IYO HABABKA KA-HORTAGGA KHIYAANNADA	40
11. LA-SOCOSHADA SOO-JEEDIMADA HANTIDHOWRKII SANNAD MAALIYADEEDKA (FY) 2018	41

Ereyo la soo gaabiyey

Erayga La Isku Gaabiyay	Ereyada oo Kaamilan
CPO	Ballanqaadka Amarka Lacag-bixinta
CSC	Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah
DG	Agaasimaha Guud
FMIS	Nidaamka Maareynta Maaliyadda Maamulka
FY	Sannad Maaliyadeed
GSS	Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya
ID	Aqoonsi
ICT	Tiknoolajiyadda War-iskaarsiinta iyo Macluumaadka
IPSAS	Jaangooyada Caalamiga ah ee Xisaabaadka Waaxda Dowladda
ISSAI	Jaangooyooyinka Caalamiga ah ee Hay'adaha Hanti-dhowrka Sare
IT	Tiknoolajiyadda Macluumaadka
MOF	Wasaaradda Maaliyadda
NGO	Urur Aan Dowli Ahayn
OAG	Xafiiska Hantidhowrka Guud
PFM	Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dadweynaha
PREMIS	Maareynta Kheyraadka Dadweynaha ee Soomaaliya
RMS	Nidaamka Maareynta Dakhliga
TSA	Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda
TD	Agaasimaha Waaxda Khasnadda
UNDP	Barnaamijka Horumarinta ee Qaramada Midoobay
USD	Doolarka Mareykanka

1. HORDHAC

1.1 Raadraac

Tan iyo markii la ansixiyay Dastuurka Ku-meelgaarka ah ee Jamhuuriyadda Federaalka sannadkii 2012, Soomaaliya waxay bilowday geeddi-socodka sameynta dowladaha xubinka ka ah dowladda federaalka. Ilaa iyo hadda, waxaa la sameeyay lix dowladood oo xubin ka ah dowladda federaalka, oo ay ka mid tahay Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya (GSS) oo xarunteeda dhexena ay tahay magaalada Dhuusamareeb.

GSS ayaa maaliyado ka hesha dakhli gudaha ka soo xarooda waxayna sidoo kale deeqo ka heshaa Dowladda Federaalka ee Soomaaliya iyo deeq-bixiyeyaal kala duwan. Dakhligan ayaa wadartiisa guud dhammeyd USD 3,346,638 sannadkii 2019. Kharashaadka ugu badan ayaa GSS wuxuu ugu baxay kharashaadka ciidanka amniga, mushaaraadka shaqaalaha joogtada ah iyo bixinta joogtada ah ee raashiinka ciidamada amniga.

Bayaamada maaliyadeed, joogteynta tallaabooyinka kantaroolka ee taabogalka ah iyo u hogaansamidda sharciyada iyo xeernidaamyada waa mas'uuliyadda Wasaaradda Maaliyadda (MOF) si loo oggolaado diyaarinta bayaamada maaliyadeed oo waafaqsan Jaangooyada Caalamiga ah ee Xisaabaadka Waaxda Dowladda (2017), Warbixint maaliyadeedka Xisaabaadka Kaashka ku saleysan iyo Qaybta 30aad ee Xeerka Maareynta Maaliyadda Maamulka/Dowladda (PFM) ee 2017.

Sida ku cad Qaybta 32(1) ee Xeerka PFM ee 2017, Wasaaradda Maaliyadda (MOF) waxaa looga baahan yahay in ay diyaariso bayaamada maaliyadeed isla-markaana u gudbiso Hantidhowraha Guud si uu baaris ugu sameeyo kama-dambeys afar bilood ka-dib dhammaadka muddada ay khuseeyaan. Muddo afar bilood ah gudahooda laga soo bilaabo taariikhdan, Hantidhowraha Guud, waa in uu hantidhowr ku sameeyaa bayaamadan maaliyadeed ka-dibna u gudbiyaa warbixinta hantidhowrka Baarlamaanka sida lagu sheegay Qaybta 32(3) ee Xeerka PFM ee 2017. Bayaamada maaliyadeed ee qabyo-qoraalka ah ee 2019 ayaa loo soo gudbiyay xafiiska OAG marka ay taariikhdu ahayd 26^{ka} Abriil, 2020.

1.2 Baaxadda

Hantidhowrka ayaa ku saabsan bayaamada maaliyadeed ee Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya (GSS) ee muddada ka bilaabaneysa 1^{da} Jannaayo 2019 ilaa 31^{ka} Disembar 2019.

1.3 Ujeedooyinka

Ujeeddada guud ee laga lahaa hantidhowrka waxay ahayd in la xaqiijiyo bayaamada maaliyadeed ee Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya oo aan khalad lahayn, khayaamo ama il-duuf mid uu ku yimaadaba, iyo in loo diyaariyay si waafaqsan habka IPSAS – Warbixin Maaliyadeedka Xisaabaadka Kaashka Ku Saleysan.

Ujeedooyinka kale waxay ahaayeen in la hubiyo in:

- diiwaannada xisaabaadka loo ilaaliyay si daacad ah oo habboon;
- xeerarka, habraacyada iyo kantaroollada gudaha ay ku filan yihiin in la helo kantaroolka taabogalka ah ee qiimeynta, ururinta iyo qoondaynta habboon ee dakhliyada;
- dhammaan lacagta lagu kharash-gareeyay laguna soo dallacay koontada qoondaynta in loo adeegsaday hadafka ama ahdafta uu Baarlamaanka ugu talagalay iyadoo la tixgelinayo hubinta kantaroolka gudaha ee taabogalka ah; iyo
- kantaroollada gudaha, xeerarka iyo habraacyada ee la sameeyay lana adeegsaday in ay ku filan yihiin ilaalinta hantida Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya.

1.4 Qaabka Hantidhowrka Loo Sameeyay

Hantidhowrkan waxaa loo sameeyay si waafaqsan Mabaadii'da Hantidhowr-sameynta Aasaasiga ah ee Jaangooyooyinka Caalamiga ah ee Hay'adaha Hanti-dhowrka Sare (ISSAIs 100-999). Jaangooyooyinkan waxay u baahan yihiin in aan u hoggaansanno shuruudaha anshaxa iyo in aan qorsheyno oo aan sameyno hantidhowrka si aan u helno ballanqaad caqligal ah oo ku saabsan in bayaamada maaliyadeed aaney lahayn khalad. Intii lagu guda jiray hawshan waxaan:

- qabanay munaqashooyin aannu la yeelanay xubnaha muhiimka ah ee hawladeennada GSS;
- dib-u-eegnay dokumentiyada muhiimka ah;
- tijaabinay kantaroollada muhiimka ah;
- tijaabo ku sameynay macaamulaadka maaliyadeed annagoo ku saleynayna muunado; iyo
- qiimeynay sida guud ahaan loo soo bandhigey bayaamada maaliyadeed.

Waxyaabihii lagu ogaadey hantidhowrka oo faahfaahsan ayaa lagu soo bandhigay qaybahan soo socda ee warbixinta. Waxyaabahan lagu ogaadey ayaa la kala-soocay mudnaanta ay kala leeyihiin waxaanna la kala siiyay mudnaan sare, dhexe ama hoose iyadoo la raacayo shuruudaha lagu muujiyay shaxda hoose.

Heerka Qiimeynta Halista	Sharaxaadda
Sare	• arrimaha GSS u horseedi kara halis ganacsi ama maaliyadeed oo mug leh; iyo/ama • arrimaha ka dhashay ama ay suuragal tahay in ay ka dhashaan ra'yi hantidhowr wax laga beddelay haddii aaney GSS wax uga qaban sida in ay arrinta tahay mid degdeg ah.
Dhexe	• arrimaha dabci ahaan nidaamiga ah ee GSS u horseedi kara halis ganacsi ama maaliyadeed haddii aanan wax laga qaban sannad maaliyadeedka hadda; iyo/ama • arrimaha u gudbi kara halis sare haddii aanan si dhaqso ah wax looga qaban.
Hoose	• arrimaha gaarka ah, ee dabci ahaan aan nidaamiga ama habraaca ahayn; iyo/ama • arrimaha ka turjumaya cilladaha xagga maamulka ee yaryar una baahan in wax laga qabto si loo sii wanaajiyo guud ahaan deegaanka kantaroolka ee GSS.

1.5 Mahadnaq

Waxaannu jeclaan lahayn in aan fursaddan ugu faa'iideysano in aan ugu mahadnaqno dhammaan hawladeennada GSS, gaar ahaan kuwa ka shaqeeya gudaha Wasaaradda Maaliyadda (MOF), caawimaadooddii iyo wada-shaqeyntii ay nala yeesheen intii aannu wadnay hawshan baaritaanka/hantidhowrka.

Office of the Auditor General	
Name:	Hashi Osman Mohamed
Title:	Auditor General
Date:	25/02/2021
Signature:	



2. Kaash iyo Banki

Tix	Waxyaabihii la ogaadey	Halista	Mudnaanta	Soo-jeedimo	Jawaabta Maamulka iyo Tallaabada La-soo-jeediyay
Xisaabo banki oo la furey lana joogteeyay oo ka baxsan xisaabta TSA					
2.1	Qaybta 29(2) ee Xeerka PFM ee 2017 wuxuu dhigayaa in aan xisaab banki oo ay Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya ku leedahay, gudaha ama dibadda dalka, la furin iyada oo aan oggolaansho qoraal ah looga haysan Wasiirka. Haseyeeshee, intii lagu guda jiray sannad maaliyadeedkii 2019, wasaarado kala duwan ayaa furtay xisaabo banki (25 xisaabo ayaa la tilmaamay) iyagoo aan ka haysan oggolaansho hore ee qoraal ah Wasaaradda Maaliyadda waxayna ka hawlgalayeen xisaabahan oo ka baxsan xisaabta TSA. Eeg Lifaafa 1aad. In kastoo aannu aqoonsanney in xisaabahan ay jiraan, haddana waxaannu awoodi waynay in aan helno caddeymo muujinaya tirada lacagta taalla ama ku harsan markii ay taariikhdu ahayd 31^{ka} Disembar 2019 ama macaamulaadka dhacay guud ahaan sannad maaliyadeedkii (FY 2019). Tirada lacagta taalla ee ku jirta xisaabahan sannadka dhammaadkiisa ama macaamulaadka sannadka oo dhan dhacay midkoodna hadda laguma sheegin bayaannada maaliyadeed ee qabyo-qoraalka ah.	Lacagaha kaashka ah ee ku jira xisaabaha bankiga ee aan ahayn xisaabta TSA waxaa laga yaabaa in wax isdaba-marin lagu sameeyo, la xado ama lagu takrifalo iyadoo loo adeegsanayo ujeedooyin shakhiyeed. Macaamulaadka maaliyadeed ee xisaabahan soo mara kuma waajibaan habraacyada kantaroolka ee caadiga ah waxaanna laga yaabaa in si khalad ah looga reebo bayaamada maaliyadeed ee sannadlaha ah.	Sare	Maamulka iyo mas'uuliyiinta dowlad-goboleedka waa in ay xaqiijiyaan dhammaan xisaabaha bankiga ee hadda ka baxsan xisaabta TSA in la xiro waqtiga ku habboon haddii ay u arkaan kuwo aanan loo baahnayn. Haddii xisaabahan loo baahan yahay (tusaale ahaan haday yihiin shuruudo ka yimaaday deeq-bixiyeyaasha) waa in gacanta lagu hayaa iyagoo hoostagaya xisaabta TSA, waxaanna ku waajiba kantaroolada dowladda ee caadiga ah. Dhammaan dheellitirkan kaashka, iyo dhammaan qabashada iyo bixinnada lacagaha ee loo marayo xisaabahan, waa in si dhammeystiran oo sax ah loogu shaaciyaa bayaamada maaliyadeed ee sannadlaha ah.	Waafaqsan/Oggol: Maaliyadaha deeq-bixiyeyaasha ee lagu shaqeeyo ee baxsan miisaaniyadda iyo wasaaradaha kale ee ku hawlgalla ama ku shaqeeya xisaabo banki la furay iyada oo aan oggolaansho qoraal ah looga haysan Wasiirka Maaliyadda ayaa weli sii ah caqabad taagan. Si kastaba ha ahaatee, iyadoo la isku-dayayo in wax laga qabto caqabadan ayaa MOF waxay sameysay olole wacyigelin ballaaran oo lagu barayo ama loogu sheegayo dhammaan MDAs-yada, deeq-bixiyeyaasha iyo la-hawlgalayaasha kaleba muhiimadda ay leedahay isticmaalka xisaabta mideysan ee TSA looguna sharxayo habraacyada hawlaha furista iyo hawlgelinta xisaabaha bankiga oo waafaqsan qaybta 29aad ee Xeerka PFM iyo xeernimaadiyaha #5. Sannadkan oo keliya (2020) Wasiirka Maaliyadda wuxuu amray xiridda ilaa iyo 40 xisaabo banki oo loo hawlgeliyay si aan waafaqsaneyn habraacyada. Sarkaalka Ka Mas'uulka ah: Agaasimaha Waaxda Khasnadda

Tix	Waxyaabihii la ogaadey	Halista	Mudnaanta	Soo-jeedimo	Jawaabta Maamulka iyo Tallaabada La-soo-jeediyay
					Taariikhda Hirgelinta: Dhexe
Isbeddelo aanan la oggolaan oo lagu sameeyay saxiixayaasha xisaabta bankiga					
2.2	Qaybta 5.3 ee Tilmaanta I ee ku saabsan beddelaada lagu sameynayo saxiixayaasha xisaabaha bankiga ayaa u baahan foomka beddelaadda saxiixaha in la buuxiyo loona gudbiyo Wasiirka (Maaliyadda) si uu u soo ansaxiyo marka beddelaad lagu sameeyo saxiixayaasha xisaabaha bankiga ee GSS. Waxay kaloo u baahan tahay in si waafaqsan wax looga beddelo nidaamka FMIS iyo diiwaanka bankiga. Intii lagu guda jiray hantidhowr sameynta, ayaa waxaan oggaaney in saxiixayaasha xisaabta bankiga la beddelay iyada oo aan la buuxin foomka beddelaadda saxiixaha. Sidoo kale si waafaqsan wax looga ma beddelin nidaamka FMIS iyo diiwaanka bankiga beddelaadda la sameeyay.	U hoggaansamid la'aanta xeerka PFM iyo Xeeridaamiyayaasha. Saxiixayaasha bankiga ayaa waxaa loo beddeli karaa ujeeddooyinka ku-takrifalka maaliyadaha dowladda.	Sare	Haddii dowladdu ay u baahan tahay in ay wax beddelaad ah ku sameeyo saxiixayaasha xisaabaha bankiga ee GSS, foomka beddelaadda saxiixaha waa in la buuxiyaa loona gudbiyaa Wasiirka Maaliyadda si uu u soo ansaxiyo. Sidoo kale waa in si waafaqsan wax looga beddelaa Nidaamka FMIS iyo diiwaanka bankiga.	Aan Waafaqsanayn/Diiddan Haddii loo baahdo in wax ka beddel lagu sameeyo xisaabaha bankiga, foomka beddelaadda saxiixaha ayaa marwalba la buuxin jiray. Waxaa halkan ku lifaaqan oo aad ka arki kartaa muunadda beddelaaddii ugu dambaysay ee lagu sameeyay codsiga saxiixaha bankiga. Sarkaalka Ka Mas'uulka ah: Agaasimaha Waaxda Khasnadda Taariikhda Hirgelinta: Degdeg ah Faallada Hantidhowraha: Dib-u-eegistii aan ku sameynay lacag-bixinnada ayaa waxaan ku aragnay lacag tiradeedu dhan tahay USD 122,000 (doolar) oo bayaannada maaliyadeed ee qabyo-qoraalka ah lagu sheegay in ay tahay lacag-bixinno la siiyay siyaasiyiin. Lacagahaasi ayaa loo qaybiyay afar shakshiyaad iyada oo aan la raacin nidaamka jira sida lagu muujiyay Lifaaqa 4aad. Waxay u muuqataa in khiyaannada ay sabab u tahay in la sii wado beddelaadda uu maamulka ku sameeyo saxiixayaasha

Tix	Waxyaabihii la ogaadey	Halista	Mudnaanta	Soo-jeedimo	Jawaabta Maamulka iyo Tallaabada La-soo-jeediyay
					bankiga iyada oo aan la raacin nidaamka iyo habraaca sharciga ah.
<i>Diiwaanka bankiga oo aan buuxin</i>					
2.3	Buugga Habraaca Xisaabta Bankiga ayaa dhigaya in diiwaanka bankiga ay maamulaan kooxda Maareynta Lacagta Caddaanka ah si loogu diiwaangeliyo dhammaan faahfaahinnada xisaabaha bankiga ee GSS. Intii lagu guda jiray dib-u-eegisteenna, GSS waxay bixin waysay diiwaanka bankiga oo si buuxda loo wax looga beddelay oo ay ku jiraan dhammaan xisaabaha bankiga ee dowladda. Bisha Disembar ee sanad walba, Unugga Maareynta Lacagta Caddaanka ah waa in uu dib-u-eegis ku sameeyaa diiwaanka bankiga iyo dhammaan xisaabaha banki ee dowladda si loo xaqiijiyo magacyada bankiga iyo lambarrada xisaabta ee dhammaan xisaabaha bankiga ee ku diiwaangashan magaca GSS sida lagu sheegay 8.1 ee Tilmaanta I ee Buugga Habraacyada Xisaabta Bankiga. Si kastaba ha noqotee, dib-u-eegistan sannadlaha ah lama sameyn.	Diiwaanka bankiga ee aan buuxin kuma qorna dhammaan xisaabaha bankiga ee hawlgala kana baxsan xisaabta TSA. Sidaa daraadeed, bayaamada maaliyadeed ee sannadlaha ah waxaa laga yaabaa in ay leeyihiin khalad.	Sare	Diiwaanka bankiga waa in si buuxdo wax looga beddelaa oo lagu qoraa dhammaan xisaabaha bankiga dowlad-goboleedka. Bisha Disembar ee sanad walba, Unugga Maareynta Lacagta Caddaanka ah waa in uu dib-u-eegis ku sameeyo diiwaanka bankiga iyo dhammaan xisaabaha banki ee dowladda si loo xaqiijiyo magacyada bankiga iyo lambarrada xisaabta ee dhammaan xisaabaha bankiga ee ku diiwaangashan magaca GSS. Tani waa in ay ka mid tahay codsi rasmi ah oo loo dirayo dhammaan bankiyada si ay u bixiyaan faahfaahinnada dhammaan xisaabaha bankiga ee hawlgalaya.	Aan Waafaqsanayn/Diiddan Diiwaanka bankiga waxaa maareeya oo wax ka beddel ku sameeyo unugga maareynta lacagta caddaanka ah ee waaxda khasnadda. Diiwaanka bankiga waxaa wax laga beddelaa Disembar walba oo ah qayb ka mid ah habraacyada sannadka dhammaadkiisa. Fadlan lifaaqa ka eego diiwaanka bankiga oo muunad ah. Sarkaalka Ka Mas'uulka ah: Sarkaalka Maareynta Lacagta Caddaanka ah Taariikhda Hirgelinta: Degdeg ah Faallada Hantidhowraha: Diiwaanka bankiga kuma qorna dhammaan xisaabaha bankiga ee lagu sheegay lifaaqa 1aad. In kastoo aanu aqoonsanney in xisaabahan ay jiraan, haddana waxaanu awoodi waynay in aan helno caddeymo muujinaya tirada lacagta taalla ama ku harsan markii ay taariikhdu ahayd 31^{ka} Disembar 2019 ama macaamulaadka dhacay guud ahaan sannad maaliyadeedkii (FY 2019). Tirada lacagta taalla ee ku jirta xisaabahan sannadka dhammaadkiisa ama

Tix	Waxyaabihii la ogaadey	Halista	Mudnaanta	Soo-jeedimo	Jawaabta Maamulka iyo Tallaabada La-soo-jeediyay
					macaamulaadka sannadka oo dhan midkoodna hadda laguma sheegin bayaamada maaliyadeed ee qabyo-qoraalka ah.
Is-waafajinta xisaabaha bankiga waxaa la sameeyaa bishiiba mar halkii laga sameyn lahaa toddobaadkiiba mar					
2.4	Qodobka 3.1 ee xeer-nidaamiyaha 5aad ee Xeerka PFM ayaa u baahan xisaabta keliya ee khasnadda (TSA) iyo xisaabo banki kasta oo kale oo ay yeelaneyso GSS in la is-waafajiyo sida wanaagsanna waa in is-waafajintaa la sameeyaa maalin kasta ama ugu yaraan toddobaadkiiba mar 2 maalmood gudahood marka uu dhammaado toddobaadka ayna is-waafajintaasi sameeyso Waaxda Khasnadda. Dib-u-eegistii aan ku sameynay is-waafajinta bankiga ayaa waxaan ku oggaaney in dhab ahaantii la sameeyo bishiiba mar. Waxaan kaloo oggaaney in ay jiraan Xaalado saraakiisha sare ee loo igmaday arrintaasi aysan saxiixin is-waafajinta la diyaariyay ee dib loo eegay.	Khaladaadka horey looma aqoonsado talaabada lagu saxayanna lama qaadin waqtiga ugu macquulsan.	Dhexe	Dhammaan xisaabaha bankiga ee GSS waa in la is-waafajiya sida wanaagsanna waa in is-waafajintaa la sameeyaa maalin kasta ama ugu yaraan toddobaadkiiba mar 2 maalmood gudahooda marka uu dhammaado toddobaadka ayna is-waafajintaasi sameeyso Waaxda Khasnadda iyada oo la adeegsanayo Nidaamka Maareynta Maaliyadda Maamulka (FMIS). Is-waafajin kasta waa in uu eegaa uuna ansaxiyaa mid ka mid ah saxiixayaasha loo idmay ama sarkaal sare oo loo igmadey arrintaas. Is-waafajinta bankiga iyo dokumentiyada taageeraya waa in la hayaa si loogu adeegsado	Waafaqsan/Oggol: In kastoo xeernidaamiye #5 uu dhigayo in is-waafajinta bankiga ee dhammaan xisaabaha bankiga ay tahay in la sameeyo maalin kasta ama ugu yaraan toddobaadkiiba mar, hantidhowrayaashii dibedda ee diyaariyay warqadda maamulka ee hantidhowrkii 2018 ayaa ku taliyay is-waafajinta bankiga ee la sameeyo maalin kasta ama toddobaadkiiba mar in ay culeyskeedu badan yahay iyo in aysan ku soo kordhinayn wax qiimo ah, waxayna ku taliyeen is-waafajinta bankiga in la sameeyo bil kasta. Wasaaradda Maaliyaddana waxay shuruud la'aan u hoggaansantay taladooda. Fadlan tixraac soo-jeedimada hantidhowrayaasha dibedda ee Warqadda Maamulka ee 2018.

Tix	Waxyaabihii la ogaadey	Halista	Mudnaanta	Soo-jeedimo	Jawaabta Maamulka iyo Tallaabada La-soo-jeediyay
				kantarool dhinaca maareynta ah iyo ahdaaf la xiriira hantidhowrka, waana in la fayl-gareeyaa iyaga oo fayl kombuyutar ah iyo iyaga oo daabacanba.	Sarkaalka Ka Mas'uulka ah: Sarkaalka Waaxda Khasnadda u qaabilsan Xisaabaha iyo Warbixinnada Taariikhda Hirgelinta: Faallada Hantidhowraha: Waa hawl u taalla Wasaaradda Maaliyadda in ay go'aan ka gaarto waqtiga la sameynayo is-waafajinnada bankiga. Haddii ku talagalka Wasaaradda Maaliyadda uu yahay in is-waafajinta ay keliya sameyso bil kasta mar, xeer-nidaamiyeyaasha PFM waa in wax laga beddelaa oo muddadan bisha ah lagu muujiyaa.

3. Dakhliga

Tix	Waxyaabihii la ogaadey	Halista	Mudnaanta	Soo-jeedimo	Jawaabta Maamulka iyo Tallaabada La-soo-jeediyay
Liidasho/Dabacsanaan ka jirta kantaroollada Dakhliga					
3.1	Muunad macaamulaad ah oo la tijaabiyay, ayaa waxaannu ku oggaaney kala duwanaansho u dhaxeeya qaddarka lagu diiwaangeliyay rasiidyada la siiyo canshuur bixiyeyaasha, qaddarka lagu qoray buugga kaashka, iyo qaddarka lacagta ee xisaabta bankiga lagu shubay. Faahfaahinnada ka eeg Lifaafa 2aad. GSS isma waafajiso dakhliga ku qoran rasiidyada, buugga kaashka iyo qaddarka lacagta bankiga lagu shubay sidoo kalena isma waafajiso farqiga u dhaxeeya Nidaamyada RMS iyo FMIS. Sidaa daraadeed, kala duwanaanshaha, sida kuwa la aqoonsaday intii lagu guda jiray baarista, ayaa la iska dhaafaa oo in la aqoonsado lama saxo.	Iska hor-imaanshaha dakhli ururinta ayaa horseedi karta in wax isdabamarin in lagu sameeyo lacagaha canshuur-bixiyaha iyo in la soosaaro warbixin maaliyadeed aan sax ahayn. Is-waafajin la'aanta dakhliga ayaa horseedi karta khaladaad mug weyn, haddii aan la oggaan oo aan la sixin.	Sare	Dhammaan dakhliga dowladda waa in si buuxda oo joogto ah la isu waafajiya. Kala-duwanaansho kasta ee u dhaxeeya qaddarada lacagta ku qoran buuggaagta rasiidka, buuggaagta kaashka iyo kuwa u diiwaangashan bankiga waa in si buuxdo loo baaro lana qaado tallaabo kasta oo lagu saxayo.	Waafaqsan/Oggol: Wasaaradda maaliyadda ee GSS ayaa tan iyo markaasi diyaarisay shax lagu la soconayo kala-duwanaanshaha u dhaxeeya diiwaannada dakhliga nidaamyada FMIS, RMS iyo xisaabta bankiga. Eeg shaxda ku lifaaqan. Sarkaalka Ka Mas'uulka ah: Sarkaalka Dakhliga Taariikhda Hirgelinta: Degdeg ah
Xaalado aanan la ururin lacagta sida billaha ah loo ururiyo ee canshuurta macaasha ganacsiga iyo ujuurrooyinka rakaabka.					
3.2	Laba meelood oo si joogto ah dakhli uga soo xaroodo, ayaa billaha qaar ee sannadkan laga diiwaangelin wax lacag ah oo lagu ururiyay/qaaday.	Waxaa jirta fursad ay GSS ku lumisay in ay ku kordhiso ururinta dakhliga dowladda oo sabab u ah in aysan ka faa'iideysan in ay dakhli ka ururiso dhammaan ilaha dakhliga laga heli kara guud ahaan sannad maaliyadeedka.	Sare	GSS waa in ay hubisaa qaadista dhammaan ilaha dakhliga ee la heli karo sannadka oo dhan	Waafaqsan/Oggol: Sannadkii 2019 ayaa ahaa sannad aad ugu adag GSS waxaanna jiray hoos u dhac weyn oo ku yimid dakhli ururinta oo sabab u ah xasilooni daro siyaasadeed. Bilihii Nofeembar iyo Disembar GSS waxay u ahayd muddo siyaasad ahaan xasilnayn sidaa daraadeed dakhli ururintu waxay u

Tix	Waxyaabihii la ogaadey	Halista	Mudnaanta	Soo-jeedimo	Jawaabta Maamulka iyo Tallaabada La-soo-jeediyay
	Lama qaadin wax Canshuurta Macaashka Ganacsiga ah bilaha Abriil, Nofembar iyo Disembar ee 2019. Lama diiwaangelin wax Ujuurrooyinka Rakaabka ah intii u dhaxeysay Agoosto iyo Disembar ee 2019. Waa suuragal rasiidyadan in markaasi un la qaadayay oo aan lacagaha weli lagu shubin xisaabta TSA ama lagu diiwaangelin nidaamka Bisani.	Bayaamada maaliyadeed waxaa laga yaabaa in ay leeyihiin khalad.			dhoweyd wax aan macquul ahayn. Dakhli ururinta ayaa dib loo soo celiyey ka dib markii lagu dhawaaqay maamulka cusub ee GSS. Qaadista canshuurta macaashka ganacsiga iyo ujuurrooyinka rakaabka ayaa dib loo bilaabay. Sarkaalka Ka Mas'uulka ah: Madaxa Waaxda Dakhliga Gudaha Taariikhda Hirgelinta: Dhexe
Kala-duwanaansho u dhaxeeya lambarrada rasiidyada gacanta lagu qoro iyo kuwa lagu diiwaangeliyo nidaamka					
3.3	Lambarrada tixraaca ee rasiidyada la bixiyo ayaa waxay ka duwan yihiin lambarka tixraaca ee rasiidyada laga soo saaro Nidaamka Maareynta Dakhliga (RMS). Sidaa daraadeed, way adag tahay in la iswaafajiyo labada rasiid.	Way adag tahay in la raadraaco rasiidyada la bixiyo iyadoo la adeegsanayo rasiidyada RMS.	Dhexe	GSS waa in ay si habboon u adeegsato rasiidyada RMS ee loogu talagalay dakhli ururinta si ay u fududaato in la raadraaco lambarrada tixraaca. Lambarrada rasiidka RMS waa in lagu daraa rasiidyo kasta oo gacanta lagu qoro ee la bixiyo.	Waafaqsan/Oggol: Lambarrada rasiidyada gacanta lagu qoro iyo kuwa RMS ayaa badanaa kala duwan oo waa in la is-waafajiyo, sababtu waxay tahay in rasiidka gacanta lagu qoro loogu talagalay in loo adeegsado sida tallaabooyin ku-meelgaar ah ahaan ilaa iyo inta RMS lagu baahinayo dhammaan xarumaha dakhli ururinta. Qorshayaal la dejiyay ayaa jira oo si buuxda loogu hirgelinayo rasiidyada oo nidaamka soosaaro muddo fog iyo muddo dhexeba Sarkaalka Ka Mas'uulka ah: Madaxa Waaxda Dakhliga Gudaha

Tix	Waxyaabihii la ogaadey	Halista	Mudnaanta	Soo-jeedimo	Jawaabta Maamulka iyo Tallaabada La-soo-jeediyay
					Taariikhda Hirgelinta: Degdeg ah
<i>Ka faa'iideysasho la'aanta dhammaan ilaha dakhliga suuragalka ah ee GSS</i>					
3.4	Guud ahaan 11-ka ilaha dakhli ee lagu qeexay Xeerka Dakhliga ee 2018 keliya 3 ilood ayaa laga faa'iideystay intii lagu guda jiray sannad maaliyadeedkii 2019. 8-da kale ee ilaha dakhliga hadda lama qaado. Kuwani waxaa ka mid ah canshuurta mushahaarka ee ku saleysan liiska mushahaarka ganacsiyada, canshuurta hawladeennada, canshuurta koronto dhalinta/matoorada korontada iyo ujuurrooyinka diiwaangelinta gaadiidka.	Waxaa jirta fursad luntay oo lagu kordhin lahaa canshuur ururinta dowladda oo sabab u ah in aysan ka faa'iideysan dakhli in ay ka ururiso dhammaan ilaha dakhliga laga helo sannad maaliyadeedka oo dhan.	Sare	GSS waa in ay ka faa'iideysataa dhammaan ilaha dakhliga ee jira si ay u ballaarisoo meelaha dakhliga ka soo geli kara.	Waafaqsan/Oggol: Sannadkii 2019 ayaa ahaa sannad aad ugu adag GSS waxaanna jiray hoos u dhac weyn oo ku yimid dakhli ururinta oo sabab u ah xasillooni daro siyaasadeed. Bilihii Nofeembar iyo Disembar ayaa GSS u ahayd muddo siyaasad ahaan xasilloonayn sidaa daraadeed dakhli ururintu waxay ku dhoweyd wax aan macquul ahayn. Sarkaalka Ka Mas'uulka ah: Madaxa Waaxda Dakhliga Gudaha Taariikhda Hirgelinta: Muddo dhexe
<i>Rasiidyo maqan</i>					
3.5	Dakhli gaaraya USD 12,690 oo bankiga lagu shubay ayaa waxaa la waayay raadka rasiidyada taageeraya. Faahfaahinnada oo qeexan ka eeg Lifaaqa 3aad.	Way adag tahay in la eego saxnaanta iyo baadi-sooco dakhliga sida lagu soo bandhigay bayaamada maaliyadeed.	Hoose	Rasiidyada asalka ah iyo dokumentiyada taageeraya waa in la hayaa si loogu adeegsado kantarool dhinaca maareynta ah iyo ahdaaf la xiriira hantidhowrka, waana in la fayl-gareeyaa iyaga oo fayl kombuyutar ah iyo iyaga oo daabacanba.	Waafaqsan/Oggol: Kuwaan ayaa sabab u ahaa rasiidyo kala duwan oo laga helay ilo dakhli kala duwan in la isugu geeyay fawjarkeenna rasiidka. Qorshayaal ayaa la dejiyay oo si cad loogu kala saarayo rasiidyada laga helay ilaha kala duwan iyadoo rasiid kastana uu yeellanayo raadraaca diiwaanka asalka ee isha dakhliga.

Tix	Waxyaabihii la ogaadey	Halista	Mudnaanta	Soo-jeedimo	Jawaabta Maamulka iyo Tallaabada La-soo-jeediyay
					Sarkaalka Ka Mas'uulka ah: Madaxa Waaxda Dakhliga Gudaha Taariikhda Hirgelinta: Muddo dhexe
Kala-saarid la'aanta waajibaadka					
3.6	Kantaroollo maaliyadeed oo ku habboon dakhli ururinta waa muhiim si loo xaqiijiyo hab-dhaqannada maareynta maaliyadaha oo adag. Kala-saaridda waajibaadka waa in uu ka jiraa meelaha muhiimka ah ee geeddi-socodka. Kuwan waxaa ka mid bilaabidda iyo oggolaanshaha ururinta, dib-u-eegista iyo xaqiijinta rasiidyada, ururinta kaashka bankiga la dhigayo, gelinta macaamulaadka nidaamyada RMS iyo FMIS, is-waafajinta, iyo joogteynta haynta buuggaagta rasiidka. Kantaroolladan adag waxay yareeyaan halista dakhli luminta dowladda ee xatooyo ama il-duuf mid uu ku yimaadaba. Si kastaba ha ahaatee, waxaan oggaaney in rasiidyada cashuurta ay leeyihiin meelo bannaan oo ay tahay in uu saxiixo sarkaalka diyaarinaya iyo meel bannaan oo loogu talagalay in uu saxiixo sarkaalka xaqiijinaya rasiidyada;	Kala-saaridda waajibaadyada dakhliga ee gelinta macaamulaadka nidaamyada RMS iyo FMIS oo aan dadka ku filnayn, iyo is-waafajinta ayaa kordhinaya in aan la oggaan il-duufyadaas, khiyaano ama il-duuf mid uu ku yimaadaba.	Sare	Waa in si habboon loo kala-saaraa waajibaadyada dakhli ururinta, tani ayaa lagu gaari karaa: - canshuur ururiyaasha oo adeegsanaya fawjarrada rasiidyo leh lambarro taxane ah oo loogu talagalay dakhli ururinta; - in lacagta la dhigo bankiga; - in nuqullada rasiidka iyo warqadda lacagta la dhigay bankiga loo soo gudbiyo Waaxda Dakhliga; - in mid ka mid ah saraakiisha Waaxda Dakhliga uu diyaariyo is-waafajinta maalinlaha ah ee rasiidyada la bixiyay iyo lacagta lagu shubay bankiga iyo sidoo kale is-waafajinta nidaamyada RMS iyo FMIS; - in sarkaal kale oo ka socda Waaxda Dakhliga uu dib-u-eegis ku sameeyo,	Waafaqsan/Oggol: Rasiidka canshuurta wuxuu leeyahay meel bannaan oo loogu talagalay diyaariyaha iyo dib-u-eegaha meeshaasi oo ay saxiixaan laba qof oo kala duwan. Haseyeeshee, il-duuf ayaa laga yaabaa in uu dhacay oo uu hal qof wada saxiixay labada meelood ee rasiidka ka bannaan. Arrintan si buuxda ayaa wax looga qaban doonnaa waxaanna la qaadi doonnaa tallaabo degdeg ah. Sarkaalka Ka Mas'uulka ah: Taariikhda Hirgelinta:

Tix	Waxyaabihii la ogaadey	Halista	Mudnaanta	Soo-jeedimo	Jawaabta Maamulka iyo Tallaabada La-soo-jeediyay
	xaaladaha qaarkood, waxaannu oggaaney in sarkaalka diyaarinaya iyo kan xaqiijinayaba ay yihiin isla hal sarkaalk.			- Agaasimaha Guud ama Agaasimaha Waaxda Dakhliga waa in uu ansaxiyaa is-waafajinta ka-dib marka uu eego.	
Deeq ayaa (UNDP) laga helay balse laguma shaacin bayaamada maaliyadeed ee qabyo-qoraalka ah					
3.7	Hay'adda UNDP waxay xaqiijisay qaddarka lacagaha ay siisay GSS intii lagu guda jiray sannad maaliyadeedka 2019. Haseyeeshee, xaqiijintu ayaa muujinaysa in UNDP ay bixisay deeq gaareysa USD 30,000 (doolar) taas oo aanan lagu shaacin bayaamada maaliyadeed ee qabyo-qoraalka ah.	Maaliyadaha deeq-bixiyeyaasha ay bixiyaan oo aan lagu soo bandhigin bayaamada maaliyadeed ayaa horseedi kara hoos u dhigidda qabashada iyo kharashaadka u dhigma.	Sare	Deeqaha UNDP ee ay heshay dowladda GSS waa in la geliyaa nidaamka FMIS. Bayaamada maaliyadeed waa in wax laga beddelaa oo lagu daraa dhammaan maaliyadaha deeq-bixiyeyaasha laga helay iyo kharashaadka u dhigma.	Waafaqsan/Oggol: Si kastaba ha noqotee, hay'adda UNDP deeqda ay bixisay uma bixin in ay tahay taageero miisaaniyadeed ahaan sannadkii 2019. Taageerada la bixiyay ayaa ka baxsanayd miisaaniyadda (Wax-ku-biirrinta dhinaca saddexaad) waanna sababta aanan loogu shaacin bayaanka maaliyadeed. Sarkaalka Ka Mas'uulka ah: Agaasimaha Waaxda Khasnadda (TD) Madaxa Waaxda Dakhliga Gudaha Taariikhda Hirgelinta: Degdeg ah
Tirada NGO-yada diiwaangashan oo aad u yar					
3.8	Sida ku xusan Qaybta 21(45) ee Sharciga Dakhliga 2018, Cid kasta oo maamuleysa ama dooneysa in ay qaab Urur Aan Dowli Ahayn (NGO) uga shaqeyso dhulka Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya waa in ay iska-	U-hoggaansamid la'aanta Sharciga Dakhliga. GSS ayaa ka luma tiro badan oo ah dakhli suuragal ah in uu u soo xaroodo.	Sare	Dhammaan NGO-yada ka hawlgala gudaha GSS waa in ay isdiwaangeliyaaan oo ay qaataan shahaaddada diiwaangelinta NGO-yada ee ay bixiso Wasaaradda Qorshaynta. Dhammaan lacagaha la qabtay waa in la	Waafaqsan/Oggol: Wasaaradda qorsheynta ayaa wada dedaallo lagu hubinayo in dhammaan Ururrada Aan Dowliga Ahayn (NGOs) ee ka shaqeeya gudaha Galmudug in si sharciga waafaqsan uu u diiwaangeliyo maamulka iyagoo bixinaya ujuurrooyinka is-diiwaangelinta.

Tix	Waxyaabihii la ogaadey	Halista	Mudnaanta	Soo-jeedimo	Jawaabta Maamulka iyo Tallaabada La-soo-jeediyay
	diiwaangelisaa Wasaaradda Qorsheynta. Haseyeeshee, hal NGO oo keliya ayaa is-diiwaangelisay oo bixisay ujuurrooyinka is-diiwaangelinta ee sannad maaliyadeedka 2019. Tirada Ururrada Aan Dowliga Ahayn (NGOs) ee ka shaqeeya GSS ayaa tiradan aad ugu badan.			dhigaa bankiga oo lagu shubaa xisaabta TSA ka-dibna waa in lagu diiwaangeliyaa FMIS/bayaannada maaliyadeed.	Sarkaalka Ka Mas'uulka ah: Sarkaalka Dakhliga ee loo igmaday isuduwidda Ururrada Aan Dowliga hayn (NGO) Taariikhda Hirgelinta: Degdeg ah

4. Lacag-bixinnada

Tix	Waxyaabihii la ogaadey	Halista	Mudnaanta	Soo-jeedimo	Jawaabta Maamulka iyo Tallaabada La-soo-jeediyay
Isdabamarinta maaliyadaha dowladda					
4.1	Maamulka GSS ayaa ka mas'uul ah oggaanshaha iyo ka hortagga khiyaannada, wax-isdabamarinta iyo waxyaabaha kale ee aan caadiga ahayn ee ku lug leh maaliyadaha dowladda. Intii lagu guda jiray dib-u-eegistii aan ku sameynay lacag-bixinnada la bixiyay, waxaannu oggaanay in ay jirto lacag guud ahaan tiradeeda gaareysa USD 550,000 (doolar) oo isdaba-marin lagu sameeyay sannad maaliyadeedkii 2019. Wadartan guud ayaa waxay ka kooban tahay laba dhacdo, oo kala gaar ah. <u>Khiyaanno uu ku kacay Agaasimihii hore ee Waaxda Khasnadda</u> Lacag tiradeeda dhan USD 120,000 oo (doolar) ayaa waxaa xaday Agaasimihii hore ee Waaxda Khasnadda. Qaddarka lacagta ayaa waxaa laga soo wareejiyay xisaabta TSA ee bankiga Salaam waxaanna loo wareejiyay xisaab shakhsiyeed iyadoo aan jirin wax oggolaansho ah sida ku cad diiwaannada lagu baarey Waaxda Khasnadda. Maamulka ayaa dhacdadan ku wargeliyay saraakiisha amniga sida la sheegayna, Agaasimaha Waaxda Khasnadda (ee waqtigaasi) intuu shaqadiisa ka tagey ayuu wuxuu ka	Kheyraadka dowladda ee qiimaha leh ayaa lagu dhaqaaladarreeyaa laguna xadaa mu'amaraad khiyaanno ah. Bayaamada maaliyadeed ayaa khalad leh	Sare	-GSS waa in ay lacagta ku soo celisaa xisaabta mideysan ee waaxda khasnadda (TSA). - Si looga hortago halista khiyaannada iyo lacag-bixinnada kale ee aan habboonayn, waajibaadka iyo mas'uuliyadaha muhiimka ah ee la xiriiira hannaanka lacag-bixintanta waa in loo kala-qaybiyaa ama loo kala-saaraa shaqaalaha iyo waaxaha kala duwan. Tani waa in ay ka mid ahaadaan xaddidaadda mas'uuliyadaha shaqaalaha waaxda khasnadda ee oggolaanaya, ka shaqeynaya ka-dibna diiwaangelinaya lacag-bixinnada. -GSS waa in ay si buuxda ugu sheegto khiyaannadan bayaannada maaliyadeed sidaa daraadeed adeegsadyaasha ayaa si buuxda u fahma heerka ay gaarsiisan yihiin iyo dabciga dhacdooyinka. Tani waa in ay ku lug leedahay dib-u-kala-soocidda qaddarka ay khuseyso iyo shaacinta sheekada dhan ee xaaladaha	Waafaqsan/Oggol: Wasaaradda Maaliyadda ee GSS ayaa dejisay tallaabooyin kantarool lagama maarmaan ah si looga hortago oo loo oggaado khiyaannada iyo nooc kastoo kale oo wax-isdabamarin ah. Si kastaba ha ahaatee, jiritaanka nidaamyo kantarool kama tarjumayso in waqti kasta aysan khiyaanno dhicin. Markii ay dhacday dhacdadaasi ayaan-darrada ah sannadkii 2019 ayaa Wasaaradda Maaliyadda waxay qaaday tallaabooyinka lagama maarmaanka ah ee hoos ku xusan si wax looga qabto kiiska; Booliska ayaa waxaa lagu wargeliyay kiiska xatooyada ah ka-dibna boolisku waxay xireen tuhmanaha Waxaa lala xiriiyay bankiga waxaanna isla markiiba dhaqan galay beddelaad lagu sameeyay saxiixayaasha bankiga Waxaa la xoojiyay habraacyada lagu hubiyo jeegga Waxaa guud ahaan shaqada laga cayriyay sarkaalkii ku lugta lahaa Waxaa la ogeysiiyay xafiiska hantidhowrka guud (OAG)

Tix	Waxyaabihii la ogaadey	Halista	Mudnaanta	Soo-jeedimo	Jawaabta Maamulka iyo Tallaabada La-soo-jeediyay
	cararay dalka. Maamulka, inkasta oo uu soo sheegay khiyaannada kuna wargeliyay xafiiska OAG intii lagu guda jiray shirkii furitaanka iyo guud ahaan intii uu socday baaritaanka, ayaa wuxuu doortay in qaddarka lacagta isdaba-marinta lagu sameeyay uu ku sheego in ay tahay kharashka hantida aan maaliyadda ahayn (dhismeyaal la deggan yahay) bayaamada maaliyadeed ee qabyo-qoraalka ah. Tani waa marin-habbaabin cad oo lagu sameeyay xaqiiqooyinka; qaddarada lacagta waxay ahayd in la sheego in la xaday si aan loo marin-habbaabin adeegsadyaasha bayaamada maaliyadeed. Waxaa la caddeeyay in khayaannada la fuliyay iyadoo la adeegsanayo saxiixyo la been-abuuray, si buuxda looga gudbay kantaroolada jira iyo in maamulka uusan ku lug lahayn ansaxinta jeegagga. Sidoo kale hadda ma jiro qoddob loogu talagalay xaddadka ay tahay in ay ansaxiyeen heerarka kala duwan ee mas'uuliyiinta sida, in qaddarada lacagta badan uu ansaxiyo Agaasimaha Guud (DG).			ku xeeran khiyaannadan.	Sarkaalka ka mas'uulka ah: Agaasimaha Guud/Agaasimaha Waaxda Khasnadda (DG/TD) Taariikhda Hirgelinta: Dhexe Faallada Hantidhowraha: Inkasta oo ay run tahay in Wasaaradda Maaliyadda ay arrinta si furan ugu soo wargelisay xafiiska hantidhowrka guud (OAG), haddana waa in la qaadaa tallaabooyin lagu soo celinayo lacagta ku lugta leh. Bayaamada maaliyadeed waa sidoodii oo waxba lagama beddelin.

Tix	Waxyaabihii la ogaadey	Halista	Mudnaanta	Soo-jeedimo	Jawaabta Maamulka iyo Tallaabada La-soo-jeediyay
	<u>Khayaanno ay ku kaceen siyaasiyiin</u> Lacag dhan USD 308,000 (doolar) ayaa bayaamada maaliyadeedka ee qabyo-qoraalka ah lagu sheegay in ay yihiin kharashaadka hantida aan maaliyadda ahayn. Waxaa la caddeeyay in qaddarada lacagta lagu diiwaangeliyay diiwaan ka mid ah nidaamka Bisan iyo sharraxaada, waxaa la tilmaamay qaddarada lacagta in mushahaar iyo gunnooyin ahaan loo siiyay siyaasiyiin. Ma lahan wax caddeymo ah oo la bixiyay oo lagu taageerayo kharashka in uu yahay midkood hanti aan maaliyad ahayn ama lacag-bixin la siiyay siyaasiyiin. Waxay u badan tahay macaamil(macaamulaad) khiyaanno ah in uu dhacay. Lacag dheeraad ah oo dhan USD 122,000 (doolar) ayaa bayaamada maaliyadeed ee qabyo-qoraalka ah lagu sheegay in ay tahay lacag-bixinno la siiyay siyaasiyiin. Iyadoo dib loo eegayo bayaamada bankiga, ayaa waxaa la caddeeyay in qaddarada lacagta loo qaybiyay afar shakhsi(qof) sida lagu muujiyay Lifaafa 4aad. Ma jiraan wax caddeymo ah oo la adeegsan karo oo lagu taageerayo in qaddarada lacagta in ay dhab tahay mushahaar ama gunnooyin ahaan in loo siiyay				

Tix	Waxyaabihii la ogaadey	Halista	Mudnaanta	Soo-jeedimo	Jawaabta Maamulka iyo Tallaabada La-soo-jeediyay
	siyaasiyiinta. Waxay sidoo kale u muuqataa in khiyaannada ay sabab u tahay in la sii wado isbeddel uu Wasiirka Maaliyadda ku sameeyay saxiixayaasha bankiga iyada oo aan la raacin nidaamka iyo habraaca sharciga ah.				
Adeegsiga xad-dhaafka ah ee lacag-bixinnada kaashka ah					
4.2	Tallaabo muhiim ah oo lagu gaarayo diiwaan maaliyadeed sax ah waa in la yareeyo ku tiirsanaanta isticmaalka lacag-bixinnada kaashka ah. Lacag-bixinnada kaashka ah ayaa waxaa lala xiriiyaa halis iyo il-duuf heer koodu sarreeyo marka loo eego noocyada kale ee lacag-bixinnada. Halisahan waxaa ka mid ah hawlaha khiyaannada ah iyo suuragalnimada in shakhsiyaadku ay isdabamariyaan maaliyadaha. 5.2 ee Xeer nidaamiyaha 4aad ee Xeerka PFM ayaa dhigaya waa siyaasadda Dowlad-goboleedka Galmudug ee Soomaaliya (GSS) in dhammaan lacag-bixinta loo sameeyo qaab elektaroonig ah oo toos loogu shubayo xisaabta bankiga ee qofka wax iibinaya. Tani waxaa ay la halmaashaa lacag-bixinta alaabooyinka iyo adeegyada, oo ay ku jiraan mushaaraadka iyo gunnooyinka, lacagaha go'an ee la siiyo qofka shaqeeya.	Ku-tiirsanaanta lacag-bixinnada kaashka ah ayaa kordhiya halista in maaliyadaha dowladda la lunsado, la xado ama in tagu takrifalo oo loo adeegsado dano gaar ah.	Sare	Maamulka waa in uu ku soo rogo xaddidaad sare isticmaalka lacag-bixinta kaashka ah lacag-bixinnada waa in si toos ah loogu shubo xisaabaha bankiga shaqaalaha/kuwa wax laga soo iibsado mar walba oo ay suuragal tahay.	Waafaqsan/Oggol: Wasaaradda Maaliyadda ayaa ku dedaali doonta in ay si joogto ah u sii wanaajiso tayada dokumentiyada taageeraya dhammaan lacag-bixinnada Sarkaalka Ka Mas'uulka ah: Agaasimaha Waaxda Khasnadda, Agaasimaha Waaxda Wax-soo-iibsiga Taariikhda Hirgelinta: Dhexe

Tix	Waxyaabihii la ogaadey	Halista	Mudnaanta	Soo-jeedimo	Jawaabta Maamulka iyo Tallaabada La-soo-jeediyay
	Intii lagu guda jiray baaritaankeenna ee lacag-bixinnada la bixiyay, ayaa waxaannu oggaaney in lacag dhan USD 1,472,624, (oo u dhiganta 46% ee guud ahaan kharashaadka la soo sheegay) in kaash ahaan lagu bixiyay waxayna kala ahaayeen lacago lagu wareejiyay dowladaha hoose, mushaaraad la siiyay siyaasiyiin, gunnooyinka ciidanka amniga, iyo kharashaadka cuntada joogtada ah ee la siiyo ciidamada amniga. Faahfaahinta oo dhammeystiran ayaa waxaa lagu bixiyay Lifaafa 5aad.				
Lacag-bixinno aan la taageerin/si dad ku filan aan loo taageerin					
4.3	Tallaabo muhiim ah oo lagu gaari karo diiwaanno maaliyadeed oo sax ah waa hubinta in lacag-bixinnada oo dhan si dad ku filan loo taageeray iyo in lagu soo lifaaqo dhammaan dokumentiyada taageerada sida warqadda xawilaadda bankiga, qaansheegyada, warqadda koridda diyaaradaha, qandaraasyada iyo warqadaha guddoonka alaabta. Waxaannu oggaaney lacag-bixinno wadartoodu dhan tahay USD 730,145 (oo u dhigma 23% ee guud ahaan kharashaadka) in aanan si ku filan loo taageerin sida lagu muujiyay Lifaafa 6aad. Intaa waxaa dheer, lacag-bixinno dhan USD 928,610 (oo u dhigma 29%) in aysan	Way adag tahay in la xaqiijiyo saxnaanta iyo baadi-sooco lacag-bixinnada sida lagu shaaciyay bayaamada maaliyadeed. Sidoo kale waxaa adag in la xaqiijiyo alaabooyinka iyo adeegyada lacagahooda la bixiyay in si dhab ah loo helay iyo in kantaroolada lacag-bixinta si habboon loo dhaqangeliyay.	Sare	GSS waa in ay u hoggaansanto kantaroolada maaliyadeed ee jira si loo diyaariyo oo loo joogteeyo diiwaannada maaliyadeed ee habboon si loo taageero dhammaan lacag-bixinnada baxay. Wax lacag-bixinno ah waa in aanan la fulin bixintooda iyadoo aanan la keenin dokumentiyo taageeraya.	Waafaqsan/Oggol: Wasaaradda Maaliyadda ayaa ku dedaali doonta in ay si joogto ah u sii wanaajiso tayada dokumentiyada taageeraya dhammaan lacag-bixinnada Sarkaalka Ka Mas'uulka ah: Agaasimaha Waaxda Khasnadda Agaasimaha Wax-soo-iibsiga Taariikhda Hirgelinta: Muddo dhexe

Tix	Waxyaabihii la ogaadey	Halista	Mudnaanta	Soo-jeedimo	Jawaabta Maamulka iyo Tallaabada La-soo-jeediyay
	gebi ahaanba lahayn wax dokumentiyo ah oo taageeraya, sida lagu faahfaahiyay Lifaafa 7aad.				
Khaladka kala-sooca lacag-bixinnada					
4.4	Kantarool maaliyadeed oo muhiim ah waa hubinta in dhammaan lacag-bixinnada loo diiwaangeliyo si sax ah iyo in si sax ah loo kala-saaro. Intii lagu guda jiray hantidhowrkeenna, ayaa waxaannu oggaaney kharashaad guud ahaan dhan USD 445,911 (oo u dhigma 14% ee wadarta guud ee kharashaadka) in si khaldan loo kala-soocay oo lagu diiwaangeliyay xisaabo khalad ah sida lagu faahfaahiyay Lifaafa 8aad.	Khaladka kala-sooca xisaabaha lacag-bixinnada ayaa waxaa ka dhalan kara warbixin maaliyadeed khalad ah.	Sare	Waxaan ku talineynaa in GSS ay si habboon u soocdo uguna diiwaangeliso lacag-bixinnada xisaabaha ku habboon iyo sidoo kale in ay saxdo bayaamada maaliyadeed ee qabyo-qoraalka ah sidaa daraadeedna waxaa si sax ah loogu soo sheegayaa macaamulaadkan.	Aan Waafaqsanayn/Diiddan GSS COA ayaa fulisay amarka GFSM2014, Kharashaadka ayaa la kala-soocay oo la waafajiyay xisaabta saxda ah. Dib-u-eegistii lagu sameeyay khaladaadka ee la isku raacay Disembar 2019 ayaa muujisay yaraanshaha khaladaadka ka jira diiwaannada macaamulaadka in ay ka badan tahay 70% waxaanna keliya la aqoonsaday 7 waxyaabood oo si khalad ah loo diiwaangeliyay. Sarkaalka Ka Mas'uulka ah: Agaasimaha Waaxda Khasnadda iyo Madaxa EAFs Taariikhda Hirgelinta: 28/12/2020 Faallada Hantidhowraha: Qaddarada lagu sheegay Lifaafa 8aad ayaa si khalad ah waxaa loogu soocay bayaamada maaliyadeed.
Kala-saarid la'aanta waajibaadka geeddi-socodka lacag-bixinta					
4.5	Kala-saaridda waajibaadka geeddi-socodka lacag-bixinta oo dad ku filan waa in uu jiraa. Tani waxaa ka mid noqon doonna, tusaale ahaan,	Liidashooyinka ka jira kala-saaridda waajibaadka ayaa keeni kara lacag-bixinno la been-abuuro ama il-duuf ku	Sare	GSS waa in ay xaqiijiso in foomka qoondoynta maaliyadaha in ay si sax ah uga soo shaqeyso Waaxda	Waafaqsan/Oggol: Khaladkan waa la saxay qoondoynta maaliyadahana waxaa hadda sameeya

Tix	Waxyaabihii la ogaadey	Halista	Mudnaanta	Soo-jeedimo	Jawaabta Maamulka iyo Tallaabada La-soo-jeediyay
	bilaabidda iyo oggolaanshaha lacag-bixinta, diiwaangelinta macaamulaadka lacag-bixinta, dib-u-eegista iyo xaqiijinta lacag-bixinnada. Kantaroolladan habboon ayaa waxay yareeyaan halista in maaliyadaha dowladda ay ku lumaan xatooyo ama il-duuf mid uu ahaadaba. Marxaladda koowaad ee geeddi-socodka fulinta Miisaaniyadda waxaa ay ku bilaabataa soo-saarista qiyaasaha (geeddi-socodka qoondoynta maaliyadda). Qoondoynta Maaliyadda waa in ay bixisaa Waaxda Miisaaniyadda. Marka aynu tijaabinay muunad lacag-bixinno la bixiyay ah, ayaa waxaan oggaaney in Waaxda Khasnadda ay buuxinayso hannaanka qoondoynta maaliyadaha, iyadoo aan laga qaybgelin Waaxda miisaaniyadda, iyo sidoo kale sameynta lacag-bixinnada dhabta ah.	yimaada iyo sidoo kale lacag-bixinno loo bixiyo alaabooyin ama adeegyo dhab ahaantii la bixin ama la keenin.		Miisaaniyadda ka hor inta aan la bixin wax lacag-bixinno ah.	oo keliya waaxda miisaaniyadda Sarkaalka Ka Mas'uulka ah: Agaasimaha Waaxda Miisaaniyadda Taariikhda Hirgelinta: Degdeg ah

5. Wax-soo-iibsiga

Tix	Waxyaabihii la ogaadey	Halista	Mudnaanta	Soo-jeedimo	Jawaabta Maamulka iyo Tallaabada La-soo-jeediyay
U-hoggaansamid la'aanta tilmaamaha wax-soo-iibsiga ee lagu tartamo					
5.1	3.5.1 ee Xeeridaamiyaha 8aad ee Xeerka PFM wuxuu dhigayaa waa in uusan wax-soo-iibsiga bilaaban haddii loo soo-iibiyay si waafaqsan qodobada lagu heshiiyay mooyaane ee ah sida lagu faahfaahiyay Buuggan Habraacyada Wax-soo-iibsiga, iyo halka lagu dabaqi karo, Qorshayaasha Wax-soo-iibsiga ee la ansixiyay. Markii aan dib-u-eegnay hannaanka wax-soo-iibsiga, ayaa waxaannu oggaaney xaalado aanan la raacin Buugga Wax-soo-iibsiga. Xaaladahan waxaa ka mid ah soo-iibsiga cuntooyinka sida joogtada ah loo bixiyo iyo qalab xafiiseed loogu talagalay Qaybta Gacan-ka-siinta Ammaanada ee Dibadda Ka ah Hay'adda / External Assistance Fiduciary Section (EAFS). eeg Lifaafa 9aad.	U hoggaansamid la'aanta xeeridaamiyayaasha wax-soo-iibsiga. Waxay sidoo kale keeni kartaa khiyaanno iyo xatooyo iyo qiimaha lacagta oo liita in lagu sameeyo wax-soo-iibsiga dowladda.	Sare	Waxaan ku talineynaa in GSS ay xaqiijio in dhammaan alaabooyinka, shaqooyinka, adeegyada la-talinta iyo kuwa aan la-talinta ahayn in la soo iibiyo iyada oo la adeegsanayo hababka wax-soo-iibsiga ee ku xusan Buugga Wax-soo-iibsiga.	Waafaqsan/Oggol: Xaaladaha loo baahan yahay in la raaco buugga wax-soo-iibsiga ayaa la sixi doonnaa waxaanna wax looga qaban doonnaa sida in ay tahay qorshe hawleed degdeg ah. Sarkaalka Ka Mas'uulka ah: Agaasimaha Wax-soo-iibsiga Taariikhda Hirgelinta: Degdeg ah
La'aanta qorshaha wax-soo-iibsiga sannadlaha ah					
5.2	Sida ku xusan 3.1.1 ee Xeeridaamiyaha 8aad ee Xeerka PFM, GSS waa in ay diyaariso qorshayaal wax-soo-iibsi mudadiiba mar ah oo loogu talagalay helidda alaabo, shaqooyin, la-taliye, iyo adeegyada aan la-talinta ahayn. Si kastaba ha ahaatee, intii lagu guda	Qorshe la'aanta wax-soo-iibsiga ayaa sii adkeynaysa in la qorsheeyo soo-iibsiga waxyaabaha kala duwan ee muddo ka-dibba la rabo in la soo iibsado. Qorsheynta wax-soo-iibsiga oo aan dad ku filnayn ayaa	Dhexe	GSS waa in ay diyaarisaa Qorshaha Wax-soo-iibsiga Sannadlaha ah ee loogu talagalay dhammaan alaabooyinka, shaqooyinka, adeegyada la-talinta iyo kuwa aan la-talinta ahayn ee loo baahan yahay si loo hirgeliyo	Waafaqsan/Oggol: Qorshaha wax-soo-iibsiga ayaa la diyaarin doonna lana dhaqangelin doonnaa sannad maaliyadeedka 2020 Sarkaalka Ka Mas'uulka ah:

Tix	Waxyaabihii la ogaadey	Halista	Mudnaanta	Soo-jeedimo	Jawaabta Maamulka iyo Tallaabada La-soo-jeediyay
	jiray hantidhowrka, ayaa waxaannu aqoonsanay in GSS aysan diyaarin qorshaha wax-soo-iibsiga sannadlaha ah.	macnahiisa noqon kara in alaabooyinka iyo adeegyada loo baahan yahay in aan la soo-iibin waqti habboon ama tilmaamaha loo baahan yahay.		mashaariicda loo baahan yahay. Qorshahan waa in uu si toos ah ugu xirnaado habka miisaaniyad dejinta sannadlaha ah.	Agaasimaha Wax-soo-iibsiga Taariikhda Hirgelinta: Dhexe
La'aanta guddiga wax-soo-iibsiga					
5.3	2.1.1 ee Xeeridaamiyaha 8aad ee Xeerka PFM wuxuu dhigayaa Guddi Wax-soo-iibsi ayaa waxaa laga aasaasaya GSS gudaheeda Guddiga Wax-soo-iibsiga waa in uu dib-u-eegaa habraacyada wax-soo-iibsiga dowlad-goboleedka GSS, dokumeentiyada, qiimaynta tartanka qandaraaska, talooyinka qandaraas bixinta, iyo qandaraasyada si loo hubiyo in hannaanka wax-soo-iibsiga loo fuliyo si waafaqsan habraacyada lagu heshiiyay. Intii lagu guda jiray hantidhowrka, ayaa waxaan oggaaney in GSS aysan aasaasin guddigaasi.	U hoggaansamid la'aanta xeeridaamiyada. Kantaroolka iyo baaritaanka la sameeyay oo aan ku filnayn wax-soo-iibsiga dowladda.	Sare	Dowlad-goboleedka GSS waa in ay aasaasaa Guddi Wax-soo-iibsi oo dib-u-eegaya habraacyada wax-soo-iibsiga, dokumeentiyada, qiimaynta tartanka qandaraaska, talooyinka qandaraas bixinta.	Waafaqsan/Oggol: Guddi wax-soo-iibsi ayaa loo magacaabi doonaa dhammaan wax-soo-iisiga waaweyn waxaanna la hawlgelin doonaa sannad maaliyadeedka 2020. Sarkaalka Ka Mas'uulka ah: Wasiirka Taariikhda Hirgelinta: Dhexe
La'aanta dokumentiyada wax-soo-iibsiga ee asalka ah					
5.4	Iyada oo qayb ka ah diiwaanada wax-soo-iibsiga, Dowlad-goboleedka GSS waxaa ay hayn doontaa dhammaan dokumeentiyada marka la eego qandaraas kasta oo ka mid ah, balse aan ku xaddidnayn, dokumeentiga asalka ah ee qandaraaska oo saxiixan, falanqaynta soo-jeedimada kala duwan, talooyinka loogu talagalay qandaraas bixinta,	La'aanta dokumentiyada wax-soo-iibsiga ee asalka ah ayaa ka dhigaysa mid aad u adag hubinta asal ahaanta dokumentiyada iyo hannaanka wax-soo-iibsiga ee la sameeyay.	Dhexe	GSS waa in ay gal gelisaa oo ay haysaa dhammaan dokumentiyada wax-soo-iibsiga ee asalka ah iyo dokumentiyada taageeraya iyada oo looga gol-leeyahay ujeedooyinka hantidhowrka iyo kantaroolka maamulka.	Waafaqsan/Oggol: Waxa la bixiyay ma ahayn koobbiyo laakin waxay ahaayeen nuqullo kombiyuutar (elektaroonig ahaan loo saxiixay) ama dokumeentiyo la iskaan-gareeyay. Waaxda wax-soo-iibsiga GSS ayaa fayl gareyn doontaa dhammaan dokumentiyada oo fayl kombuyutar ah iyo iyaga oo

Tix	Waxyaabihii la ogaadey	Halista	Mudnaanta	Soo-jeedimo	Jawaabta Maamulka iyo Tallaabada La-soo-jeediyay
	diiwaanka ansixinta Dowlad-goboleedka, iyo diiwaanka cabashada ama muran kasta ee ka yimaada tartamaha qandaraaska sida lagu sheegay 2.2.1 ee Xeerndaamiyaha 8aad ee Xeerka PFM. Si kastaba ha ahaatee, intii lagu guda jiray dib-u-eegista, ayaa waxaannu oggaaney in dokumentiyada wax-soo-iibsiga ee ay dowladdu bixisay si loo baaro in aaney ahayn nuqullada asalka ah; dhammaantooda waxay ahaayeen nuqullo koobi ah.				daabacanba. Sarkaalka Ka Mas'uulka ah: Agaasimaha Wax-soo-iibsiga Taariikhda Hirgelinta: Degdeg ah

6. Hantida aan muddo gaaban la caddeysan karin (Non-current Assets)

Tix	Waxyaabihii la ogaadey	Halista	Mudnaanta	Soo-jeedimo	Jawaabaha Maamulka iyo Tallaabooyinka La-soo-jeediyay
Hantida laguma diiwaangelin nidaamka maareynta hantida					
6.1	Sida ku xusan 1.4 ee Xeeridaamiyaha 9aad ee Xeerka PFM, dhammaan hantida waa in la geliyo Diiwaanka Dhexe ee Hantida Raasamalka ah. Intii lagu guda jiray dib-u-eegista hantideenna, ayaa waxaannu oggaaney nidaamka maareynta hantida in ay ku jiraan oo keliya kombiyuutarro uu bixiyay mashruuca PREMIS. Nidaamka kuma jiraan diiwaannada hantida kale ee ay dowladdu iska leedahay.	Dhimanaanshaha ka jira diiwaanka hantida GSS ayaa ka dhigaya mid aan suuragal ahayn in si dhab ah loo xaqiijiyo dhammaan hantida la hayo waxayna kordhinaysaa halista in lagu takrifalo iyo in la xado.	Sare	Waxaan ku talineynaa dhammaan hantida dowladda in lagu diiwaangeliyo nidaamka Maareynta hantida sida ku cad Xeerka PFM.	Waafaqsan/Oggol: Qalabka iyo alaabooyinka xafiiska ee Wasaaradda Maaliyadda ayaa lagu diiwaangeliyay nidaamka maareynta hantida. Sarkaalka Ka Mas'uulka ah: Agaasimaha Waaxda Wax-soo-iibsiga iyo Agaasimaha Waaxda Khasnadda Taariikhda Hirgelinta: degdeg Faallada Hantidhowraha: Hantida dowladda badankeeda hadda laguma diiwaangelin nidaamka maareynta hantida.
Sii-wanaajinta nidaamka maareynta hantida					
6.2	Qodobka 3.3 ee Xeeridaamiyaha 9aad ee Xeerka PFM ayaa dhigaya Wasaaradda Maaliyadda waa in ay maamushaa Diiwaanka Dhexe ee Hantida Raasamaalka ah ee guud ahaan dowladda, kaas oo ay tahay in uu maamulo Agaasimaha Guud ee	--Tirin la'aanta hantida in ay keeni karto hantida in lagu takrifalo ama la lunsado. --Calaamad la'aanta hantida ayaa adkeynaysa in lala socdo, la aqoonsado, la raadraaco iyo in la kantaroollo hantida.	Sare	--Si loo joogteeyo diiwaanka hantida oo sax ah, ayaa waxaan ku talinaynaa in GSS ay ku sameyso xaqiijin la taaban karo dhammaan hantida ay hayaan, dhammaan hay'adaha, ugu yaraan, si sannadle ah. --Dhammaan hantida GSS waa in si habboon loo calaamadiyaa iyadoo loo	Waafaqsan/Oggol: Tilmaanta L ayaa la soosaari doonnaa sannadka dhammaadkiisa, si kastaba ha noqotee sameynta tirinta hantida ee loo sameeyo si itus oo itaabsii ah iyo dib-u-

Tix	Waxyaabihii la ogaadey	Halista	Mudnaanta	Soo-jeedimo	Jawaabaha Maamulka iyo Tallaabooyinka La-soo-jeediyay
	Wasaaradda Maaliyadda. Qodobka 5.3.1 ee xeernidaamiyaha 9aad ee Xeerka PFM ayaa dhigaya si loo joogteeyo diiwaan sax ah oo laga hayo hantida, waa in si itus oo itaabsii ah loo tiriyaa hantida guud ahaan hay'adaha, ugu yaraan, sanadkiiba mar. Sidoo kale qodobka 4.2 ee Xeernidaamiyaha 9aad ee Xeerka PFM ayaa dhigaya dhammaan hantida raasamaalka ah ee la geliyo Diiwaanka Hantida Raasamaalka ah waa in si ku habboon loo calaamadiyaa (lagu dhejiyaa calaamad aan ka go'in) lana siiyaaa lambar u gaar ah oo lagu aqoonsado. si kastaba ha ahaatee, intii lagu guda jiray baaristeenna, waxaannu oggaaney in; --Aan la sameyn tirinta hantida ee loo sameeyo si itus oo itaabsii ah. --Hantida aanan la calaamadin.			yeelayo lambarro gaar ah oo lagu aqoonsado.	xoojinta calaamadaynta hantida ayaa la sameyn doonnaa sannadka 2020 Sarkaalka Ka Mas'uulka ah: Taariikhda Hirgelinta: Degdeg ah
Lama sameyn hantida in mid mid loo waafajiyo buugaagta xisaabaadka.					
6.3	Qodobka 4.2 ee xeernidaamiyaha 6aad ee Xeerka PFM ayaa dhigaya GSS waa in ay hantida mid mid u waafajisaa buugaagta xisaabaadka haseyeeshee dib-	In aan hantida mid mid loo waafajin buugaagta xisaabaadka ayaa keeni karta suuragalnimada kala-duwanaansho in uu u dhaxeeyo hantida taalla iyo tan	Dhexe	Waxaan ku talinaynaa in is-waafajin joogto ah in lagu sameeyo hantida (diiwaanka hantida ee la joogteeyo) iyo buugaagta xisaabaadka (Bisan). Waa in uu eego oo uu ansaxiyo mid ka mid ah saraakiisha sarsare ee loo	Waafaqsan/Oggol: Tilmaanta L ayaa la soosaari doonnaa sannadka dhammaadkiisa, si kastaba ha noqotee

Tix	Waxyaabihii la ogaadey	Halista	Mudnaanta	Soo-jeedimo	Jawaabaha Maamulka iyo Tallaabooyinka La-soo-jeediyay
	u-eegisteennada hantida, ayaa waxaannu ku oggaanay in aan la sameyn hantida in mid mid loo waafajiyo buugaagta xisaabaadka.	ku qoran buugaagta xisaabaadka.		igmadey. Dokumentiyada taageeraya ee loogu talagalay is-waafajintan waa in la hayaa si loogu adeegsado kantarool dhinaca maareynta ah iyo ahdaaf la xiriira hantidhowrka, waana in la fayl-gareeyaa iyaga oo fayl kombuyutar ah iyo iyaga oo daabacanba.	sameynta tirinta hantida ee loo sameeyo si itus oo itaabsii ah iyo dib-u-xoojinta calaamadaynta hantida ayaa la sameyn doonnaa sannadka 2020 Sarkaalka Ka Mas'uulka ah: Agaasimaha Waaxda Wax-soo-iibsiga (PD) iyo Agaasimaha Waaxda Khasnadda (TD) Taariikhda Hirgelinta: dhexe
Laabtoobyada dowladda oo aysan soo celin shaqaalihii hore					
6.4	Sida ku cad Qaybta 20.6 ee Xeerka CSC, Xarumaha iyo qalabka la siiyo shaqaalaha rayidka ah ee ahdaafta laga leeyahayna ay tahay in ay ku gutaan waajibaadkooda shaqo ayaa ahaanaya hantida maamulka, waa in la ilaaliyo, oo lagu soo celiyo hay'adda uu u shaqeeyo haddii shaqaalaha uu shaqada isaga tago sabab kastaba ha noqotee ama loo beddelo shaqo kale. Intii aan ku guda jirnay wadahalallo aan la yeellanay maamulka Wasaaradda Maaliyadda (MOF), waxaa la soo sheegay in qaar ka mid ah	Isdabamarinta ama xadidda hantida GSS.	Dhexe	Waxaan ku talineynaa dhammaan hay'adaha dowladda in ay hubiyaan shaqaalaha shaqada isaga tagay sabab kastaba ha noqotee ama loo dhiibo xil kale in ay soo celiyaan dhammaan hantida dowladda.	Waafaqsan/Oggol: In kasta oo su'aashan ay tahay in uu CSC-ka ka soo jawaabo. haddana anniga oo ah Agaasimaha Waaxda Khasnadda waxaan dhihi lahaa waxaa suuragalka ah anniga oo ku saleynaya inta aan ka oggahay kombiyuutarrada dhabta la saarto (Laptops). Waxaan rabaa in aan caddeeyo in dadka intiisa badan ee aan weli soo celin in ay yihiin shaqaale dowladda u shaqeeya balse uu qofku u wareegay hay'ad kale, ma oggola in

Tix	Waxyaabihii la ogaadey	Halista	Mudnaanta	Soo-jeedimo	Jawaabaha Maamulka iyo Tallaabooyinka La-soo-jeediyay
	shaqaalahii ray'idka ahaa ee shaqooyinka ka tagey in aysan weli soo celin laabtoobyadii dowladda. Maadaama aan la buuxin diiwaanka hantida (eeg 7.1) suuragal ma ahayn in la qiyaaso inta uu khasaaraha la egyahay.				uu soo celiyo laabtoobkiisa sababta oo ah wuxuu aaminsan yahay in uu weli ka tirsan yahay dowladda sidaa daraadeed habka keliya ee aan awoodno waa in aan qofka ogeysiinno in uu haysto kombiyuutar ay dowladdu leedahay. Sarkaalka Ka Mas'uulka ah: Agaasimaha Waaxda Khasnadda (TD)

7. Shaqo-qorista

Tix	Waxyaabihii la ogaadey	Halista	Mudnaanta	Soo-jeedimo	Jawaabaha Maamulka iyo Tallaabooyinka La-soo-jeediyay
Qorista macallimiinta ay maalgeliyaan Hay'adaha Aan Dowliga Ahayn (NGO) oo aan lagu tartamin					
7.1	Sida ku xusan Qaybta 22aad ee Xeerka CSC ee 2017, marka ay dowladdu ka codsato deeq-bixiye in uu maalgeliyo xil gaar ah oo ka tirsan adeegga rayidka ah, oo deeq-bixiyuhunna oggolaado codsiga, shaqaalaha qabanaya xilalka uu deeq-bixiyuhu maalgeliyo waxaa ku waajiba shuruudaha shaqaaleynta ee ku dhigan Xeerka CSC. Intii lagu guda jiray baaritaankeenna waxaannu oggaanay ku dhowaad 345 macallimiin, oo ay maalgeliyeen NGO-yo caalami ah, in aan loo qorin si lagu tartamay iyadoo la raacayo habraacyada ku dhigan Xeerka CSC.	U-hoggaansamid la'aanta Xeerka CSC ee 2017. Shaqaalaha ugu wanaagsan ayaa laga yaabaa in aanan la qorin oo aanan la shaqaaleyn.	Dhexe	Shaqaalaha haya xilalka ay maalgeliyaan deeq-bixiyeyaasha waa in shaqada lagu qoro iyadoo loo marayo hannaanka shaqo-qorista CSC ee caadiga ah.	Qorista 345 macallin oo la shaqaaleeyay oo uu maalgeliyay Barnaamijka RCRF ayaa waxaa si buuxda u sameeyay Wasaaradda Waxbarashada doorka keliya ee ay ka qaateen xafiiska guddiga shaqaalaha rayidka ah wuxuu ahaa taageero farsamo iyo kormeerka hawlaha shaqo-qorista. Kaalinteenu waxay ahayd oo keliya in aan kala talinno habka ugu wanaagsan ee lagu qori karo macallimiinta balse go'aanka kama dambeysta ah waxaa iska lahaa wasaaradda waxbarashada. Si kastaba ha ahaatee, si loo hubiyo hannaan shaqo-qoris xor ah, caddaalad ku saleysan, oo lagu kalsoonaan karo in la helo mustaqbalka, waxaannu ku talinaynaa in guddiga CSC uu horseed ka noqdo shaqo-qoris kasta ee ay dowladdu sameynayso haddii kale loo-shaqeeyaha ayaa ka mas'uul noqonaya wixii cawaaqib-xumo ah ee ka dhasha. Sarkaalka Ka Mas'uulka ah:

Tix	Waxyaabihii la ogaadey	Halista	Mudnaanta	Soo-jeedimo	Jawaabaha Maamulka iyo Tallaabooyinka La-soo-jeediyay
					Abdirizak Hersi Mohamud Taariikhda Hirgelinta:
Xaalad saxiix been-abuur ah lagu adeegsaday si loo diiwaangeliyo guddi wareysi					
7.2	Qodobka 4.1 ee Xeeridaamiyaha 1aad ee Xeerka CSC ayaa dhigaya Guddoomiyaha Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah ama wakiilka uu isaga/iyada wakiishay in uu magacaabi doonno guddiga shaqo-qorista si uu dib-u-eegis ugu sameeyo codsiyada oo u sameeyo soojeedimada ku saabsan magacaabista shaqaalaha buuxinaya xilka(xilalka) bannaan. Faahfaahinnada xubnaha ku saabsan guddiga shaqo-qorista waa in la qoraa oo uu saxiixaa xubin kasta si uu ugu muujiyo ballanqaadkiisa in uu ilaalinayo sirka iyo dhexdhexaadnimada hannaanka shaqo-qorista iyo xulashada. Intii lagu guda jiray hantidhowrka, ayaa waxaannu aqoonsanay hal xaalad halkaasi oo saxiix been-abuur ah lagu adeegsaday si loo diiwaangeliyo natiijooyinka guddiga wareysiga qaadayay. Xaaladdan ayaa waxay la xiriirtay qorista shaqaalaha xafiiska OAG oo saxiixa la been-abuurayna wuxuu ahaa saxiixa sarkaal sare oo ka tirsan xafiiska OAG.	U-hoggaansamid la'aanta Sharciga CSC. In aan la magacaabin musharraxiinta ugu habboon ama ugu wanaagsan.	Sare	Guddiga CSC waa in uu baaris ku sameeyaa dhacdadan. Dhammaan ka-qaybgalayaasha guddiyada wareysiga waa in loogu yeeraa in ay bixiyaan saxiixyada asalka ah. Qoraallada guddiga wareysiga ee kama-dambeysta ah oo saxiixan waa in iimaylka loogu diraa dhammaan ka-qaybgalayaasha marka la soo gunaanado hannaanka.	Tani waxay noqon doontaa cashar wax laga bartey waxaanna filaynaa in aanan lagu soo celin. Sarkaalka Ka Mas'uulka ah: Abdirizak Hersi Mohamud Taariikhda Hirgelinta:

8. Miisaaniyad

Tix	Waxyaabihii la ogaadey	Halista	Mudnaanta	Soo-jeedimo	Jawaabaha Maamulka iyo Tallaabooyinka La-soo-jeediyay
Liidashooyin ka jira habraacyada miisaaniyadda					
8.1	Waa muhiim in diyaarinta miisaaniyad sannadeedda ay raacdo hannaan nidaamsan oo ay ka qaybgalayaan dhammaan kuwa ay saameyso. Iyadoo la raacayo Qaybta 11(3) ee Xeerka PFM ee 2017, Meertadan miisaaniyad-diyaarinta waa in ay ka koobnaataa laba weji, wejiga hore oo xoogga saaraya waraaq ku saabsan qaabka guud ee loo diyaarinayo miisaaniyad iyo wareegga miisaaniyadda, iyada oo midka labaadna uu xoogga saarayo diyaarinta miisaaniyad-sannadeedda faahfaahsan oo taageereysa siyaasadaha iyo mudnaanaha lagu sheegey waraaqda qaabka guud ee miisaaniyadda. Intii lagu guda jiray dib-u-eegisteenna, waxaannu oggaaney in Wasaaradda Maaliyadda aysan diyaarin warqadda qaabka guud ee miisaaniyadda ee loogu talagalay miisaaniyadda sannad maaliyadeedka 2019.	Hannaanada miisaaniyadda ee aan dhammeystirnayn waxay wiiqi karaan isku-halleynta iyo ku kalsoonaanta miisaaniyad sannadeedda.	Dhexe	Waxaannu ku talinaynaa in GSS ay diyaariso dhammaan dokumentiyada miisaaniyadda iyo in ay mustaqbalka u hoggaansanto habraacyada miisaaniyadda sida ku cad Xeerka PFM ee 2017.	Waafaqsan/Oggol: In kastoo BFP oo qabyo-qoraal ah la diyaariyey sannad maaliyadeedka 2019, haddana BFP qayb kama ahayn dokumentiyadii loo gudbiyay baarlamaanka. Waxaa jira qorshayaal la dejiyay oo lagu hubinayo in BFP aan keliya la diyaarin balse uu qayb ka noqdo dokumentiyada loo gudbinayo baarlamaanka. Sarkaalka Ka Mas'uulka ah: Agaasimaha Waaxda Miisaaniyadda (BD) Taariikhda Hirgelinta: Degdeg ah
Soo-gudbinta qiyaasaha kharashaadka wasaaradaha kale oo aan dhammeystirnayn					
8.2	Intii lagu guda jiray hantidhowrka, ayaa waxaannu oggaaney in ay jiraan xaalado wasaaradaha kale aysan u soo	Soo-gudbin la'aanta qorshayaasha kharashaadka iyo soo-jeedinta mashruuca ee wasaaradaha kale ayaa yareyn	Dhexe	Dhammaan wasaaradaha kale waa in ay u soo gudbiyaan qorshahooda kharashaadka iyo soo-jeedinta Waaxda Miisaaniyadda inta lagu guda	Waafaqsan/Oggol: Soo-gudbinta qorshaha kharashaadka iyo dakhliga ee MDAs-yada si buuxda uma hawlgelin maadaama MDAs-yada

Tix	Waxyaabihii la ogaadey	Halista	Mudnaanta	Soo-jeedimo	Jawaabaha Maamulka iyo Tallaabooyinka La-soo-jeediyay
	gudbin qiyaasaha kharashaadka iyo soo-jeedinta mashruuca Waaxda Miisaaniyadda ee Wasaaradda Maaliyadda (MOF).	kara saxnaanta guud iyo lahaanshaha hannaanka dejinta miisaaniyad sannadeedda.		jiro waqtiga la isku raacay.	intooda badani ay ku jiraan marxaladda hore ee aasaaskooda mana lahan xafiisyo. Waxaa jira qorshayaal lagu hirgelinayo hawshan oo muddo dhexe ah. Sarkaalka Ka Mas'uulka ah: Agaasimaha Guud (DG) Taariikhda Hirgelinta:
Ma lahan korjoogteyn joogto ah oo lagu sameyo dakhliga iyo kharashaadka iyadoo loo eegayo miisaaniyadda					
8.3	Dib-u-eegisteenna, ayaa waxaan ku oggaaney in aaney jirin korjoogteyn joogto ah oo lagu sameeyo dakhliga, kharashaadka iyo maaliyadaha mashaariicda deeq-bixiyayaasha iyadoo loo eegayo miisaaniyadda.	Korjoogteyn la'aanta joogtada ah ee dakhliga iyo kharashaadka ayaa waxay macnaheedu noqon kartaa in aanan la aqoonsan oo aan la sixin khaladaadka.	Dhexe	GSS waa in ay korjoogteysaa dhammaan dakhliga iyo kharashaadka iyadoo loo eegayo miisaaniyadda oo si bille ah loo sameeyo. Dhammaan kuwa miisaaniyadda haya waa in loo diraa warbixinta miisaaniyadda bil kasta oo muujinaysa dhammaan summadaha ku hoos yaalla meelaha ay mas'uulka ka yihiin. Kala-duwanaansho kasta oo ka badan, aynu dhahno 10%, Waaxda Miisaaniyadda ee wasaaradda maaliyadda waa in ay si rasmi ah ula socoto kala-duwanaanshahan iyadoo soo-jeedinaysa tallaabada lagu saxayo ee loo baahan yahay.	Aan Waafaqsanayn/Diiddan Nidaamka FMIS ee GSS ayaa bixiya xogta waqtiga dhabta ah. Dakhliga iyo kharashaadka ayaa si maalinle ah loola socdaa xaqiiqdii nidaamyada ma oggola in kharashaad badan la isticmaalo. Intaa waxaa dheer, Wasaaradda Maaliyadda waa in ay wasiirka siisaa warbixinta dakhliga bil kasta waana in ay warbixinta qaybaha miisaaniyadda oo aan la baarin u dirtaa DFS/FGS. Warbixinnada saddexdii biloodba mar ayaa la diyaariyaa waxaanna lagu daabacaa mareegtada dowladda Sarkaalka Ka Mas'uulka ah: Agaasimaha Waaxda Miisaaniyadda iyo Kan Waaxda Khasnadda Taariikhda Hirgelinta: Degdeg (Waa la sameeyay)

Tix	Waxyaabihii la ogaadey	Halista	Mudnaanta	Soo-jeedimo	Jawaabaha Maamulka iyo Tallaabooyinka La-soo-jeediyay
					Faallada Hantidhowraha: Hannaanka korjoogteynta miisaaniyadda waa in la diiwaangeliyo si loo bixiyo raadraac hantidhowr oo dad ku filan.
Ma jiro qorshe hawlgal iyo mid istiraatiijik					
8.4	Intii hantidhowrka lagu guda jiray, waxaannu oggaaney in aaney dowladdu dejin qorshayaasha istiraatiijiga ah iyo qorshayaasha hawlgalka.	La'aanta dokumentyada qorsheynta istiraatiijiga ah iyo kan hawlgalka ayaa ku adkeynaya dowladda hirgelinta isbeddelka iyo in ay gaarto ujeeddooyinkeeda.	Dhexe	GSS waa in ay diyaariso qorshayaasha istiraatiijiga ah iyo kuwo hawlgalka, oo la xiriira miisaaniyad lagu kalsoonaan karo, oo faahfaahinnaya ujeeddooyinka dowladda dhowrka sano ee soo socda.	Aan Waafaqsanayn/Diiddan: Qorshe sannadeedka dowladda ayaa la qorsheynayaa waxaanna hormuud ka ah wasaaradda qorsheynta. Wasaaradda maaliyadda waxay leedahay qorshe hawleed dhowr ah sida wareegtada miisaaniyadda, kaaladarka miisaaniyadda, tilmaan ku saabsan fulinta miisaaniyadda iyo, qabanqaabada bankiyada. Sarkaalka Ka Mas'uulka ah: Taariikhda Hirgelinta:

9. Hantidhowka (Baaraha) Gudaha

Tix	Waxyaabihii la ogaadey	Halista	Mudnaanta	Soo-jeedimo	Jawaabaha Maamulka iyo Tallaabooyinka La-soo-jeediyay
Khadadka warbixinnada – hawsha hantidhowka (baaraha) gudaha					
9.1	Sida ku cad qaybta 34aad ee Xeerka PFM ee 2017, Wasiirrada wasaaradaha kale iyo madaxda wakaaladaha iyo hay'adaha dowladda ayaa ugu dambeynta mas'uul ka ah dhammaan hawlgallada iyo wada-tacaamulka maaliyadeed ee ka dhaca hay'adahooda / wasaaradahooda, kuwaas oo ay ka mid yihiin unugyada hoose ee ay kormeeraan ama ay kantaroolaan. Wasiirka ama madaxa waxaa gacan siinaya hantidhowrka gudaha, oo si toos ah warbixinta u soo siinaya, kaasi oo hawshiisu ay ka mid ahaaneyso waxyaabahan iyo kuwo kale, in uu muddo ka dibba dib-u-eego maareynta maaliyadda ee hay'adda ama unugga iyo sidoo kale in uu qiimeeyo sida ay dad ugu filan yihiin baaritaannada iyo is-dheellitirka (checks and balances), iyo kantaroolka, ee hab-dhaqannada maareynta maaliyadeed ee ay leeyihiin hay'adda ama unugga. Intii lagu guda jiray baaritaankeenna, waxaannu oggaaney in warbixinnada hantidhowka (baaraha) gudaha ee Wasaaradda Maaliyadda in	Wasiirrada kama warqabaan maareynta maaliyadeed ee muhiimka ah iyo arrimaha kale ee kantaroolka, sidaa daraadeedna, soo-jeedimada waxba lagama qaban.	Dhexe	Waxaan ku talineynaa hantidhowrayaasha gudaha ee Wasaaradda Maaliyadda in ay si toos ah warbixintooda u siiyaan Wasiirka Maaliyadda (iyo wasiir kasta oo kale oo ay khuseyso) sida uu dhigayo Xeerka PFM ee 2017.	Aan Waafaqsanayn/Diiddan: Sida ku cad liiska qaybinta ee halkan ku lifaaqan Wasiirka ayaa had iyo jeer ah qofka ugu horreeya ee helaya Warbixinta. Sarkaalka Ka Mas'uulka ah: Madaxa Hantidhowka (Baaraha) Gudaha Taariikhda Hirgelinta: Faallada Hantidhowraha: Waaxda hantidhowrka gudaha waa in ay keliya warbixinta si toos ah u siiso wasiirka.

Tix	Waxyaabihii la ogaadey	Halista	Mudnaanta	Soo-jeedimo	Jawaabaha Maamulka iyo Tallaabooyinka La-soo-jeediyay
	lala wadaagay Xog-hayayaasha Joogtada ah oo keliya iyo in aan si toos ah loola wadaagin Wasiirrada.				
La-socosho la'aanta maamulka ee warbixinnada hantidhowka (baaraha) gudaha					
9.2	In kastoo warbixinnada hantidhowka (baaraha) gudaha la soosaaro ka-dibna loo gudbiyo maamulka sare, haddana ma jiro nidaam lagu la soconayo in talooyinkii la soo-jeediyay la hirgeliyay iyo in kale.	Soo-jeedimada lama hirgelin.	Dhexe	Maamulka waa in ay si joogto ah ula socdaan warbixinnada hantidhowka (baaraha) gudaha si loo xaqiijiyo in talooyinkii la soo-jeediyay loo hirgeliyay sidii loogu talagalay.	Waafaqsan/Oggol: Waxaa jiray caqabad ku saabsan la-socoshada iyo hirgelinta arrimaha lagu soo hadal qaaday warbixinta hantidhowka (baaraha) gudaha. Haseyeeshee, Wasaaradda Maaliyada ayaa hadda dhaqangelisay hab lagula soconayao soo-jeedimada hantidhowrka gudaha iyo kan dibedda. Tani ayaa la hirgelin doonaa sannadka 2021. Eeg shaxda ku lifaaqan Sarkaalka Ka Mas'uulka ah: Madaxa Hantidhowka (Baaraha) Gudaha Taariikhda Hirgelinta: Jannaayo ilaa Disembar 2021
Baaxadda wax-ka-qabashada kiisaska khiyaannada ee hantidhowka (baaraha) gudaha					
9.3	Waxaannu oggaaney in hantidhowka (baaraha) gudaha uusan tixgelin kiisaskii khayaannada ee dhacay sannad maaliyadeedkii 2019.	Liidashooyinka kantaroolka gudaha ee muhiimka ah wax loogama qaban si haboon oo waqtiga waafaqsan.	Dhexe	Waxaannu ku talinaynaa hantidhowrayaasha ama baarayaasha gudaha ee GSS in ay dib-u-eegaan kiisas kasta oo khiyaanno ah ee dhacay. Warbixin kasta waa in markaa lagu soo bandhigaa soo-jeedimo degdeg ah oo lagu saxayo liidasho kasta oo kale ee ka dhex jirta nidaamka kantaroolka gudaha.	Waafaqsan/Oggol: Unugga hantidhowka (baaraha) gudaha ayaa sameeyay hantidhowr gudaha ah intii lagu guda jiray muddadii la sheegay wuxuunna oggaaday lacag-bixin xad-dhaaf ah oo aan caadi ahayn oo lacag badan ah taas oo aan ku muujinay warbixinteenna bishii Disembar 2019. Haseyeeshee, warbixinta si gaar ah oo qeexan uma

Tix	Waxyaabihii la ogaadey	Halista	Mudnaanta	Soo-jeedimo	Jawaabaha Maamulka iyo Tallaabooyinka La-soo-jeediyay
					sheegin ereyga khiyaanno. Waxaa intaa dheer, wasaaradda maaliyadda ayaa waxay qaaday tallaabooyin lagu saxayo maamulka iyo kuwa ciqaabeed oo wax looga qabanayo kiiska khiyaannada ee la sheegay. Tusaale ahaan, kiiska ayaa loo sheegay ciidanka booliska, ka-dibna waxaa xabsiga la dhigay sarkaalkii ku lugta lahaa isla-markaanna waxaa laga ceyriyay shaqada. Tallaabooyinka kale ee maamulka la xiriira ee la qaaday waxaa ka mid ah beddelaadda saxiixayaasha bankiga iyo adkeynta hannaanka lagu hubinayo jeegga ee bankiga. Sarkaalka Ka Mas'uulka ah: Madaxa Hantidhowka (Baaraha) Gudaha Taariikhda Hirgelinta: Isla-markiiba waa la sameeyay

10. Siyaasadaha iyo Hababka Ka-hortagga Khiyaannada

Tix	Waxyaabihii la ogaadey	Halista	Mudnaanta	Soo-jeedimo	Jawaabaha Maamulka iyo Tallaabooyinka La-soo-jeediyay
La'aanta siyaasadaha iyo hababka ka hortagga khiyaannada					
10.1	Waxaa jiray dhowr kiis oo ah khiyaanno dhowaan ka dhacday gudaha GSS. iyadoo la raacayo habka xilgudashada ugu habboon, hababka ka hortagga khiyaannada oo adag iyo kantaroollo ka jira dhammaan wasaaradaha dowladda ayaa ah hababka ugu wanaagsan ee ka hortagga khiyaannada iyo musuqmaasuqa. Hadda, ma jiraan siyaasado iyo habraacyo rasmi ah iyo qiimeynta halista oo rasmi ah oo si habboon loogu aqoonsan karo waxna loogaga qaban karo halisaha khiyaannada ee mugga weyn.	Halisaha khiyaannada ee khatarta ah lama aqoonsado, lamana tixgeliyo ama si ku filan wax loogama qaban.	Sare	GSS waa in ay diyaariso oo ah dhaqangeliso siyaasadda khiyaannada. Tani waa in lagu daraa kantaroolada muhiimka ah ee ku saabsan ka hortagga, oggaanshaha iyo baaritaanka eedaymaha khiyaannada. Waxaa intaa dheer, hannaanka qiimeynta halista oo rasmi ah in la sameeyo si halisaha khiyaannada khatarka loo tixgeliyo, qiimeeyo oo loo yareeyo.	Waafaqsan/Oggol: Waxaa jiray ugu yaraan hal kiis oo khiyaanno ah oo dhacay sannadkii 2019, in kastoo wasaaradda maaliyadda ay qaaday tallaabooyinkii loo baahnaa si wax looga qabto sarkaalkii ka mas'uulka ahaa, waxaannu ku raacsanahay in ay jirto siyaasadda la-dagaalanka khiyaannada oo habboon. Wasaaradda Maaliyadda ee GSS ayaa bilaabi doonta hannaan lagu dhaqangelinayo sharciyada la-dagaalanka khiyaannada ee habboon muddo dhow iyo muddo dhexeba. Sarkaalka Ka Mas'uulka ah: Wasiirka Taariikhda Hirgelinta: Degdeg/Dhexe

11. La-socoshada Soo-jeedimada Hantidhowrkii Sannad Maaliyadeedka (FY) 2018

Intii lagu guda jiray hantidhowrka ayaa waxaannu dabagal ku sameynay dhammaan soo-jeedimadii hantidhowrka ee la soo-jeediyay sannadadii hore. Xaaladda hadda ee soo-jeedimadan oo kooban ayaa lagu muujiyay shaxda hoose:

Xaaladda	Tirada Soo-jeedimada
La Hirgeliyay	1
Qayb Ahaan La Hirgeliyay	1
Aan La Hirgelin	11
WADARTA GUUD	13

Sidii sannadadii hore, horumarka laga gaarey hirgelinta soo-jeedimada hantidhowrka ayaa ahaa mid aad u yar. Waa muhiim in horumarkan uu horey u sii socdo. Si ujeedkan loo gaaro, Wasaaradda Maaliyadda (MOF) waa in ay hirgelisaa hab rasmi ah oo lagu qaadayo tallaabooyin lagu saxayo oo habboon.

Tix	Waxyaabadii La Oggaadey ee Asalka ah	Soo-jeedimada Asalka ah	Mudnaanta	Xaaladda	Tallaabada Dheeraadka ah ee Loo Baahan Yahay
Sii wanaajinta maamulka canshuurta					
11.1	Waxaanna ogaanney liidashooyinkan soo socda oo la xiriira canshuur ururinta iyo diiwaangelinta: i) Dakhli ururinta ma ahan nidaam iskii u hawlgala ama otomaatik ah. Canshuuraha la soo aruuriyey waxaa lagu taageeraa rasiid la siiyo canshuur bixiyaasha. Sidaa awgeedna, nidaamka canshuur ururinta kuma xirna Nidaamka Maareynta Dakhliga.	GSS waa in ay baraha canshuura lagu ururiyo ku diyaariso hab si buuxda habraacyada si toos ah kombiyuutar loogu sameynayo. Nidaamyada canshuur ururinta waa in si buuxda loo dhexgeliyaa nidaamyada xisaabaadka (accounting systems). Canshuurta la ururiyayna waa in marka hore lagu diiwaangeliyaa nidaamka RMS ka-dibna diiwaannada xisaabaadka waa in si otomaatik ah loo joogteeyaa. GSS waa in ay	Muhiim ah	Lama hirgelinin	GSS waa in ay hirgeliso soo-jeedinta OAG. Jawaabta Maamulka: Wasaaradda Maaliyadda ee GSS ayaa dejisay qorshe hawleed lagu raadraacayo oo lagu hirgelnayay soo-jeedimada hantidhowrkii hore. Raadraacidda soo-jeedimada hantidhowrkii hore ayaa la sameeyaa iyadoo la adeegsanayo qorsheeyaha loo yaqaanno Microsoft Planner. U noqo tixraaca GSS MOF Microsoft planner si aad u eegto wixii ku soo kordhay

Tix	Waxyaabahii La Oggaadey ee Asalka ah	Soo-jeedimada Asalka ah	Mudnaanta	Xaaladda	Tallaabada Dheeraadka ah ee Loo Baahan Yahay
	ii) Lambarrada tixraac ahaanta loo qondeeyo marka la diiwaangelinayo canshuurta la ururiyay ayaa waxaa laga soo qaataa lambarrada waraaqaha lacagta bankiga lagu shubay beddelkii laga soo qaadan lahaa kooxda rasiidyada la diyaariyay marka canshuuraha la diiwaangeliyo. iii) Xaashida iswaafajinta canshuuraha laguma sheegin diyaariye, dib-u-eege iyo ansixiye si loo muujiyo kala-saaridda waajibbaadka geeddi-socodka canshuur ururinta iyo diyaarinta, dib-u-egidda, iyo ansixinta iswaafajinta canshuurta oo waqtigii loo baahnaa la sameeyo. iv) Waxaan ogaanney kala duwanaa u dhaxeysa canshuurta la qabtay, tirada lacagaha lagu diiwaangeliyay buugga kaashka, tirada lacagaha bankiga lagu shubay. Muunadaha aan qaadnay, ayaan waxaan ku oggaaney in tirada lacagaha bankiga lagu shubay ay isle'eg yihiin tirada lacagaha lagu muujiyay buugaagta kaashka balse aysan waafaqsanayn canshuurta la qabtay.	sahamisaa qaababka lagu balaarinayo ilaha canshuur ururinta oo ay hubisaa in canshuur ururintu ay dhacdo sanadka oo dhan. Dhammaan diiwaangelinnada buugaagta la geliyo ee marxaladaha kala duwan ee meertooyinka dakhliga iyo xisaabaadka waa in lagu saleeyaa tixraacyo gaar ah oo laga soo qaatay dokumentiyada habboon ee lagu adeegsaday marxaladaha kala duwan.			

Tix	Waxyaabahii La Oggaadey ee Asalka ah	Soo-jeedimada Asalka ah	Mudnaanta	Xaaladda	Tallaabada Dheeraadka ah ee Loo Baahan Yahay
	v) Waxaan ogaanney xaalado badan oo rasiidyadu aaney muujin magaca sarkaalka canshuurta qaaday sidoo kalena aan muujin magaca sarkaalka ansixiyey rasiidka si loo diiwaangeliyo. b) Canshuuraha ayaa marka hore lagu diiwaangeliyaa qaybta FMIS ee sistem-ka BISAN (nidaamka xisaabaadka) oo ku saleysan tirada lacagaha bankiga lagu shubay ee laga soo xigtay bayaanka bankiga ka-dibna xogta waxaa lagu diiwaangeliyaa qaybta RMS ee Bisani (nidaamka canshuur ururinta). Habraaca hadda jira waa in marka hore lagu diiwaangeliyo nidaamka xisaabaadka ka-dibna lagu diiwaangeliyo nidaamka canshuur ururinta. Habraaca la filayay waa in marka hore canshuurta la qaaday lagu diiwaangeliyo nidaamka RMS, bankiga lagu shubo ka-dibna lagu diiwaangeliyo FMIS.				
Xisaabo Banki oo Aan La Shaacin					
11.2	Waxaannu xaqiijin banki ka helnay Bankiga Dhexe ee Soomaaliya oo muujineysa in lacag dhan 1,978 USD lagu hayay	Waxaan kula talineynaa GSS in ay faahfaahinnada xaqiijinnada xisaabaadka bankiyada ay ka dhigto qayb ka mid ah habraacyada sannadka	Muhiim ah	Lama hirgelinin	Dowlad-goboleeda GSS waa in lacagta ku jirta Bankiga Dhexe ee Soomaaliya u soo wareejiiso Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda.

Tix	Waxyaabahii La Oggaadey ee Asalka ah	Soo-jeedimada Asalka ah	Mudnaanta	Xaaladda	Tallaabada Dheeraadka ah ee Loo Baahan Yahay
	Xisaab Ir.1099 iyo in lacag dhan USD 88 lagu hayay Xisaab Ir. 780 (xisaab loo furay GSS ka hor inta aysan noqon Dowlad-goboleed waxaanna ku jirtay lacag dhan USD 88 oo ah haraaga furitaanka). Lacagta dhan USD 88 ee ku jirta CBS Xisaab Ir. 780 laguma darin Bayaamada Maaliyadeed ee Dowlad-goboleedka.	dhammaadkiisa ee waafaqsan buuggaagta habraaca. Intaa waxaa dheer, hab-dhaqan ahaan, Dowlad-goboleedka iyada oo u maraysa Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha (MoFED) waa in ay si joogto ah uga raadiso xaqiijin dhammaan bankiyada ganacsiga ku yaala gudaha Dowlad-goboleedka oo ku saabsan haddii Wasaaradaha Kale ama Hay'daha Dowladda ay u furan yihiin wax xisaabaad banki ah oo aysan ka warhayn. Sidoo kale, Dowlad-goboleedka waa in ay tixgeliso lacagta ku jirta Bankiga Dhexe ee Soomaaliya in loo soo wareejiyo Xisaabta Mideysan ee Waaxda Khasnadda.			
Sii wanaajinta habraacyada Iswaafajinta Bankiyada					
11.3	Iswaafajinta bankiga waxaa loo sameeyay si bille ah halkii loo sameyn lahaa si toddobaadle ah.	GSS waxay u hoggaansantay tilmaamahii loo baahnaa iyadoo xaqiijisay iswaafajinta bankiga in la sameeyo ugu yaraan toddobaad kasta. Taariikhda diyaarinta iyo dib-u-eegista bayaamada iswaafajinta bankiga waa in si fiican loogu qeexo dhabbetusayaasha Xafiiska Deeqaha. Tani waxaa ka mid ah sheegidda taariikhda iyo jagooyinka dib-u-eegayaasha iyo ansixiyayaasha. Waaxda Khasnadda ee Wasaaradda Maaliyadda iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee GSS waa in ay	Muhiim ah	Lama hirgelinin	GSS waa in ay xaqiijisaa sameynta dhammaan is-waafajinnada bankiga, in si toddobaadle ah loo daabaco iyo in gal la geliyo.

Tix	Waxyaabahii La Oggaadey ee Asalka ah	Soo-jeedimada Asalka ah	Mudnaanta	Xaaladda	Tallaabada Dheeraadka ah ee Loo Baahan Yahay
		diyaarisaa oo ay warqadaha xaqiijinta bankiga u dirtaa Bankiyada sannadka dhammaadkiisa iyada oo ka codsanaysa bankiyada in ay u soo xaqiijiyaan lacagaha ay u hayaan.			
Lacag-bixinno si aan dad ku filnayn loo taageeray					
11.4	Lacagaha la bixiyay laguma taageerin dokumentiyo.	Waxaan ku talinaynaa diiwaanno xisaabeed dad ku filan in la diyaariyo oo loo joogteeyo si loo taageero dhammaan kharashaadka baxay. GSS waa in ay diyaariso jadwalka dokumentiyada la filayo in loo helo qaybaha kala duwan ee mucaamalaadka.	Muhiim ah	Lama hirgelinin	Shaqaalaha Wasaaradda Maaliyadda waa in ay fayl-gareeyaan dokumentiyada taageeraya.
Isticmaalka xad-dhaafka ah ee lacag-bixinnada Kaashka ah					
11.5	In si xad-dhaaf ah loo isticmaalo lacag-bixinnada kaashka ah iyada oo lacag-bixinno aad u badan lagu hagaajiyay xisaab banki gaar loo leeyahay	GSS waa in ay yareysa ku tiirsanaanteeda lacag-bixinnada kaashka ah. Waxaa ay taa ku gaari kartaa iyada oo xaddidaysa heerka lacag-bixinnada kaashka ah oona ku soo rogaysa xadad sare.	Muhiim ah	Lama hirgelinin	GSS waa in ay lacag-bixinnada bixisaa iyadoo kuwa wax iibiya ee xaq u leh ama shaqaalaha u marsiinaysa xisaabaha bankiga.
Liidashada geeddi-socodka wax-soo-iibsiga					
11.6	GSS uma hoggaansamin habraacyada wax-soo-iibsiga lagu tartamo.	Maamulka waa in uu xaqiijiya in: a) Habraacyada wax-soo-iibsiga ee lagu tartamo in loo hoggaamsamo iyada oo la raacayo	Muhiim ah	Lama hirgelinin	GSS waa in ay qaado tallaabooyin lagu xoojinayo kantaroolada iyada oo xaqiijinaysa u hoggaansamidda Buugga Wax-soo-iibsiga Dowladda.

Tix	Waxyaabahii La Oggaadey ee Asalka ah	Soo-jeedimada Asalka ah	Mudnaanta	Xaaladda	Tallaabada Dheeraadka ah ee Loo Baahan Yahay
		dhabbetusayaasha iyo Xeer-nidaamiyayaasha Xeerka PFM. b) Waaxda Wax-soo-iibsiga MOFED ay diyaariso qorshayaasha wax-soo-iibsiga sannadlaha ah iyo in ay si joogto ah qiimeyn hore ugu sameyso shirkadaha ay wax ka iibsato.			
Liidashada maareynta hantida					
11.7	GSS-MOF kuma diiwaangelin dhammaan hantida dowladda diiwaanka hantida.	GSS waa in ay hantida dhammaanteeda ku diiwaangeliyo nidaamka maareynta hantida iyo sidoo kale hubinta in diiwaanka hantida la maalin joogteeyo.	Muhiim ah	Lama hirgelinin	GSS waa in ay xaqiijisaa in hantida dhammaanteeda lagu diiwaangeliyo nidaamka maareynta hantida.
Liidashada maareynta hawladeennada					
11.8	Waxaan ogaaney liidashooyinkan soo socda: a) Dib-u-eegista faylasha/galalka hawladeennada ayaa si kastaba ha ahaatee shaaca ka qaaday in ay ka maqan yihiin ama aan lahayn Qiimeynta waxqabadka, Tababarka xil-la-wareegidda iyo faahfaahinnada fasaxa ee Shaqaalaha Joogtada ah. Sidoo kale, waxaan oggaaney xaalado galalka hawladeennada aysan ku jirin Kaararka Aqoonsiga Qaranka (Teestarooyin) ama Baasaboorka Qaranka si loogu aqoonsado shaqaalaha. b) Waxaan oggaaney xaalado shaqaale aysan bixin ogeysiis	Guddiga Shaqaalaha Rayidka ah waa in uu xaqiijiyaa in la joogteeyo galalka shaqaalaha ee hawladeennada. Fayl/Gal kasta waa in uu leeyahay liisto-hubineed jaango'an oo sheegaysa dokumentiyada ugu yar ee loo baahan yahay in ay ku jiraan galka shaqaalaha.	Muhiim ah	La Hirgeliyay	Wax shaqo dheeraad ah looma baahna

Tix	Waxyaabahii La Oggaadey ee Asalka ah	Soo-jeedimada Asalka ah	Mudnaanta	Xaaladda	Tallaabada Dheeraadka ah ee Loo Baahan Yahay
	dad ku filan marka ay iska casilayaan jagooyinkooda. Xeer-nidaamiyayaasha shaqaalaha waxay shaqaalaha uga baahan yihiin in ay bixiyaan ogeysiis bil ah marka ay iscasilayaan.				
La'aanta jaangooyooyinka iyo siyaasadaha IT-ga ee hay'adda oo rasmi ah					
11.9	Dib-u-eegista aan ku sameynay xaaladaha IT-ga ee GSS ayaa daaha ka qaadday in Dowladda aysan lahayn siyaasado iyo habraacyo ICT oo dhammeystiran	Waxaan dowladda kula talineynaa: · In ay tixgeliso dejinta siyaasad IT dhammeystiran oo waafaqsan dhabbetusayaasha IT-ga iyo hawlgallada maalinlaha ee Wasaaradda. Waxaa intaa siidheer, in ay si joogto ah dib-u-eegis ugu sameyso siyaasadaha si ay u noqdaan kuwo iswaafaqsan oo ku habboon dhacdooyinka isbeddelaya. · Siyaasadda IT-ga waa in lagu daraa habraacyada loogu talagalay sameynta qorshayaasha BCP iyo DRP. . · In ay xaqiijiso dhabbetusaha tababar nidaamsan in la diyaariyo si loo suuragaliyo shaqaalaha in lagu hannuuniyo arrimaha IT-ga iyo wax kastoo cusub ee ku soo kordha nidaamka (system-ka).	Muhiim ah	Lama hirgelinin	GSS waa in ay tixgelisaa dejinta siyaasad IT dhammeystiran oo waafaqsan tilmaamaha hawlgallada maalinlaha ah ee Wasaaradda.
Liidashada Kantaroolada aqoonsashada, xaqiijinta iyo oggolaanshaha gelidda ee ICT-ga					
11.10	Gelidda aan la oggolayn ayaa waxay horseedi kartaa saameyn burbur keenta, kantaroolada gelidda	Nidaamka (system) waa in uu adeegsadaa qaybtan ammaanka isla markaana oggolaadaa inta jeer ee la isku dayi karo gelidda aan	Muhiim ah	Lama hirgelinin	GSS waa in ay adeegsato aqoonsashada, xaqiijinta iyo oggolaanshaha gelidda ee ICT-ga isla markaana oggolaataa inta jeer ee la isku dayi karo gelidda aan ansaxa

Tix	Waxyaabahii La Oggaadey ee Asalka ah	Soo-jeedimada Asalka ah	Mudnaanta	Xaaladda	Tallaabada Dheeraadka ah ee Loo Baahan Yahay
	adeegsadaha oo wax-ku-ool ah la'aantoodana hay'adaha waxay noqon karaan dhibbanayaasha hawlo dhibaatooyin keena sida, khiyaano maaliyadeed, iyo weerarro lagu soo qaado sistem-ka oo loo soo marayo diidmada adeegga, weerarrada ayaa gaar ahaan wax u dhimi kara nidaamyada internet-ka. Waxaan oggaaney in ay jiraan arrimahan hoos ku xusan: --La'aanta inta jeer ee la oggol yahay in si aan ansax ahayn/qalad ah la isugu dayo in gudaha loo galo xisaabta ka hor inta aysan xisaabta is-xirmin - sistem-ka xisaabta kama xiro adeegsadaayaasha ka-dib markay galid qalad ah ay dhowr jeer isku dayaan. --Eray-sireedyada (passwords) lagu kaydiyo bogga internet-ka laga adeegsado ayaa dib loogala soo bixi karaa oo la akhrin karaa iyada Qoraal Kaliya (Plain text) ah. Waxaan oggaaney in ay suuragal u tahay adeegsadaayaasha in ay eray-sireedkooda ku kaydiyaan bogga internet-ka lagu adeegsado ka-dib marka ay galaan, tani khatarteeda ayay leedahay maadaama eray-	ansaxa ahayn ka hor inta aan xisaabta ama koontada la xirin si looga hortaggo weerrarada xoogga ah ama isku-dayada lagu jabsanayo. b) Isku-dayo lagu geli karo nidaamka(system) oo la socosho ah waa in la sameeyaa. c) Barnaamijka la dagaalanka fayraska (Antivirus) waa in uu meel dhexe ka maareeyaa maamulaha IT-ga oo eray-sireedna lagu ilaaliyaa. d) Agaasimaha Waaxda IT-ga waa in uu hubiyaa in barnaamijka la dagaalanka fayraska (Antivirus) uu yahay noocii ugu dambeeyay.			ahayn ka hor inta aan xisaabta ama koontada la xirin si looga hortaggo weerrarada xoogga ah ama isku-dayada lagu jabsanayo.

Tix	Waxyaabahii La Oggaadey ee Asalka ah	Soo-jeedimada Asalka ah	Mudnaanta	Xaaladda	Tallaabada Dheeraadka ah ee Loo Baahan Yahay
	sireedka dib loola soo bixi karo isaga oo qoraal kaliya (plain text) ah.				
<i>Xuquuqo wax-ka-beddel oo xad-dhaaf ah ayaa la siiyay Agaasimaha Waaxda IT</i>					
11.11	Waxaan oggaaney in maamulaha ICT-ga uu si buuxda u geli karo dhammaan qaybaha kala duwan ee sistemka iyo in uu awoodo in uu isbeddelo ku sameeyo sida in uu qaladaadka saxo. Si kastaba ha ahaate, hawlahiisa ee sistem-ka ma jiro mas'uul sare oo si joogto ah dib-u-eegis uguma sameeya. Waxaan kaloo oggaaney in aannu jirin oggolaansho heer-labaad ah oo loogu baahan yahay sixitaanno ama wax-ka-beddel kasta ee ay sameyso waaxda IT-ga	Xisaabaadka adeegsadaha ee jira iyo xuquuqaha gelidda waa in dib loo eegaa ugu yaraan sannadkiiba mar si loo oggaado xisaabaadka aan shaqayn iyo xisaabaadka leh mudnaano gaar ah oo xad-dhaafka ah tusaale ahaan, xisaabaadka leh mudnaano gaar ah oo xad-dhaaf ah waxaa ka mid ah: a) a) Xisaab la hawlgeliyay oo loo qoondeeyay la-taliye dibedda ka ah ama shaqaale aan hadda u shaqayn Hay'adda. b) Xisaab la hawlgeliyay oo leh xuquuqo gelin oo doorka iyo mas'uuliyadaha isticmaalaha u baahnayn gelid.	Muhiim ah	Lama hirgelinin	Soo-jeedimada asalka ah waa in la hirgeliyaa. Sarkaalka Ka Mas'uulka ah:
<i>Nusqaamo ka jira Maareynta kantaroolada gelidda adeegsadaha</i>					
11.12	Dib-u-eegisteenna ku aaddan hirgelinta nidaamka Bisan ayaa muujisay waxyaabahan soo socda: a) La'aanta habraac rasmi ah oo lagu ogeysiinayo agaasimaha waaxda IT in uu hawlgelinta ka joojiyo koontooyinka adeegsadaha waqtiga ku habboon ee shaqaalaha shaqada uga tagay iscasilaad	Waxaan ku talinaynaa in: a) Xisaabaadka adeegsadaha la aqoonsaday ee ay iska leeyihiin shaqaalaha shaqada laga joojiyay waa in si degdeg ah hawlgelinta looga joojiyaa. Waxaa intaa dheer, in ay Dowladdu diyaariso, diiwaangeliso oo ansixiso ay habraac jaango'an oo lagu nidaaminayo hannaankan looga noqonayo gelidda adeegsadaha. Marka shaqaale uu hay'adda ka	Muhiim ah	Lama hirgelinin	Soo-jeedimada asalka ah waa in la hirgeliyaa :

Tix	Waxyaabahii La Oggaadey ee Asalka ah	Soo-jeedimada Asalka ah	Mudnaanta	Xaaladda	Tallaabada Dheeraadka ah ee Loo Baahan Yahay
	ama shaqo ka joojin.	tago, Agaasimaha Waaxda ICT waa in waqtigii loo baahnaa lagu wargeliyaa si loo xaqiijiyo in xisaabta adeegsadaha hawl-gelinta laga joojiyo.			
Liidashada kale ee kantaroolka					
11.13	Waxaan ogaanney in ay jiraan xaalado qaybaha Amarka Bixinta Lacagta La Ballanqaadey (CPO) ee loogu talagalay waxaa diyaariyey iyo waxaa ansixiyay aysan saxiixin shaqaalaha kala duwan ee awoodda u leh. Amarka CPOs sidoo kale ma laha sharraxaadda kharashka ay tahay in la bixiyo. Sidoo kale, waxaan ogaanney in dhammaan dokumentiyada taageeraya kharashka sida qaansheegyada iyo fawjarrada rasiidka in aan lagu shaabadeyn "LA BIXIYEY" ama "LA DIIWAANGELIYEY" si loo buriyo dokumentiyada taageerada marka lacag-bixinnada la bixiyo	Waxaan ku talineynaa in la raaco dhabbetusayaasha lacag-bixinta ka hor inta aan la siin wax lacago ah kuwa laga soo iibsado alaabooyinka iyo adeegyada	Muhiim ah	Qayb Ahaan La Hirgeliyay	Dhammaan Amarrada Bixinta Lacagaha La Ballanqaadey (CPO) waxaa buuxin doona Wasaaradaha kharash garaynta, qayb kasta oo ka mid ah CPO si sax ah ayaa loo buuxin doonaa, loo xaqiijin doonaa oo loo ansixin doonaa.